
# Aqoonsiga Ardayda Dugsiga ka Maqan iyo Taageerida ka Gudubka Heerarka Waxbarashada

Xirmo

3




# Buugga tababaraha

Waxaa loo diyaariyey:
Puntland Disability Organizations Network (PDON), Somalia
Disability Aid Foundation (DAF), Somalia
Adventist Development and Relief Agency (ADRA), Somalia
Save the Children, Somalia
Norwegian Association of Disabled
Waxaa diyaariyey:
Enabling Education Network, September 2022

Disability Aid Foundation DAF
ADRA
Save the Children
Inclusive Learning Approach
NAD - The Norwegian Association of Disabled
EENET

[Sharraxaada muuqaalka: Wiil xiran dharka dugsiga oo boorso dhabarka ku wata oo koraya jaranjaro. Erayga ‘Dugsi Sare’ ayaa lagu qoray xagga sare ee jaranjarada. Saddex caruur ah ayaa taagan xagga hoose ee jaranjarada. Caruurta waxaa ka mid ah cunug maro guntan oo kor u eegaya wiilka. Gabar cunug dhabarka ku sida oo u eg mid caraysan iyo wiil xiran ookiyaale madow oo ul sita oo dhinaca kale u socda. Eragy ‘Dugsi hoose’ ayaa ku qoran xagga hoose ee jaran jarada.]

Buugaan waxaa laga heli karaa creative Common licence attribution. Wixii xog dheeraad ah, booqo: https://creativecommons.org/licenses/by-nc-sa/4.0/legalcode

# Tusmo

Hordhac ........................................................................................................ 5

Xiisadda 1: Hordhac ku saabsan ardayda dugsiga ka maqan ............................ 7

Xisadda 2:  Wax ka qabashada mushkiladaha caruurta dugsiyada ka reebay, iyadoo la adeegsanayo siyaasada ku salaysan xaquuqda ................................ 15

Xisadda 3: Maxay caruurtu dugsiyada uga maqan yihiin Soomaaliya? ............ 19

Xisada 4: Maxay tahay ka gudbida heerka waxbarashada? Maxay tahay sababta ay muhiim u tahay? ........................................................................................ 28

Xisadda 5: Ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay waxa uu ka bilowdaa guriga ...................................................................................... 33

Xisadda 5: bogga 15: barnaamijka quudinta dugsiyada ................................... 48

Xisadda 6: Kaalinta Ururada Dadka Naafada ee ogaanshaha caruurta dugsiyada ka maqan iyo taageerida ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay ............................................................................................................ 49

Agabka 1.1: Qeexidda arrimaha: Waa kuwee ardayda dugsiyada ka maqan? Maxay dugsiyada uga maqan yihiin? ............................................................ 62

Agbaka 1.2: Caqabadaha isku-xiran ............................................................ 71

Agabka 1.3a: Dulmar ku saabsan caqabadaha ardayda dugsiyada ka horjoogsada ............................................................................................... 72

Agabka1.3b: Sawirada caqabadaha hortaagan waxbarashada ardayda ........... 73

Agabka 2.1: Sawirka siyaasada .................................................................... 105

Agabka 2.2: Siyaasada xaquuqda waxbarashada ee Soomaaliya .................... 106

Agabka 2.2a: Dawlada Faderaalka ah ee Soomaaliya, Dastuurka ku meel gaarka ah ee 2012(qaybaha muhiimka ah) ........................................................ 106

Resource 2.2b: United Nations Convention on the Rights of Persons with Disabilities (ratified by the federal government of Somalia on 6 August 2019). ........................................................................................................ 108

Agabka 3.1: Dheemanta 9 kaar – Caqabahada hortaagan ardayda dugsiyada dhigata ........................................................................................................ 110

Agabka 3.2: Dhacdooyin ku saabsan ardayda dugsiyada ka maqan ............... 111

Agabka 3.3: Istiraajiyadaha iyo xalalka ogaanshaha iyo meelaha ay joogaan ardayda dugsiyada ka maqan ........................................................................ 114

Resource 4.1: EENET's 'Qoraalka filim ka kusaabsan kala guurka loo dhanyahay. Maxay tahay sabanta xilliga kala guurka uu u yahay arrin muhiim ah waxbrashada loodhanyahay?.................................................................115

Sideed gacan uga geysan kartaa in la siiwado taageeradaan?.........................116

Agabka 4.2: Waa maxay ka gudubka heerka waxbarashada?..........................117

Agabka 4.3: Maxay ardaydu ka yiraahdeen ka gudubka heerka waxbarashada .............................................................................................................121

Agabka 5.2a: Ka gudubka heerka waxabarashada loo dhan yahay waxa uu ka bilowdaa guriga. .........................................................................................122

Agabka 5.2b: Xirmo saddex sawir ah ee istiraajiyadaha ................................124

Agabka 5.3a: Waxyaabaha saameynta ku yeesha kala guurka waxbarasha dugsiga ka hor...........................................................................................130

Agabka 5.3b: Qoraalka Filimka EENET ee 'Dugsiga ka hor' .............................131

Gaban-qabsi 6.1: Adeegsiga siyaasada si aad saameyn ugu yeelato is bedelka .............................................................................................................134

Agabka 6.2a: Sheekada Hodan....................................................................137

Agabka 6.2b: Sheekada Yaasmiin ................................................................138

Agabka 6.2: Mabaa'diida muhiimka ah ee habsami u socod siinta ka gudubka heerka waxbarashada.........................................................................139

Agabka 6.3a: Kaararka Caqabadaha............................................................140

Agabka 6.3b: Kaararka Istiraatiijiayda ..........................................................142

# Hordhac

Xirmadani waxa ay leedahay labo ujeeddo oo aasaasi ah.

Ugu horeyn, waxa sawir guud oo ku saabsan eray-bixinta arrimaha la xiriira ardayda dugsiyada ka maqan ee heer caalami iyo heer deegaan u gudbinaysaa Ururada Dadka Naafada ah iyo danwadaagta kale sida Xafiiska Waxbarashada Degmada, Bulshada, Ururada Maxalliga ah iyo waalidiinta. Waxa ay daaha ka rogaysaa caqabadaha iyo arrimaha la xiriira sababta ay ardayda gaarkood dugsiyada uga maqan yihiin, iyo silsilada arrimaha sababay iyo natiiyada ka dhalatay dugsiyada oo ay ka maqan yihiin. Xirmadani waxa ay ka caawinaysaa ka-qayb-galayaasha in ay aqoonsadaan oo ay dib u milicsdaan oo ka doodaan caqabadaha waxbarashada ardayda iyo fahanka mushkiladaha ardayda dugsiga ka maqan iyadoo la eegayo qodobada ku cad xaquuqda bi'aadanka.

Ujeeddada labaad ee muhiimka ah ee xirmada waa in ay kor u qaado habka waxtarka leh ee ay dugsiyada ku hubinayaan in ardayda dugsiyada ka maqan iyo ardayda kale in ay si sahlan oo waxtar leh ay u helaan taageerada ay u baahan yihiin marka ay dugsiga ku soo biirayaan. Sida badan, ka gudubka heerka waxbarashadu waxa ay la xiriirtaa adayda dugsiga ka gudbaya, ardayda dugsiga imanaya iyo ardayda dhawaan dugsiga soo galay. Inta badan ardayda dugsiga waxa ay ka gudbaan waqti qorsheysan, tusaale ahaan, guriga ilaa iyo xannaanada caruurta, xannaanada caruurta ilaa dugsiga hoose/dhexe, dugsiga hoose/dhexe ilaa dugsiga sare, dugsiga sare ilaa heer jaamacadeed ama shaqo. Si kastaba ha ahaatee, arday badan ayaa dugsiga kabadasha ama ku soo biira waqti aan ahayn xilliyadii la qorsheeyey. Ardaydaas waxaa ka mid ah:

- Ardayda dugsiyada aan dhigan ee gaaray da'da waxbarashada oo aan weligood dugsi dhigan ama ay ku adkaatay inay dugsiga dhigtaan ama ka haray dugsiga. Arrintaas waxa ay yeelan kartaa sababo badan. Tusaale ahaan:
  - Dhaqaale daro
  - Dugiga oo meel fog ku yaala
  - Horey oo loo guursado
  - Baahida dheeraadka ee ardayda oo aan dugsigu dabooli karin
  - Waalidiinta ama dadka caruurta haya oo aan aad u fahmin muhiimada ay leedahay waxbarashadu
- Ardayda ay qoysaskoodu hayaamaan/safraan (Tusaale ahaan, in ay wadan kale u guuraan, in ay tuulooyinka ka soo guuraan oo ay tagaan magaalooyinka, ama reer miyiga u guura meel daaq leh).

- Ardayda lagu khasbay inay guuraan (Tusaale ahaan, dadka abaaraha ka barakaca iyo dadka colaaduhu ay barakiciyeen ama u qaxay dal kale).
- Ardayda dugsiyada laga faquuqay.

Waa arrin muhiim ah in la ogaado in aysan jirin sabab kaliya oo ay ardaydu dugsiga uga maqan yihiin ama ka gudubka heerka waxbarashada ka dhigaysa mid loo wada dhan yahay. Taasni waa sababta arday kasta oo dugsiga ka maqan u yeeshay waaya aragnimo gaar ah ka hor dugsi inta uusan iman ama intii uu dugsiga dhiganayey. Sidaas darteed waxaa loo baahan yahay in dugsi kasta iyo bulshadiisu ay noqdaan kuwo dabacsan oo siyaabo kala duwan wax u xaliya oo gaara xal ku haboon xaaladooda.

Qorshaha gudbinta casharada xirmadaan waa in si dhow loola xiriirayaa tababarada xirmooyinkii taxanaha ahaa ee Ururada Dadka Naafada ah. Sidoo kale waa in lagu xiraa tabarada ay macalimiintu heleen ee barnaamijka tababarka macallimiinta ee waxbarashada loo wada dhan yahay iyo istiraajiyada ay dugsiyada tijaabada sameeyeen si loo ogaado ardayda dusgiyada ka maqan iyo taageerida heer ka gubdid loo wada dhan yahay.

## Muddada Tababarka

Tababaruhu waa in uu tababarkan u fuliyaa si ku haboon xaaladda deegaanka iyo waqtiga tababarka loo heli karo. Tababaruha ayaa go’aan ka gaaraya in uusan adeegsan hawl-qabadyada oo dhan ama uu soo koobo hawl-qabadyada haddii waqtigu yar yahay ama waqti dheer siiyo hawl-qadab marka ay ka-qayb-galayaashu u baahan yihiin taageero dheeraad ah si ay u fahmaan cashar gaar ah.

Marka la adeegsanayo hawl-qabadyada oo dhan, iyada oo aan waqtiga la soo gaarin ama aan la kordhin, xirmadani waxa qiyaas ahaan u baahan tahay 18 saacadood, taas oo la fulin karo 3 ilaa 4 maalmood, iyada oo ku xiran tahay sida loo arko inay fiican tahay tirada maalmaha, tirada iyo intuu la ekaanayo waqtiyada la nasanayo (break) iyo wixii lamida.

# Xiisadda 1: Hordhac ku saabsan ardayda dugsiga ka maqan

| **Fariinta muhiimka ah** |
|---|
| Arday badan ayaan dugsiyada dhigan dunida oo dhan. Kuwaas waxaa loo yaqaan ardayda dugsiyada ka maqan. Waxyaabo badan ayaa ka hor joogsaday in ay dugsiyada dhigtaan sida fogaanta dugsiga, faqriga, colaadaha ama masiibooyinka. |

## Xogta aasaasiga ah ee fududeeyaha:

**Dunida:** "264 milyan oo caruur iyo dhalinyaro ah ayaan maanta dugsiyda dhigan..."[1]
**Soomaaliya:** "Qiyaas ahaan 4.2 milyan oo caruurta gaartay da'da dugsiga ayaa dugsiyada ka maqan, taas oo ay badankoodu ku nool yihiin koonfurta iyo gobolada dhexe ee Soomaaliya"[2]

Ardayda dugsiyada ka maqan waxaa ka mid ah ardayda aan weligood dugsi dhigan iyo ardayda dugsiyada ka haray. UNESCO waxa ay ogaatay saddex nooc oo ah ardayda dugsiyada ka maqan:

- Adayda dugsiga da'da weyn ku bilaabay
- Ardayda dugsiyada goor hore ka hara
- Ardayda aan weligood dugsi dhigan.[3]

Waxa jira siyaabo kale duwan oo loo kooxayn karo caqabadaha ay ardaydu dugsiyada uga maqan yihiin. Kooxaha qaarkood waa isku soo noqonayaan ama way isku xiran yihiin. Tusaale ahaan, haddii arday dugsiga uga maqan yahay qoyskiisa oo meel kale u guuray oowgeed, geediga/guuritaanka waxaa loo aqoonsanayaa caqadab, hase yeeshee, sababta keentay guuritaanka waxa ay noqon kartaa faqri ama colaad, sidaas darteed waa labo caqabadood oo isku xiran.

Tababaruhu waa in uu akhriyaa **Agabka 1.1** ka hor inta uusan bilaabin xisadan. **Agabka 1.1** waxa uu bixinayaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan caqabadaha kala duwan ee sababa in ay ardaydu dugsiyada ka maqnaadaan,

[1] UNESCO (2017) *Accountability in Education. Meeting our Commitments. Global Education Monitoring Report, 2017/18*, p.i. http://unesdoc.unesco.org/images/0025/002593/259338e.pdf
[2] https://reliefweb.int/report/somalia/2022-somalia-humanitarian-needs-overview
[3] Ibid, p.27

kuwaas oo waxtar kuu leh oo ay suurogal tahay in aad adeegsato xisada oo dhan.

### Xisadan ka-qayb-galayaashu waxa ay:

- ü Dib u milicsan doonaan sababaha ay ardaydu dugsiyada kaga maqan yihiin
- ü Daaha ka rogi doonaan sababaha isku xiran ee keenay in ay ardaydu dugsiyada ka maqnaadaan
- ü Eegi doonaan caqabadaha gaarka ah ee sababay in ay ardaydu dugsiyada ka maqnaadaan

## Hawl-qabadka 1.1: Caqabaha ka jira Dugsiga

1 45 daqiiqo

Hawl-qabadkan waxa uu ka-qayb-galayaasha ka caawinayaa in ay dib u milicsadaan oo ka doodaan caqabadaha ku gadaaman dugsi dhigashadag. Hawl-qabadku waa in uu kor u qaadaa fahanka ka-qayb-galayaasha ee la xiriirta arrimahaas.

### Tilmaamo

- Xasuusi ka-qayb-galayaashu in ay dib u fiiriyaan caqabadaha waxbarashada loo wadan yahay ee la soo sheegay xilligii tababarradii kale. Caqabadaha waxbarashada loo wada dhan yahay waa caqabadaha raadka ku leh joogitaanka ardayda ee dugsiga, ka-qayb-galkooda hab socodka barashada iyo guusha ay barashada ka gaaraan.

- Weydii ka-qayb-galayaasha in ay xasuusan karaan waxa ay caqabadahaasi yihiin. (Waa in ay awoodaan in ay sheegaan tusaalooyin la xiriira caqabadaha deegaanka, agabka, hab-dhaqanka, iyo siyaasada ).

- U sheeg ka-qayb galayaasha in xirmada tababarkan lagu eegi doono caqabadaha sababay in ay ardaydu dugsiyada ka maqnaadaan- in kasta oo dhab ahaan ay la mid yihiin caqabadaha waxbarashada loo wada dhan yahay.

- Weydii ka-qayb-galayaasha in ay u shaqeeyaan koox ahaan. Koox kasta waa in ay leedahay xog qore si loo qoro doodaha.

**Power Point** **Xisadda 1: Bogga1: Horudhaca hawl-wabadka 1.1**

- U sheeg kooxahu in ay ka doodaan oo qoraan inta suurogalka ah ee caqabadaha sababay in ay ardaydu dugsiyada ka maqnaadaan.

- Caqabad kasta, ama sabab kasta oo ardaydu ay dugsiga kaga maqan yihiin waa in ay kooxuhu ka fekeraan tusaalooyin dhab ah. Haddii uu faqrigu ama naafonimadu ka mid yihiin caqabadaha, ka-qayb-galayaashu waa in ay ka fekeraan tusaalooyin gaar ah ee mid kasta oo caqabadaha ka mid ah (eeg shaxdada hoose ama idinkoo dhan hal tusaale wada sameeya.

| Caqabadaha | Tusaale |
|---|---|
| Faqriga | In aysan ardaydu iska bixiyaan dharka ardayda ama lacagta dugsiga |
| Fikrad khaldan oo la xiriira naafanimada | Waalidka ceeb ayey ku tahay oo waxa ay caruurta naafada ah ku qariyaan guriga |

- 15 daqiiqo ka dib, weydii koox kasta falcelinta ama ay jawaabtooda ku qoraan warqad/sabuurad. Marka la sheego caqabad gaar ah, kooxaha kale waa in ay sheegaan caqabo kale (tusaale, in aan la soo celin caqabad horey loo sheegay). Koox kasta waa in ay sheegaan tusaalooyin dhab ah si ay u muujiyaan jawaabahooda.

- Falcelinta kooxaha waa in warqad lagu qoro oo ay ka qayb galayaashu u adeegsadaan tixraac  inta ay socdaan hawl-qabadyadaan iyo xisada soo socota

## Xogta Tababaraha

Tixraac qaar ka mid ah qodobada soo socda inta ay doodu socoto ama dooda ka dib. Cilmi baarista waxbarashada loo wada dhan yahay ee Soomaaliya ee 2020-2021 oo ku saabsanayd Ururada Dadka Naafada ah iyo Tababarka Macallimiinta ee Waxbarashada loo wada dhan yahay ee barnaamijka TOFI waxa ay heshay sababo badan oo keenay in arydaydu dugsiyada ka maqan yihiin. Waxaa ka mid ah:

- Abaaraha;
- Barakaca ay sababeen colaadaha iyo masiibooyinka;
- Guurka deg-degaa;
- fikrad laga haysto ardayda baahida dheeraadka ah leh, jinsiga, ama bulsho;

- Xanuunka, naafonimada iyo adeeg caafimaad oo aan jirin;
- Maandooriyaasha;
- •Dugsiga oo ku yaal meel ka fog deegaanka;
- Cago-juglayn;
- Deegaanka oo ay cabsi ka jirto ama dugsiga oo aan si nabadgalyo ah loogu safri karin;
- Caafimaadka oo liita;
- Reer guuraanimo ama hayb sooc ka jira adeega caafimaadka iyo waxbarashada
- Faqrinimo;
- Caruurta oo shaqaysa

Si cad u sheeg in ardayda dugsiga ka maqan ay yihiin:

- Arday aan weligood dugsi dhigan
- Arday dugsiga ka hartay
- Arday dugsiga mar aada marna ka maqnaada

## Hawl-qabad 1.2: Ciyaarta "laakiin, sababta.."

1 45 daqiiqo

Hawl-qabadkan waxa uu ka-qayb-galayaasha ka caawinayaa in ay si qoto dheer looga fekero sababaha iyo naatiijada ka dhalata ee keentay in ardaydu dugsiga ka maqnaadaan.

### Tilmaan

Power Point **Xisada 1: bogga 2: Ciyaarta "laakiin, sababta,.."**

- U sheeg ka-qayb-galayaasha qodobada soo socda:

  "Sheekadani waxa ay ku saabsan tahay gabar sideed jir oo la yiraahdo Maryan. Maryan waxa ay ku nooshahay dhul miyi ah oo go'doonsan. Tuulada ay Maryan ku nooshahay ma laha dugsi, sidaas darteed waligeed ma dhigan dugsi. Maxay tahay sababta ay Maryan dugsiga uga maqan tahay?"

- Ka dibna fududee dood, taas oo ku dhiirigelinaysa ka qayb galayaasha in ay ka fekeraan arrimaha ku hareersyan sababta ay Maryan dugsiga uga maqan tahay. Tusaale ahaan:

  Jawaabta ka-qayb-galaha: "Sababtu waa in aysan dugsi lahayn tuuladu."

  Jawaabta Tababaraha: "**Laakiin maxay tahay sababta,** aysan dugsi u lahayn tuuladu?"

  Jawaabta ka-qayb-galaha: "Waxa suurogal ah in tuuladu ay faqri tahay"

  Jawaabta Tababaraha: "**Laakiin maxay tahay sababta** ay tuuladu faqri u tahay?"

  Jawaabta ka-qayb-galaha: "Sababtu waa tuulada oo ku taala meel fog oo buuralay ah."

  Jawaabta Tabaraha: "**Laakiin maxay tahay sababta** ay meesha fog ee buuralayda ah ay faqri u tahay?"

- Sii wad su'aalahaan, si ay ka-qayb-galaashu si qoto dheer ugu fekeraan arrimaha la xiriira bulshada, deegaanka iyo siyaasda ee sababay in Maryan ka maqnaato dugsiga.

- Fikradaha ku qor warqad ama sabuurada. Ku dhiirigeli ka-qayb-galayaasha in ay keenaan sababaha suurogalka ah ee ay Maryan dugsiga uga maqan tahay. Arrintani waxa ay ka-qayb-galayaashada ka caawinaysaa in ay si qoto dheer ugu fiirsadaan sababaha qarsoon ee adag ee isku-xiran ee Maryan ka reebay dugsiga.

Power Point **Xisadda 1: boggoga 3 iyo 4: Caqabadaha isku-xiran ee ardayda ay dugsiga uga maqan yihiin**

- U sharax ka-qayb-galayaasha:
  "Ciyaarta, laakiin sababta waa hawl-qabad inaga caawinaya in aan falanqeyno dhibaatooyinka adag ee ay keenaan sababo kala duwan. Aqoonsiga sababta xididka u ah dhibaatada iyo fahanka sida ay isugu xiran yihiin waxa ay inaga caawinaysaa in aan diyaarino xalalka. Tani waa mid ka mid ah qaababka fekerka muhiimka ah.

Ciyaartani waxa ay, noo diyaarinaysaa inaan si dhaw maadaama aan eegayno caqabado kala duwan ee keenay in ay ardaydu dugsiga ka maqnaadaan"

- Tus bogga 4(tuusaale muujinaya isku-xirnaanta caqabadaha) oo sii **Agabka 1.2** oo u sharax in kasta oo ay yihiin kuwo fudud, haddana sabab kasta oo keentay in ardaydu ay dugsiyada uga maqnaadaan waxa ay leedahay qodobo kala duwan oo sababay caqabadaas.

  "Tusaale ahaan, tirada yar ee macallimiinta tababaran waxa ay keeni kartaa in dugsigu haysto arday tiro yar, macallimiin aan tababarayn iyo fasalo tiro badan. Arritaas waxaa ka dhalanaya in ay ardaydu helaan waxbarasho tayo aan lahayn. Arrintani waxa ay sababi kartaa in ay ardaydu dugsiyada ka haraan, madaama aysan wax ka baranayn dugsiyada ama in waalidku/dadka caruurta haya ay dareemaan in caruurta oo dugsiga loo diro aysan wax macne ah samaynayn. Waxa kale oo suurogal ah in dugsigu uu ka fog yahay deegaanka caruurta, taas oo raad ku yeelanaysa imaanshaha dugsiga."

  Weydii ka-qayb-galayaasha falcelin ku saabsan cayaarta.

- U sheeg ka-qayb-galayaasha in ay qof kasta uu haysto 5 daqiiqo uu ku fekero oo uu sameeyo ciyaarta "Laakiin, sababta..", isaga oo tusaale ahaan u adeegsanaya sheekada Maryan. Waxa ay samayn karaan qoraal haddii ay u baahdaan.
- Ka dibna, u qaybi ka-qayb-galayaasha **labo-labo** oo u sheeg in ay wada ciyaaraan "laakiin, sababta". Ciyaartani waxa ay qaadanaysaa 10 daqiiqo.

- Fududee 5 daqiiqo oo dood guud ah.

## Hawl-qabad 1.3: Qeexida ardayda dugsiyada ka maqan- Caqabadaha iyo sababaha

1 30 Daqiiqo

### Tilmaamaha

- U sharax in ay jiraan dhowr caqabadood oo waaweyn oo horjoogsi ku ah waxbarashada ardayda, kuwaas oo yeelan kara caqabado gaar ah. Caqabadaha waaweyn waxa loo qaybin karaa saddex qaybood:

| Deegaanka iyo agabka | Qaab fikirka iyo aaminsanaanta | Siyaasada iyo qaab dhaqanka |
|---|---|---|
| | | |

- 3 warqadood oo kala duwan ku qor shaxda sare, oo hubi in mid kasta uu leeyahay meel lagu qori karo tusaale.

- U qayb ka-qayb-galayaasha kooxo ka kooban 4-5 qof. Koox kasta sii nuqul ka mid ah **Agabka 1.3a: caqabadaha ardayda dugsiya ka horjoogsada oo kooban,** kuwaas oo muujinaya kooxaha caqabadaha ardayda ka horjoogsada dugsiyada iyo tusaalooyin ku saabsan caqabadaha gaarka ah.

- Kooxaha la wadaag sawirada **Agabka 1.3b.** U sheeg ka-qayb-galayaasha in agab kasta uu u taagan yahay caqab ardayda ka horjoogsata dugsiga.

**Power Point** **Xisadda 1: Bogga 5: Kooxaynta Caqabadaha**

- U sheeg kooxaha in ay eegaan gacan-qabsiga (erayo iyo sawiro) si ay dib ugu tixraacaan caqabadihii lagu soo taxay **Hawl-qabadka 1.1** (Tus magacyada caqabadaha lagu soo qoray warqada intii lagu guda jiray hawl-qabadka) oo ka dooda su'aalaha hoose:

  - **Caqabad kastaa qeybtee bey hoostageysaa**
  - **Ma sheegi kartaa tusaale (tusaale dhab ah)?**
- 15 daqiiqo ka dib, kooxaha u sheeg inay qoraan fikradahooda oo ay ku dhejiyaan warqad derbiga ku dhegan ee kooxaha kala duwan ee caqabadaha.
- Fududee dood guud oo hubi in koox kasta laga hadlay

- Fududee dood guud oo hubi in qeyb kasta la dhamaystiray inta lagu jiray dooda. Keen tusaalooyin dhab ah, kuwaas oo ka iman kara khibrada ka-qayb-galayaasha ama tababaraha iyo fikradaha ku jira **Agabka 1.1**.

- Tilmaan caqabadaha ka inay ka hoos muuqan karaan dhamaan qeybaha taasoo, muujinaysa sida ay isugu xiran yihiin.



Tababarayaasha dalka Simbaabwi oo did u eegaya kooxaha caqabadaha

[Sharraxaada muuqaalka: Warqad ku dhegan derbiga. Qaar waxaa lagu qoray magacyada qeybaha carqabada (Tusaale ahaan, degaanka, hab-dhaqan). Hoosta waxa ku qoran warqadaha ay caqabadaha ku qoran yihiin. Labo nin iyo haweenay ayaa fiirinaya magacyada derbiga ku qoran.]

- Tababaraha waxaa suurogal ah in uu soo bandhigo boggoga (6-8) oo ku salaysan faahfaahinta lagu soo bandhigay **Agabka 1.1**, taas oo ku xiran sida casharada loo dhamaystiray intii ay socotay doodu.

**Power Point**

**xiisada 1: boggoga 6-8: Kooxaha caqabadaha ee ardayda ka horjoogsaday dugsiga oo masawiro wata**

- Hoosta ka xariiq in hawl-qabadkan uu eegayo arrimaha la xiriira ardayda dugsiyada ka maqan ee aduunka, kaas oo ka caawinaya ka-qayb-galayaasha inay bartaan qodobo badan oo ardayda ka hor taagan in ay dugsiyada dhigtaan dunida oo dhan. Dhammaadka tababarka waxaa si dhow loo eegi doonaa arrimaha la xiriira Soomaaliya. In la fahmo xaaladda dunida waxa ay waxtar u leedahay marka aan doonayno in aan si wanaagsan u fahano xaaladda deegaankeena.

# Xisadda 2: Wax ka qabashada mushkiladaha caruurta dugsiyada ka reebay, iyadoo la adeegsanayo siyaasada ku salaysan xaquuqda

**Fariin muhiim ah**

Caqabado badan ayaa ardayda dugsiga ka hor joogsada. Soomaaliya, sida dalal badan oo dunida ka jira, caruurta oo dhan waxa ay xaq u leeyihiin waxbarasho. Waa arrin muhiim ah in la fahmo siyaasadaha jira ee ilaalinaya xaquuqda waxbarasho ee caruurta. Siyaasadahaas waxaa loo adeegsan karaa si loogu qareemo xaquuqda waxbarasho ee caruurta dugsiyada ka maqan. Si loogu adeegsado si waxtar leh waxaan u baahanahay in aan EEGNO waxa ay oranayaan oo aan ka fekerno sida aan si wanaagsan ugu adeegsan karno.

## Xogta aasaasiga ah ee fududeeyaha

- Xisadii hore waxay ay ka caawisay ka-qayb-galayaasha in ay fahmaan oo dib u milicsadaan caqabadaha ardayda ka hor joogsada dugsiga. Caqabadahaasi waxa ay u baahan yihiin in laga gudbo/xaliyo.
- Tilaabada ugu horeysa ee ugu muhiimsan waa in la fahmo in helida waxbarashadu ay xaq tahay oo uu Soomaaliya ka jiro nidaamka xaquuqda bini aadamka oo dhowraya xaqa waxbarashada.
- Hase yeshee ma aha mid ku filan in mushkilada ardayda dugsiyada ka hortaagan loo fahamo mid dhaawacaysa in xaqa caruurtu u leeyihiin waxbarashada. Waxaa loo baahan yahay in aan ka fekerno sida aan nidaamka xaquuqda bini aadamka ugu adeegsan lahayn mid u qareema xaquuqda waxbarasho ee caruurta dugsiyada ka maqan.
- Si aan si wanaagsan ugu adeegsayo nidaamka xaquuqda bini aadanka, waxaa loo baahan yahay in aan si qoto dheer u eegno muhiimada ay leeyihiin waxa ay siyaasadu sheegayso.

## Xisaddan ka-qaybgalayaashu waxa ay:

ü Ka fekeri doonaan waxa ay siyaasadu tahay iyo qaababkeeda kala duwan ee ay noqon karto.

ü Daaaha ka qaadi doonaan saddex siyaasadood oo ka jira Soomaaliya oo muhiim u ah dhowrista xaquuqda waxbarashada caruurta.

## Hawl-qabad 2.1: Maxay tahay siyaasad?

1 30 daqiiqo

### Tilmaamo

- U sheeg ka-qayb-galayaasha in ay labo-labo isu qaybiyaan.

**Power Point** **Xisadda 2: Maxay tahay siyaasadu?**

- Tus **Soobandhiga xisadda 2 bogga 1**. U sheeg ka-qayb-galayaasha inay ka doodaan su'aalaha ka muuqda powerpoint, **Maxay tahay siyaasad?** Sii 10 daqiiqo oo ay ku doodaan.

- Hadda tus **Soobandhigigada Xisadda 2 ee boggaga 2 - 3**. U qaybi labo kasta nuqul ah **Agabka 2.1: sawirka siyaasadaha** oo weydii in ay eegaan mid kasta oo ka mid ah 3-da sawir oo ay ka doodaan su'aalahaan:
    - **Sawirkee baa ina tusinaya siyaasada?**
    - **Maxaad sidaas u tiri?**
    - **Ma jiraan sawiro aan ku saabsanayn siyaasada?**
    - **Maxaad sidaas u tiri?**

- 10 daqiiqo sii si ay uga doodaan 3-da sawir. Xasuusi ka-qayb-galaaysha in ay kor u akhriyaan sharaxaada sawirka, haddii uu jiro qof aan si sax u arki karain sawirada.
- Si guud u samee faalo iyo falcelin
- Tus **Soobandhigida boggoga 4-5** oo ka hadal qodobada ugu muhiimsan

**Siyaasaduhu waxa ay yeelan karaan qaabab fara badan**

- ü Siyaasada waxa ay noqon kartaa tiro mabaadii ah oo ay leedahay koox dad ah ama urur (tusaale ahaan, siyaasada dugsi ee ku saabsan macalinka maqnaanshihiisa ama xeerka dhalinyarada)
- ü Siyaasada waxa ay noqon kartaa istiraajiyadaha qeexaya waxa ay dawladu qorshayso si ay is bedel u samayso (tusaale ahaan, siyaasada waxbarashada loo wada dhan yahay)
- ü Siyaasadu waxa ay noqon kartaa xeer, kaas oo hagaya nidaamka sharciga ee dalka (tusaale ahaan, xeerka dhowrista faquuqa/hayb sooca).
- ü Siyaasaduhu waxa ay ka shaqayn kartaa heerar kala duwan (tusaale ahaan, waxa ay hagi karaan sida dugsigu u shaqeeyo ama waxa ay hagi

karaan sida ay u shaqeeyaan wadamo kala duwan, sida axdiga Qaramada Midowbay ee xaquuqda dadka naafada ah)

- ü Siyaasaduhu waxa ay noqon karaan mid leh yool waqti gaaban, dhexdhexaad ah iyo mid waqti dheer.
- ü Siyaasadaha aan mar kasta akhrino waxa ay leeyihiin taariikh- cida laga qayb geliyey samaynta siyaasada, in ay jiraan arrimo aan dadku isku raacin iyo sida ay dadku ugu heshiiyeen waxa ay siyaasadu sheegayso.

Sidaas darteed, marka aan eegno siyaasada, waxaan mar kasta u baahanahay in aan EEGNO oo si taxadar leh uga FEKERNO waxa ay siyaasadu ku saabsan tahay.

## Hawl-qabadka 2.2: Falanqaynta siyaasadaha ku saabsan xaquuqda waxbarashada ee ardayda oo dhan

1 60 daqiiqo

### Tilmaamo

- U sheeg ka-qayb-galyaashu in ay isku qaybiyaan saddex kooxood. Koox kasta sii mid ka mid ah siyaasada ku jira **Agabka 2.2: Siyaasadaha ku saabsadn xaquuqda waxbarashada ee Soomaaliya** (Koox kasta waa in ay heshaa siyaasad gaar ah)

- **Soobandhig powerpoint Xisadda 2, bogga 6** oo akhri tilmaamaha ku qoran bogga:

**Power Point** **Xisadda 2: bogga 6: Tilmaamaha hawl-qabadka 2.2**

Si taxadar leh u akhri qayb ka mid ah siyaasada lagu siiyey. Haddii ay jiraan dad kooxda ka mid ah oo aan wax akhriyi karin, hubi in qof kooxda ka mid ah uu akhriyo oo sharaxo waxa ay siyaadadu sheegayso. Ka dibna koox ahaan uga dooda su'aalaha soo socda. Mid ka mid ah kooxda ayaa xog-hayn noqonaya oo qoraya waxa ay kooxdu ka doodo.

- ü Maxay siyaasadu ka sheegaysaa xaquuqda waxbarashada?
- ü Ka feker bulshadaada iyo caruurta aan dugsiyada dhigan:
  - **Maxay yihiin caqabadaha ka dhigaya mid adag in la fuliyo xaquuqda waxbarashada ee caruurta dugsiyada ka maqan?**

- **Ma jiraan wax ay bulshadaadu ku caawin karaan xaquuqda waxbarashada ee caruurta dugsiyada ka maqan?**

· 30 daqiiqo ha kaga doodeen su'aalahaas.

· U sheeg koox kasta in ay kooxaha oo dhan uga war bixiyaan doodooda (koox kasta sii 5 daqiiqo)

· Weydii haddii uu jiro qof doonaya in uu su'aal weydiiyo kooxaha ama uu doonayo in uu faalo bixiyo:
  - o Ma adag tahay in siyaasada la eego oo laga fekero?
  - o Ma jiraan siyaasado kale oo ay dadku ka fekeri karaan muhiimada ay u leeyihiin dhowrista xaquuqda waxbarashada caruurta dugsiyada ka maqan? (ka-qayb-galayaasha waxa suurogal ah in ay sheegaan: axdiga xaquuqda caruurta, qabyo-qoraalka xeerka xaquuqda caruurta, xeerka waxbarashada 2021; siyaasada waxbarashada qaranka ee 2020, Waarida Yoolasha Horumarinta (SDG), ama siyaasado kale.)

**Xogta tababaraha**

Hawl-qabadkani waxa uu ku saabsan yahay **eegista oo in si qoto dheer looga fekero siyaasadaha** oo laga fekero maxaa caqabado lagala kulmi karaa fulintooda. Hawl-qabadkan kuma saabsana waxa ay siyaasad kasta ka kooban tahay, mana jirto jawaab 'sax ah' ama 'khalad ah' oo ku saabsan waxa ay siyaasadu sheegayso ama aysan sheegin. Isku day in aad soo koobto qodobada u ugu muhiimsan ee dooda ka soo baxay, kuwaas oo ku saabsan falanqaynta dooda iyo ka fekerka caqbadaha lagala kulmi karo fulinta siyaasada.

Caqabadaha suurogal noqon kara waxaa kamida:
- Afka lagu qorey siyaasada oo mar marka qaar noqon kara mid adag oo aan loo fahmi karin sicad, taas oo mid adag ka dhigaysa in loo hirgaliyo siyaasada si fiican. Waa arrin muhiim ah in aan ka wada doodno waxa siyaasda ku jira iyo waxa aan u malaynayno in loola jeedo.
- Haddii siyaasadu tahay mid wanaagsan oo sheegaysa wax wanaagsan, haddana waxaa jira caqabado hor taagan in siyaasada si wanaagsan loo fuliyo. Runtii waa arrin muhiim u ah fulinta siyaasada in laga fekero caqabadaha jira ee diidaya in loo fuliyo si fiican.

· U sheeg ka-qayb-galayaasha in gadaal looga doodi doono sida aan u adeegsan karno siyaasadaha si loogu qareemo xaquuqda caruurta dugsiyada ka maqan.

# Xisadda 3: Maxay caruurtu dugsiyada uga maqan yihiin Soomaaliya?

## Xogta aasaasiga ah ee fududeeyaha

Marka la eego ardayda tiro badan oo dugsiyada ka maqan, casharkani waxa uu ka-qayb-galayaasha ka caawinayaa in ay si gaar ah uga fekeraan waxyaabaha ku saabsan ardayda dugsiyada ka maqan ee Soomaaliya. Soomaaliya waxa ka jira sababo badan oo aysan ardaydu dugsiyada u dhigan, ama aysan si toos u iman ama ay dugsiyada ka haraan marka ay muddo dhigtaan. Sababahaas waxaa ka mid ah hab-firkirka taban, deegaanka aan la isticmaali karin iyo baahi loo qabo siyaasad deegaanka hagaajinaysa. Waxa kale oo jira arday tiro badan oo dugsiyada ka hara iyo kuwo aan soo noqon markii dugsiyada dib loo furay, ka dib markii ay muddo dheer xirnaayeen arrimo la xiriira cudurka COVID 19. Tusaale ahaan, gabadhaha horey u guursaday ee hadda ah hooyo dhalinyaro ah ama wiilasha dugsiyada uga tegay in ay shaqeeyaan oo caruurtooda caawiyaan.

### Xisaddan waxa ay ka-qayb-galayaashu:

- ü Ka doodi doonaan caqabadaha ugu badan ee ay ardaydu dugsiyada uga maqan yihiin ee Soomaaliya ka jira.
- ü Isla wadaagi doonaan dhacdooyinka dhabta ah ee ardayda dugsiyada ka maqan ee deegaankooda ka jirta
- ü Waxay bilaabi doonaan in ay ka fekeraan caqabadaha ka jira goobaha ay caruurtu dugsiyada ka maqan yihiin iyo ogaanshahooda iyo istiraajiyadaha aan u adeegsan karno in aan ka hor tagno caqabadahaas.

## Hawl-qabad 3.1: Maxay caruurtu dugsiyada uga maqan yihiin Soomaaliya?

1 45 daqiiqo

Hawl-qabadkan waxa uu ka caawinayaa ka-qayb-galayaasha in ay ka fekeraan noocyada caqabadaha ay ardaydu waxbarashada kala kulmaan ee Soomaaliya ka jira iyo caqabadaha ugu badan. Fududeeyuhu waa in uu horey u sii goostaa Dheemanka 9 ee **Agabka3.1** (waxaa ka mid ah kaar aan waxba ku qorneyn). Koox kasta waxa ay u baahan tahay xirmo kaarar ah, kuwaas oo buqshada lagu ridayo.

## Tilmaamaha

U sheeg ka-qayb-galyaashu in ay u shaqeeyaan koox tiro kooban. Kuwaasi waxa ay noqon karaan koox degmo heer qaran. Koox kasta sii karaka Dheemanka 9 oo ka soo qaado **Agabka 3.1**: **Kaararka Dheemanka 9 – Caqabadaha ardayda dugsiyada ka haysta**


**Power Point** **Xisada 3: boggoa 1-2: tilmaamaha hawl-qabadka 3.1**

- U sheeg ka-qayb-galayaashu in ay doortaan **9 kaar** oo ay ku diyaariyaan miis dushiida sida qaabka dheemanta oo kale sida ay caqabadugu u kala horeeyaan iyo caqabadaha ardayda dugsiyada ka horjoogsada ee ka jira Soomaaliya.
- Caqabadaha waaweyn waxa la gaynayaa xagga sare, caqabadaha yar yar waxa la gaynayaa xagga hoose.

- Warqad ama sabuurta ku sawir qaybaha dheemanka 9 (ee hoose) sida ay ka-qayb-galayaasha u tusto sida loo habaynayo kaararka

**Qaybaha Dheemanka 9**

Caqabadaha Waaweyn



Caqabadaha yar yar

- U sheeg ka-qayb-galayaasha in jiraan **kaarar ka badan 9 xabo**, sidaas darteed waxaa looga baahan yahay in ay ka doortaan kaararka ay doonayaan.

- U sheeg ka-qayb-galayaasha, in ay jiraan **xirmooyin kaarar ah**. Hubi in ay kooxuhu heleen kaarar aan wax ku qornayn, si ay wax ugu qoraan oo u adeegsadaan dheemanta 9.

- U sheeg ka-qayb-galayaashu in ay koox ahaan ugu heshiiyaan sida loo kala hor marinayo kaararka. Tani waxa ay qaadanaysaa 15 ilaa 20 daqiiqo.



Tababarayaasha Saambiya oo ka doodaya kaararka dheemanta 9

[Sharaxaada muuqaalka: Haweeyney iyo labo nin oo miis hareeraha ka fadhiya. Miiska waxaa dulsaaran waraaqo yar yar oo wax ku qoran yihiin, kuwaas oo loo habeeyey qaabka dheemanka. Haweeynaydu waxa ay tilaamaysaa kaar oo ka-qayb-galayaashu waxa ay u muuqdaan in ay doodayaan.]

- Marka ay kooxuhu shaqada dhameeyaan, u sheeg ka-qayb-galayaashu in ay marba miis tagaan oo ay koox kasta sharraxdo sida iyo sababta ay kaararka isugu xijiyeen. Waxa ay qaadanaysaa 20-25 daqiiqo.



Tababarayaasha oo ka doodaya sida koox kasta ay isugu xijisay kaararka qaabka dheemanka 9 loo habeeyey

[Sharraxaada Muuqaalka: 18 qof, haween iyo rag ku hareeraysan miis, oo qaar koos ay fadhiyaan, qaarna taagan yihiin. Miiska dushiisa waxaa saaran kaarar yar yar oo wax ku qoran yihiin oo loo qaabeeyey sida dheemanta. Haweenay ayaa tilaamaysa kaararka, oo dadka kale waxa ay fiirinayaan kaararkaas.]

- La soco ka-qayb-galayaasha marka ay koox ka tegayaan oo u tegayaan koox kale, ku dhiirigeli in ay su'aalo is weydiiyaan oo iska caawiyaan sidii ay doodu si wanaagsan ugu socon lahayd.
- Hel si loo diiwaan gelin karo dheemanta kooxaha oo ka dooda (tusaale ahaan, sawir ka qaada dheemanta oo warqad/sabuurad ku qora qaybaha dooda kooxaha)

## Hawl-qabadka 3.2a: Eegidda dhacdada - qaybta 1

1 45 daqiiqo

- Samee cajis kakaakicin deg deg ah si ka-qayb-galayaashu ay sameeyaan kooxo cusub

- Koox kasta sii hal dhacdo oo ku saabsan ardayda dugsiyada ka maqan ee xaaladda Soomaaliya ee ku jirta **Agabka 3.2**: **Dhacdooyinka ardayda dugsiyada ka maqan**

**Xogta Tababaraha**

Koox kasta waxaad siin kartaa hal ama labo dhacdo si loo hubiyo in la dhamaystiray dhacdooyin badan inta suurogalka ah. Waxaa suurogal ah in aad doorato dhacdooyinka la adeegsanayo.

Power Point **Xisada 3: bogga 3: Tilmaamaha hawl-qabadka 3.2a**

- U sheeg ka-qayb-galayaasha in kooxuhu ay ka doodaan:
  - ü Maxay ardaydu dugsiya uga maqan yihiin tusaale ahaan, haddii arday uu dugsiga ka haro, ama uu mar mar dugsiga yimaado ama uusan weligiis dugsi dhigan).
  - ü Maxay yihiin caqabadaha ardayda dugsiga dhigashada ka haysta, kuwaas oo ay ka mid yihiin faahfaahin ku saabsan qoysaska, deegaanka, khibrada waxbarashada, iwm.
  - ü Sidee caqabadahaas loo xalin karaa? Maxay yihiin xalalka suurogalka ah?
- U sheeg kooxaha in ay dhacdo kasta ka doodaan 15 daqiiqo oo ay warqad ku qoraan jawaabahooda. Marka ay dhameeyaan dhacdo, waxa ay ka doodi karaan dhacdo kale.
- Si guud, koox kasta waa in ay u sheegtaa falcelinteeda si ay kooxaha kale uga faaloodaan.
- Ku celceli inta koox kasta ka warbixinayso dhacdooyinka ay ka doodeen.

## Hawl-qabad 3.2b: Eegidda dhacdada - qaybta 2

1 30 daqiiqo

- U sheeg ka-qayb-galayaashu in ay sheegaan tusaalooyin ku saabsan ardayda dugsiyada ka maqan ee Soomaaliya oo ay aqoon ama khibrad u leeyihiin kooxdoodu. Ka-qayb-galayaashu waa in ay u shaqeeyaan koox isku meel ka timid. Doodu waa in ay qaadataa 10 daqiiqo.
- U sheeg ka-qayb-galayaashu in ay u shaqeeyaan koox oo ay sawiraan ama qoraan dhacdo **qeexaysa arday aan dugsi dhigan oo Soomaaliya joogta.**

Arrintani waxa ay qaadanaysaa 15-20 daqiiqo. Dhacdadu waa in ay ku saabsan tahay xaaladda dhabta ah ee ardayda dugsiyada ka maqan, kuwaas oo ay aqoon u leeyihiin ka-qayb-galayaashu.

Power Point **Xisada 3: bogga 4: Tilmaamaha hawl-qabadka 3.2b**

- U sheeg kooxaha in warqad lagu qoro dhacdo kasta si loo soo bandhido waana in ay sheegeyso.
  - ü **Maxuu ardaygu dugsiga uga maqan yahay ama in uu ardaygu dugsiga ka haray iyo in uusan weligiis dugsi dhigan.**
  - ü **Maxay yihiin caqabadaha ardaydaas dugsiyada ka hortaagan (ku dar faahfaahin ku haboon oo la xiriirta qoyska ardayga, deegaanka, khibrada waxbarashada, ect).**

  Taas bedelkeed, ka-qayb-galayaashu waxa ay si faahfaahsan uga doodi karaan caqabada kadibna waxa ay isu diyaarinayaan inay afka ka sheegaan.

- Marka ay kooxuhu ka shaqaynayaan dhacdooyinka, tababaruhu waa in uu ku dhex socdo fasalka gudihiisa oo uu u fiirsado oo xog qor ka sameeyo dhacdooyinka qaarkood, kuwaas oo xiiso u leh in looga doodo si guud.

- Dhacdooyinka cusub waa in lagu dhejiyaa derbiga si loola wadaago ka-qaybgalayaasha oo dhan.

## Hawl-qabadka 3.3: Istiraajiyadaha iyo xalalka lagu ogaado meesha ay joogaan ardayda dugsiyada ka maqan iyo aqoonsigooda

1 60 daqiiqo

Hawl-qabadkan waxaa loogu talo galay in ay ka qayb-galayaashu tixgeliyaan caqabadaha meesha ay joogaan ardayda dugsiyada ka maqan iyo aqoonsigooda ee Soomaaliya iyo in uu ay ka fekeraan istiraajiyadaha wax looga qaban karo caqabadahaas.

### Tilmaamaha

- Xasuusi ka-qayb-galayaasha in aan soo aragnay sababta ay caruurta Soomaaliyeed ay kaga maqan yihiin dugsiyada iyo caqabadaha ay la

kulmaan marka ay dugsiga tagaan ama joogaan. Sidoo kale waxaan soo aragnay nidaamka siyaasada, kaas oo dhowraya xaquuqda waxbarashada caruurta.

- U sheeg ka-qayb-galayaasha, xitaa haddii aan og nahay sababta ay caruurtu dugsiyada kaga maqan yihiin iyo nooca caqabadaha ay la kulmaan, haddana ma garan karno meesha ay joogaan caruurta dugsiyada ka maqan iyo caqabadaha gaarka ah ee ay la kulmaan. Waa arrin muhiim ah in la helo hababka lagu ogaan karo meesha ay joogaan caruurta dugsiyada ka maqan ee Soomaaliya oo lagu aqoonsan karo. Sidaas darteed, waxaan keeni karnaa xal dugsiga lagu gayn karo. Waxaan adeegsan karnaa meertada FIIRI, KA FEKER oo Samee, si xal loo helo.

- U sheeg ka-qayb-galayaasha in aan hadda eegayno hababka lagu ogaan karo meesha ay joogaan ardayda dugsiyada ka maqan oo lagu aqoonsanayo, si aan u helno xal dugsiga lagu geeyo.

- U sheeg ka-qayb-galayaasha in ay sii joogaan kooxihii hawl-qabadkii hore- **hawl-qabadkii 3.2b.** Koox kasta sii warqad iyo qalimada calaamada.

**Power Point** **Xisada 3: bogga 5: Tilmaamaha hawl-qabadka 3.3**

- U sheeg ka-qayb-galayaasha in ay warqada u kala qaybiyaan afar-geesle sida ka muuqata powerpoint ga oo ay soominguuriyaan su'aalaha ku qoran afar-geesle kasta.

| | |
|---|---|
| **XAGEE joogaan?** | **MAXAY tahay istiraajiyadaha aan ku aqoonsan karno oo aan ku ogaan karno meesha ay joogaan?** |
| **YAA ka mid ah bulshadeena oo inaga caawin kara in aan helno?** | **Caqabadahee la kulmi karnaa? SIDEE loo xalin karaa?** |

- U sharax ka-qayb-galayaasha in ay warqada u qaybiyaan sida sare oo kale oo ay mid kasta ku qoraan ciwaanka.

- Weydii koox kasta in ay dib u eegaan dhacdooyinka lagu soo bandhigay **hawl-qabadka 3.2b.**

- U sheeg koox kasta in ay maskaxtuujin ku sameeyaan dhacdooyinka oo ay ka jawabaan su'aal kasta oo ay jawaabtooda ku qoraan warqad. U sheeg ka-qayb-galayaashu in ay qori karaan erayo, jumlado ama sawir (tusaale ahaan, sida loo muujin karo ardayda dugsiga ka maqan dugsiga ee degan xero qaxooti). In si wada jir ah loo sameeyo tusaale.

- U sheeg koox kasta in ay doorato qof warbixintooda soo jeediya.

- Sii 40 daqiiqo oo ay wax ku qoraan warqada oo ay ka dibna derbiga ku dhejiyaan.

- Qofka warbixinta soo jeedinaya waxa uu warqada u soo bandhigayaa kooxaha oo dhan (koox kasta sii 5 daqiiqo oo ay wax ku soo bandhigaan).

- Marka kooxaha oo dhan ay soo bandhigaan warqadahooda, samee faalo guud. Weydii ka-qayb-galayaasha su'aalaha soo socda:
  - o Ma ku adkaatay in ay ka fekeraan meesha ay joogaan caruurta dugsiyada ka maqan?
  - o Maxay yihiin istiraajiyadaha ay kooxuhu ogaadeen, kuwaas oo si wanaagsan u shaqayn kara? Maxay tahay sababtu?

  - Warqad ku qor istiraajiyadaha ay dadku u arkaan in ay si wanaagsan u shaqaynayaan, ka dibna istiraajiyadahaas ku dheji derbiga.

## Xogta tababaraha

Haddii loo baahdo xasuusi ka-qayb-galayaasha **xirfada, istiraajiyadaha iyo agabka** ay horey u adeegsadeen Ururada Dadka Naafada ah, taas oo qayb ka ahayd dhisida awooda u qareemida. Hubi in lagu daray waxyaabaha derbiga lagu dhejiyey.

**Wareysiga iyo dood kooxeedyada:** Habka ugu wanaagsan ee bulshada looga helo xog ku saabsan ardayda dugsiyada ka maqan iyo noocyada caqabadaha ay la kulmaan waa in la sameeyo wareysi ama dood kooxeed. Ogsoonow in ay muhiin tahay in wareysiga iyo dood kooxeedka loo adeegsado su'aalo furan oo ay dadku kalsooni dareemayaan in ay sheegaan waxa ay ka ogyihiin ama ay ka fekeraan.

**Xirfadda dhegaysiga**

Xirfadda dhegaysiga wanaagsan waa mid muhiim u ah in la helo xog ku saabsan waxa ay dadku ka og yihiin caruurta dugsiyada ka maqan iyo meesha ay joogaan. Xirfadda dhegaysiga wanaagsan waxa kale oo uu inaga caawinayaa in aan si wanaagsan u fahano caqabadaha ay caruurtu iyo qoysasku la kulmi karaan (Xirfadda dhegaysiga wanaagsan waxa aan adeegsanay qayb ka mid xirfaddaha fudedeynta tababarka loo wada dhan yahay iyo marka la diyaarinayo hawl-qabadyo xog lagu helayo).

**Indha-indhayn**

Indha indhayntu waa qaybta ugu muhiimsan ee heerka FIIRI ee meertada 'FIIRI-FEKER-SAMEE'. Waxa suurogal ah in ay jirto meel ay bulshadu ka fiirin karto caruurta dugsiyada ka maqan oo ay ka arki karto sababta aysan dugsiyada u dhigan (tusaale ahaan, xilliyada dugsiga la dhiganayo, waxaa suuqa lagu arkaa caruur khudaar iibinaysa).

**Khariidadayn**

Khariidadayntu waxa ay inaga caawin kartaa in la ogaado meesha ay joogaan caruurta dugsiyada ka maqan iyo caqabadaha ay khibrada u leeyihiin. Khariidadu waxa ay samayn kartaa sawir ku saabsan bulshada iyo sida ay u weyn yihiin mushkiladahu. Arrintani waxa ay inaga caawin kartaa qorsheynta xalalka iyo in laga fekero cida ka mid ah bulshada oo taageero ka gaysan karta in caruurta dugsiyada ka maqan la geeyo dugsiyada.

# Xisada 4: Maxay tahay ka gudbida heerka waxbarashada? Maxay tahay sababta ay muhiim u tahay?

**Fariimo muhiim ah**

- Ka gudbida heerka waxbarashadu waa marka uu ardaygu tago dugsi ama ka tago dugsi. Waa marka ugu horeysa ee dugsiga la geeyo, ama laga gudbo fasal, ama loo bedesho dugsi kale.
- Ka gudbida heerka waxbarashadu siyaabo kala duwan ayuu ardayda uu raad ugu leeyahay. Qaar badan ayaa ka helay khibrad wanaagsan, in kasta oo qaar kalena ay mudo dheer dhib la kulmaan.

## Xogta aasaasiga ah ee tababaraha:

Ka gudbida heerka waxbarashada inta badan waa in ay ardaydu ka yimaadaan guriga oo tagaan goobaha waxbarashada ama meel cusub oo goobahaas ka mid ah.
Ka gadubka heerka waxbarashadu waxay fursado ama caqabado ku keeni karaan waxbarashada iyo horumarka caruurta. In loo maamulo ka gudubka heerka waxbarashadu si loo wada dhan yahay waxa ay caruurta oo dhan ka caawinaysaa in ay ka faa'iideystaan is bedelka.

Ka gudubka heerka waxbarashada waa hab socod dhaca waqti (tusaale ahaan), sida marka ay caruurtu diyaar u yihiin in ay bilaabaan dugsiga ilaa iyo inta ay la qabsanayaan dugsiga, sidaa bedelkeeda waqti go'an sida maalinta, usbuuca/todobaadka ay bilaabaan waxbarashada.

Ka gudubka heerka waxbarashadu waxa ay caqabad ku noqon kartaa ardayda, qoysaskooda iyo macallimiintooda. Arday badan ayaa dugsiyada ka hara marka ay ka gudbaan heer kamid ahwaxbarashada ama wax yar ka dib, gaar ahaan haddii ay leeyihiin baahiyo dheeraad ah oo aan la daboolin xilliga ka gudbida heerka waxbarashada.

Somaaliya dugsiyadu waxaa loo xiraa si soo noqnoqota sababo la xiriira colaadaha, abaaraha iyo cunto yarida. Dugsiyada dib ayaa loo furaa muddo dheer ka dib sida dhacaday xilligii COVID 19. Taasi waxa ay keentaa in ay arday badan ay dugsiga dib ugu soo noqdaan, iyagoo muddo ka maqnaa dugsiga. In kasta oo ay wanaagsan tahay in dugsiga dib loo furo, haddana waxa jira

caqabado haysta ardayda, qoysaskooda, macallimiintooda iyo dugsiyada. Qaar ka mid ah ardayda waxa ay si toos ah ugu gudbaan fasal kale, iyaga oo aan loo diyaarin sidii ay u maareyn lahaayeen heerka cusub. Macnaha kororka tirsiga ardaydu waa in uu sareeyo saamiga u dhexeeya macallimka iyo ardayda, taas oo keenaysa fasalo arday tiro badan oo in badan oo ardayda ka mid ah ay la hardamayso sidii ay hawlaha fasalka uga qaybi geli lahaayeen  oo ay guul u gaari lahaayeen.  fasal  yarida jirta ayaa raad ku leh maqnaanshaha dareenka ardayga.

### Xisaddaan ka-qayb-galayaashu waxa ay:

ü Fahmi doonaan macnaha ka gudubka heerka waxbarashada (Education transition)

ü Ka doodi doonaan ka gudubka heerka waxbarashada oo raad ku yeelan kara joogitaanka, ka-qaybka iyo guul ka gaarista.

## Hawl-qabadka 4.1: Muxuu yahay ka gudubka heerka waxbarashadu? Muuqaalka ka gudubka heerka waxbarashda loo wada dhan yahay – qayb 1

1 30 daqiiqo

### Tilmaamo

- Ku xir casharka xisadii hore ee ardayda dugsiyada ka maqan. Weydii ka-qayb-galayaasha ‘Maxay tahay tilaabada xigta ee hab socodkan kadib marka si buuxda loo ogaadey meesha ay joogaan ardayda dugsiyada ka maqan? Dhiiri gali ka-qayb-galayasha ‘taageeraya in ay ardaydu dugsiyada aadaan ama ay ka gudbaan heerka waxbarashada’.

**Power Point**  **Xisadda 4:  bogga 1:  Daawo muuqaalka**

U sheeg ka-qayb-galayaashu in ay daawan doonaan qayb laga soo qaatay muuqaal ku saabsan ‘**Ka gudubka heerka waxbarshada ee loo wada dhan yahay’.** U sheeg ka-qayb-galayaasha in ay ka fekeraan su’aalaha soo socda intay fiirsanayaa muuqaalka:

**Maxay yihiin qaybaha kala duwan ee ka gudubka heerka waxbarashada?**
**Maxay muhiim u tahay ka gudubka heerka waxbarashada?**

- Daawo muuqaalka: https://www.youtube.com/watch?v=X1Ul_5wrsAE. Joogi muuqaalka **daqiiqada 3.06.** Qoraal ku saabsan muqaalka waxa aad ka heli kartaa **Agabka 5.1**.
- Marka ay daawadaan muuqaalka, si guud u weydii ka-qayb-galayaasha in ay uga falceliyaan labada su'aalood. Hadda haka filan wax badan in laga sheego su'aasha labaad, madaama su'aashaan si faahfaahsan looga hadli doono casharada dambe.

- Tus qeexaha soo socda ee ku saabsan ka gudubka heerka waxbarashada oo ku qoran warqada ama Soobandhig (PPT) oo kor u akhri. Soo dhowee wixii faallo ama su'aalo ah.

**Ka gudbida heerka waxbarashada** waa marka ardaygu tago dugsiga ama ka tago dugsiga. Waa marka ugu horeysa ee ay ardaydu dugsiga yimaadaan ama ay ka gudbaan fasal ama dugsi kale u gudbaan. Tusaale ahaan, marka la galo xannaadnada caruurta, ama fasalka shanaad looga gudbo fasalka lixaad, ama dugsiga hoose/dhexe looga gudbo dugsiga sare ama dugsiga sare looga gudbo jaamacad.

"Ka gudubka heerka waxbarashada waa hab socod dhaca waqti (tusaale ahaan), sida marka ay caruurtu diyaar u yihiin in ay bilaabaan dugsiga ilaa iyo inta ay la qabsanayaan dugsiga, sidaa bedelkeeda waqti go'an sida maalinta, usbuuca/todobaadka ay bilaabaan waxbarashada."

Ka gudubka heerka waxbarashadu waxa ay caqabad ku noqon kartaa ardayda, qoysaskooda iyo macallimiintooda. Arday badan ayaa dugsiyada ka hara marka ay ka gudbaan heerka waxbarashada ama wax yar ka dib, gaar ahaan haddii ay leeyihiin baahiyo dheeraad ah oo aan la daboolin xilliga ka gudbida heerka waxbarashada.

**Power Point** — **Xisadda 4: bogga 2: maxay tahay ka gudubka heerka waxbarashada?**

## Hawl-qabadka 4.2: Khibradeena ka gudbida heerka waxbarashada

1 45 daqiiqo

### Tilmaamaha

- U sheeg ka-qayb-galayaasha in ay dib u milicsadaan khibradooda ka gudubka heerka waxbarashada. U sheeg ka-qayb-galayaashu in ay u shaqeeyaan labo-labo oo isku dayaan in ay xasuustaan **wixii dhacay** iyo **sida ay wax u dareemeen** sida markay bilaabeen dugsi cusub inay aadaan ama fasal kale ama dugsi kale loo bedelay. Tababaruhu waxa uu la wadaagi karaa khibradiisa haddii ay ku haboon tahay.

**Power Point** **Xisadda 4: boggoga3-4: Tilmaamaha hawl-qabadka 4.2**

- 10 -15 daqiiqo ka dib, weydii in si iskood ah ay u jawaabaan oo ay sheegaan hal khibrad oo wanaagsan iyo hal khibrad oo taban kuwaas oo ay saxiibadood la soo wadaageen.
- Ka dibna u sheeg ka-qayb-galayaasha in ay labo-labo u sii shaqeeyaan oo ka doodaan su'aalaha soo socda:

  - **Waa maxay noocyada ka gudubka heerka waxbarashada ee ardaydu khibrada ugu yeesheen degmooyinkooda?**

    (Tababaruhu waxa uu bixin karaa tusaalooyin sida: guriga ila dugsiyada xanaanada ama dusgiga hoose/dhexe ilaa dugsi sare ama dugsi sare ilaa tacliinta sare, ardayda naafadaha oo ka soo gudba dugsiyada gaarka ah oo u soo gudba dugsiyada caadiga ah ama caksigeed, in ay dugsiyada ku soo noqdaan ardaydu marka ay muddo ka maqan yihiin (colaadaha ama abaaraha), dugsiga oo la yimaado bartamaha sannad dugsiyeedka (taas oo ka dhalatay barakaca)).
  - **Haddii ardayda qaarkeed ay dugsiga yimaadaan ama ka tagaan xilli aan la qorshayn, maxay tahay sababtu?**
  - **Si waxtar leh ma loo taageeray ardayda ka gudbaysa heerka waxbarashada? Sidee loo taageeray?**

- Ugu dambayntii, u sheeg ka-qayb-galayaasha in ay la wadaagaan fikradooda kooxaha oo dhan oo ay wixii aragti ah ku qoraan warqada ama sabuurada.

## Hawl-qabadka 4.3: Sidee ka gudubka heerka waxbarashadu raad ugu yeelan karaa ardayda?

1 45 daqiiqo

Ujeeddada hawl-qabadkan waa in ay ka caawiso ka qayb-galayaasha in ay fahmaan sida ka gudubka heerka waxbarashadu uu raad ugu yeesho waxbarashada.

### Tilmaamaha

- U sheeg ka-qayb-galayaashu in ay koox ahaan u eegaan waxyaabaha ay ardaydu sheegeen markii ay ka soo gudbayeen heerarka waxbarashada.
- U qaybi nuqul ka mid ah **Agabka 4.3: waxa ay ardaydu sheegeen** ee koox kasta oo u sheeg inay ka doodaan eraydaas. U sheeg inay ka doodaan Labada su'aalood soo socda koox ahaan:
    1. **Ma aqoonsatay dareenka iyo khibrada ardayda?**
    2. **Sidee ayaad u malaynaysaa in ka gudubka heerka waxbarashadu uu raad ugu yeeshay khibrada ardayda ee dugsiga iyo waxbarashada?**

**Power Point** **Xisadda 4: bogga 5: Tilmaamaha hawl-qabadka 4.3**

- Si guud uga hel falcelin ka-qayb-galayaasha oo warqad ha ku qoreen jawaabtooda su'aasha labaad (looma baahna in la qoro jawaabta su'aasha koowaad).

# Xisadda 5: Ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay waxa uu ka bilowdaa guriga

**Fariimo muhiim ah**

- Waalidka iyo qoysasku waa macallinka koowaad ee caruurta. Qoyska, guriga iyo bulshada ayaa xudun u ah cunuga inta uu ka gudbayo heerarka waxbarashada.
- Ka gudbida xanaanada iyo dugsiga ma aha macnaheedu dhammaanka wax ka barashada guriga. Ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay oo habsami ah waxaa muhiim u ah in lagu daro waalidiinta markasta.
- Waxaa jira waxyaabo ka jira guriga oo raad ku leh imaanshaha caruurta ee dugsiga ama ka qayb galka waxbarashada, maadaama ay maalin kasta ka imanayaan guriga oo ay dugsiga soo aadayaan.

## Xogta aasaasiga ah ee tababaraha:

Marka uu cunugu dhasho, waxa ay la kulmayaan is bedel, koritaan iyo barashada waxyaabo cusub, dad cusub iyo khibrada deegaanka. Meesha ugu horeysa ee uu cunugu wax ka barto oo uu ku koro waa qoyska, guriga iyo bulshada. Qoysaska, guryuha iyo bulshadu waxa ay xudun u yihiin marka ay caruurtu ka gudbayaan heerarka waxbarashada caadiga ah.

Waalidka iyo qoysasku waa cida ugu horeysa ee u qareenta waxbarashada loo wada dhan yahay xilliga ka gudubka heerka waxbarashada. Waxaa suurogal ah in ay doortaan goobta waxbarashada oo ay kula taliyaan goobaha waxbarashada in ay aqoonsadaan baahida caruurta oo ay daboolaan, iyaga oo hubinya in caruurtoodu ay haystaan dhammaan agabka ay u baahan yihiin oo ay caruurta u diyaariyaan is bedel. Sidoo kale waxa ay khibrad u leeyihiin taageerada ay caruurtu u baahan yihiin.

Dugsiyada iyo macallimiinta isku duba ridaya ka gudubka heerka waxbarashada waa in ay awood u siiyaan waalidiinta iyo qoysaska in ay hoggaamiyaan hab socodka ka gudubka heerka waxbarashada haddii ay doonayaan ama ay kala tashadaan tilaabo kasta oo la qaadayo.

Waxa maalin kasta ku dhacaya caruurta dugsiga ka hor, waxa uu raad weyn ku leeyahay ka gudubka heerka waxbarashada iyo dhammaan dhigashada

dugsiga. Arrimaha loo baahan yahay in aan tixgelino waxaa ka mid ah: hurdada, quraacda iyo shaqada guriga laga qabto.

- Daalku waxa uu raad ku leeyahay barashada iyo bed-qabka
- Gaajadu waxa ay raad ku leedahay feejignaanta iyo caafimaadka
- Shaqada gurigu waa qayb ka mid ah barashada xirfada iyo masuuliyada, hase yeeshee waxa ay raad ku leedahay waxbarashada caruurta, iyada oo sababaysa daal, wasakh iyo caruurta oo dugsiga ka daahda.

### Xisaddan ka-qayb-galayaashu waxa ay:

ü Ka fekeri doonaan muhiimada ay waalidka iyo qoysku u leeyihiin ka gudubka heerka waxbarashada.

ü Eegi doonaan arrimaha raadka ku leh ka gudubka heerka waxbarashada ardayga ee inta uu dhiganayo dugsiga

ü Sharxi doonaan sida wax looga qabanayo cabashada waalidka oo loogu dhiirigelinayo in ay ka qayb qaaraan taageerada hab socodka ka gudubka heerka waxbarashada.

## Hawl-qabadka 5.1: Wax ku barashada iyo ku koritaanka guriga

Hawl-qabadkani waxa uu ka caawinayaa ka-qayb-galayaasha in ay ka fekeraan ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay, iyagoo daaha ka rogoya siyaabaha kala duwan ee barashada, koritaanka iyo goobaha waxbarashada iyo muhiimada ka gudubka heerka waxbarashada ee ay caruurtu khibrad u yeesheen intii ay waxbarashada ku jireen.

## 5.1a: Goobaha waxbarashada

1 30 daqiiqo

### Tilmaamaha

Power Point xisadda 5: bogga 1: Tilmaamaha hawl-qabadka 5.1a

· Ka-qayb-galayaasha u qaybi kooxo cusub oo ka kooban 4-5 qof. U qaybi warqado iyo qalimaan midab leh. U sheeg ka-qayb-galayaasha tilmaamaha soo socda:

- ü Sawir saddex sawir oo kale duwan: mid deegaanka guriga, mid kale koritaanka caruurnimada iyo mid kale oo ku saabsan goobta waxbarashada.
- ü Sawirka ku dar:
  - Dadka jooga goobta
  - Sida ay dadku iskula falgalaan
  - Hawl-qabadyada ay dadku qabtaan
  - Sida goobta loo habeeyey (tusaale ahaan qaabka fasalka
  - Miisaska iyo kuraasta, agabka iyo walxaha kale (geedaha, saacada, iwm)
- ü Si caadi ah ayaa wax loo sawiraya, iyada oo sawirada dadka iyo summadaha lagu dul dhejinayo ama faahfaahin lagu qorayo, haddii loo baahdo. Waxa lagu darayaa qoraal kooban, kaas oo dadka kale ka caawinaya in ay fahmaan sawirkaaga. Shaqadan waxaa lagu qabanayaa 20 daqiiqo.

**Xogta tababaraha**

Kadhig goobaha sawirka meel la xiriirta meelaha ay joogaan ka-qayb-galayaashu, waxaad ku dari kartaa goobaha kale ee waxbarashada ee ay ardaydu dhigataan ee degmooyinkooda ku yaala sida dugsiyada sare, jaamacadaha haddii ay la xiriiraan. Waa arrin muhiim ah in la ogaado in aysan arrintaan ahayn shaqo naqshadayn, laakiin ay tahay arrin qaab xiiso leh oo ku saabsan sida looga fekerayo isla falgalka dadka, hawl-qabadyada, goobta iyo agabka yaala goobaha wabarashada.

- 20 daqiiqo ka dib, u sheeg kooxaha in ay ku daraan da'da caruurta ee goob kasta, taas oo ku salaysan nidaamka waxbarashada ee deegaankooda.
- U sheeg ka-qayb-galayaasha in ay saddexda sawir ku dhejiyaan derbiga oo ay soo bandhigaan si muujinaysa xiriirka ka dhexeeya.

## 5.1b: Muuqaalka ka gudubka heerkawaxbarashada ee loo wada dhan yahay – qaybta 2

1 30 daqiiqo

### Tilmaamaha

- U sheeg ka qayb galayaasha in ay daawan doonaan qaybta labaad ee muqaal ay samaysay EENET ee **'Ka gudubka heerka waxbarashada loo wada dhan yahay'** video. U sheeg ka-qayb-galayaasha in ay ka fekeraan

kaalinta qoysaska, waalidka iyo dadka caruurta xanaaneeya ee ku saabsan taageerida ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay inta ay fiirsanayaan muqaalka

- Daawo muuqaalka: https://www.youtube.com/watch?v=X1Ul_5wrsAE laga bilaabo daqiiqada **3.06 ilaa 5.35 daqiiqoes.** Qoraal ku saabsan muqaalka waxa aad ka heli kartaa **Agabka 4.1**.

**Power Point** **Xisadda 5: bogga 2: Tilmaamaha hawl-qabadka 5.1b**

- U sheeg ka-qayb-galayaashu inay u sheqeeyaan sidii kooxihii hore oo ay ka fekeraan sida ay qoysasku:
  1. **Ay guriga uga taareegaan waxbarashada iyo koritaanka caruurta da'da yar yar.**
  2. **Ay u sii wadaan taageerada waxbarashada iyo koritaanka marka ay galaan goobaha waxbarashada xanaanada**
  3. **Ay u sii wadaan taageerada waxbarashada iyo koritaanka marka ay galaan dugsiga hoose/dhexe ama dugsiga sare.**

- Su'aalahaasi waxa ay noqon karaan waxyaabihii ay ku arkeen muqaalka ama ay khibrad u leeyihiin. Kooxuhu ha doorteen saddex tusaale oo ay ku qoraan xasuus-qor oo ay ku dhejiyaan sawirka kooxdooda ee derbiga ku dhegan.

- U sheeg kooxaha in ay ku socdaan fasalka gudihiisa oo ay fiiriyaan sawirada ay sameeyeen kooxaha kale ee ku saabsan goobaha waxbarashada iyo tusaalooyinka ay kooxaha kale doorteen.

- Si guud, u weydii ka-qayb-galayaasha su'aalaha soo socda:
  - Maxay ku kala duwan yihiin ama ay isaga mid yihiin sawiradu?
  - Sidee loo habeeyey saddexda sawir, ma saf ayey ku wada jiraan, mise si kala saraysa ayaa loo habeeyey, mise si naqshad camal ah?
  - Tusaalooyinka ay kooxuhu keeneen ma isku mid baa mise way kala duwan yihiin?
  - Ma ahayd mid adag in laga fekero saddex waxyaabood oo ay qoysasku maalin kasta ku taageeraan waxbarashada caruurta ee heer kasta oo ay marayaan?

## Hawl-qabadka 5.2: Kaalinta qoyska ee ka gudbida heerka waxbarashada.

Ujeeddoyinka ugu waaweyn ee hawl-qabadkani waa in la sharaxo:

a) Sida uu hadda qoysku uga qayb galo waxbarashada caruurta ama ka gudubka heerka waxbarashada.
b) Dareenka iyo cabashada waalidka iyo qoysaska ee ku saabsan ka gudubka heerka waxbarashada
c) Istiraajiyadaha wax looga qabanayo cabashada waalidka oo lagu dhiirigelinayo in ay si firfircoon uga qayb galaan hab socodka ka gudbida heerka waxbarashada.

## 5.2a: Ka qaybgalka qoyska ee ka gudubka heerka waxbarashada

1 20 daqiiqo

### Tilmaamo

Power Point

**Xisadda 5: boggoga 3-5: Ka qaybgalka qoyska ee kaalinta ka gudbida heerka waxbarashada**

- Soo bandhig qoraalkan (bogga 3):

| |
|---|
| **Waalidka iyo qoysasku** markasta waxa ay muhiim u yihiin ka gudubka heerka waxbarashada ee caruurta. Qoyska, guriga iyo bulshadu waxay xudun u yihiin in ay caruurtu ka gudbaan heerarka waxbarashada. Ka gudubka heerka waxbarashu ma aha in ay dhammaatay in wax lagu baro guriga. Si loo hubiyo in ka gudubka heerka waxbarashadu uu u socdo si habsami ah oo loo wada dhan yahay waxaa muhiim ah in waalidka laga wada qayb-geliyo ka gudbida heerka waxbarashada. |

- Tus ka-qayb-galayaasha muuqaalka ku qoran bogga 4 oo weydii waxa ka muuqda sawirka ee dhacaya. Sidaas bedelkeed, waxaad siisaa ka-qayb-galayaasha sawirka ku yaal **Agabka 5.2a gacan qabsi ahaan.**

- U sheeg ka qayb-galayaahsa in ay u sii shaqeeyaan kooxihii hawl-qabadkii hore.

- Tus tilmaamaha hawl-qabadka 5.2a ee bogga 5. Weydii mid ka mid ah koox kasta in uu baaro in **waalidka iyo qoysasku ay ka muuqdaan** sawirada goobaha waxbarashada.

- Koox ahaan waa in ay ka doodaan **Sababta** ay uga muuqdaan iyo **Sababta** aysan uga muuqan. Kooxuhu waa in ay qoraan magacyada waalidka iyo qoysaska ka qayb galay goob kasta oo waxbarasho ee sawirada ka muuqda. Adeegso su'aalaha soo socda in ay ku haggaan haddii loo baahdo:

  ü **Sidee waalidka iyo qoysaska loogu arkaa goobaha waxbarashada? Maxay u yimaadeen?**

  ü **Waalidka ma laga talo geliyey go'aan gaarista? Talo ma ku leeyihiin wax ka dhacaya goobta waxbarashada? Haddii jawaabtu ahaa tahay, sidee?**

  ü **Sidee macallimiintu ula xiriiraan waalidka iyo qoysaska?**

  ü **Maxay yihiin mas'uuliyada ama filashada waalidka iyo qoysaska?**

- Si guud wax u soo koob oo koox kasta sii inay fikradooda ka dhiibtaan.

**Power Point** Xisadda 5: bogga 6

- Soo bandhig qoraalka soo socda:

  "Waalidka iyo qoysadku waa cida ugu horeysa ee u qareenta waxbarashada loo wada dhan yahay xilliga ka gudubka heerka waxbarashada. Waxaa suurogal ah in ay doortaan goobta waxbarashada oo ay kula taliyaan goobaha waxbarashada in ay aqoonsadaan baahida caruurta oo ay daboolaan, iyaga oo hubinya in caruurtoodu ay haystaan dhammaan agabka ay u baahan yihiin oo ay caruurta u diyaariyaan is bedel. Sidoo kale waxa ay khibrad u leeyihiin taageerada ay caruurtu u baahan yihiin. Kuwaasi waa kaalimaha muhiimka ah ee waalidka iyo qoysasku ka qaadan karaan xilliga ka gudubka heerka waxbarashada."

## 5.2b: Cabashada waalidka ee ku saabsan ka gudubka heerka waxbarashada ee caruurtooda.

1 20 daqiiqo

### Tilmaamaha

- Koox kasta waa in la siiyaa labo waraaqood oo cabirkoodu yahay A4, ka dibna u sheeg ka-qayb-galayaashu in ay dib u eegaan labo dhacdo oo ka mid ahaa **Hawl-qabadka 3.2 Dhacdooyinka ku saabsan caruurta dugsiga ka maqan:**

- U sheeg koox kasta in ay warqada ku qoraan (dhacdo kasta)  qoyska cunuga (dhexgali ilmaha magaciisa) ‘. Sidoo kale cunuga waxaa ku sawiri kartaa dhexda.

**Power Point** **Xisadda 5: bogga 7: Tilmaamaha hawl-qabadka**

- U sheeg kooxaha inay mala awaalaan qoyska cunuga. Ku qor waraaqaha **erayo ama weero qeexaya dareenka, caadifada iyo cabashada waalidka iyo qoysaska uu cunuga ku dhex koray,** sida iyaga oo **qorshaynaya in uu cunugooda ka gudbayo goob cusub oo waxbarasho, dugsi ama goobta xanaanada caruurta.**

- Hawl-qabadka ku soo bandhig warqad oo sheeg hal ama labo tusaale oo ku saabsan dareenka ama cabashada waalidka si ay caruurtu waxbarasho u bilaabaan (eeg sanduukha ‘xogta tababaraha’).

- 10 daqiiqo ka dib, si kooban uga hadal falcelinta kooxaha kala duwan. Ogsonow, erayada ama jumladaha ka wada dhexeeya dhacdooyinka, kuwaas oo gooni ah:

**Xogta tababaraha**

Waa in jawaabuha kooxuhu ay kala duwanadaan, taas oo ku dhisan dhacdooyinka gaarka ah ee la siiyey. Jawaabaha waxaa suurogal ah in lagu daro qodobada soo socda:

- Waalidka ma ogo in curuurtooda loo ogolaaday in ay dhigtaan dugsiyada.
- Waxa ay ogyihiin in cid kale aysan ogayn caruurtooda waxa ay samaynayaan.
- Waalidku ma oga nidaamka waxbarashada
- Waalidka waxay filayaan in ay caruurtooda la ilaaliyo badqabkooda laga ilaaliyo bulshada inteeda kale.
- Waalidku way xishoonayaan
- Waalidku waxa ay aamisan yihiin in ay caruurtoodu guriga ku fiican yihiin.
- Waalidka ma filayaan in ay caruurtoodu ka faa'iidaysanayaan waxbarashada
- Waalidku waxa ay filayaan inaysan wax baran karin
- Waalidku waxa ay aamisan yihiin in aysan caruurta dugsiga dhigan karin
- Caruurtoodu waxa ay ku hadlaan lahjado ka duwan kuwa dugisga, sidaas darteed uusan jirin dugsi ay leeyihiin.
- Waalidku ma oga in caruurtoodu xaq u leeyihiin waxbarashada.
- Waalidka waxaa haysa cabsi
- Waalidku ma garanayaan cid bulshada ka mid ah
- Waalidku ma awoodaan in ay caruurtoodu dugsiyada dhigtaan
- Waalidku waxa ay leeyihiin khibrad taban ee shakhsiyadeed

## 5.2c: Istiraajiyada wax ka qabashada cabashada waalidka iyo ku dhiirigelinta waalidka sida ay uga qayb qaadan lahaayeen hab socodka ka gudbida heerka waxbarashada.

1 20 daqiiqo

### Tilmaamo

Power Point **Xisadda 5: bogga 8: istiraajiyada wax looga qaban karo cabashada waalidka eek ku saabsan ka gudbida heerka waxbarashda**

- U sheeg ka-qayb-galayaasha in ay jiraan istiraajiyado kala duwan, kuwaas oo inaga caawin kara in wax laga qabto cabashada waalidka iyo qoysaska ee ku saabsan ka gudbida heerarka waxbarashada iyo in lagu dhiirigeliyo waalidka si ay kaalin firfircoon uga qaataan hab socodka ka gudbida heerka waxbarashada.

- Sii ka-qayb-galayaasha xirmo sawiro ah oo ku jirta **Agabka 5.2b: (saddex sawir) istiraajiyada wax looga qabanayo cabashada waalidka ee ku saabsan ka gudbida heerka waxbarashada** ee koox kasta. Weydii koox kasta in ay eegaan sawirada oo ka doodaan.

  ü **Maxay yihiin istiraajiyada taageeraya ka gudbida heerka waxbarashada ee sawir kasta muujinayo?**

- Samee falcelin kooban oo la wadaag istiraajiyadaha ka muuqda sawirada:
  1. Macallimiintu waxa ay booqdaan guryaha ardayda
  2. Diyaarinta iyo **xogta, taageerada iyo agabka wacyigelinta ee dugsiyada** oo la siiyo waalidka iyo qoysaska.
  3. In la sameeyo **Maalinta furitaanka dugsiga(**waalidka oo lagu martiqaado dugsiga)

- U sheeg kooxuhu in ay ka doodaan su'aalaha soo socda:

  ü **Sidee istiraajiyad kasta u taageeri kartaa wax ka qabashada cabashada waalidka iyo in waalidka lagu dhiirigeliyo in ay kaalin firfircoon ka qaataan hab socodka ka gudbida heerka waxbarashada. (Ka feker dhacdooyinkii aad horey u soo aragtay)**

  ü **Maxay yihiin istiraajiyadaha kale ee aad ku talinayso in wax looga qabto cabashada waalidka iyo in lagu dhiirigeliyo waalidka in ay kaalin firfircoon ka qaatan habsocodka ka gudbida heerka waxbarashada.**

- Ku dhiirigeli kooxaha in ay ka fekeraan dhacdooyinka ay horey u soo arkeen iyo sida istiraajiyadahaasi ay u caawin karaan dhacdo kasto.

**Power Point** **Xisadda 5: boggoga 9-11: Istirajiyado (saddex sawir)**

- Si guud ugu sheeg qeyb kamid kooxaha in ay aragtidooda soo gudbiyaan. Tus ka-qayb-galayaasha saddexda sawir si ay uga caawiyaan dooda. Weydii kooxaha haddii ay hayaan tusaale la mid ah oo taageeraya ka gudubka heerka waxbarashada oo ka dhaca dugsiyada degmadooda. Weydii:

  ü **Ma jiraan hawl-qabad la sameeyay si loo taageero ka gudubka heerka waxbarashada markii ardaydu dib ugu soo noqotay dugsiyada, iyagoo muddo ka maqnaa ama dugsiga oo la xiray.**

**Power Point** **Xisida 5: bogga 12: Muhiimada ka qayb-galka qoysku u leedahay hab socodka ka gudbida heerka waxbarashada**

- Ugu dhambayntii, la wadaag qoraalka hoose:

  "Marka waalidka iyo caruurtiisa laga qayb geliyo hab socodka ka gudbida heerka waxbarashada, waxa jira fursado guulo waaweyn. Haddii aan qoyska si hagaagsan looga qayb gelin, waxa uu qoysku u baahan yahay in uu dhiirigelin iyo taageero ka helo macallimiinta, guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay iyo Ururada Dadka Naafada ah. Arrintani waxa ay muhiimad gaar ah u leedahay ardayda aan dugsiyada ka faa'iideynsan. Waa in aan hubinaa in cunug kasta laga taageeray ka gudbida heerka waxbarashada ee waxbarashada loo wada dhan yahay, iyada oo aan loo eegin sooyaalkiisa."

## Hawl-qabadka 5.3: Caqabadaha ay caruurtu la kulanto dugsiga ka hore – muqaal

Ujeeddada ugu muhiimsan ee hawl-qabadkan waa in ka-qayb-galayaasha lagu dhiirigeliyo in ay ka fekeraan waxyaabo ku saabsan guriga caruurtu ku nool yihiin, kuwaas oo raad ku leh dhigashada dugsiga ama ka qayb qaadashada waxbarashada iyo sida ay gacan uga geysan karaan in ay yareeraan raadka taban.

1 45 daqiiqo

## Tilmaamaha

- Ka-qayb-galayaasha u qaybi 3 kooxood. Koox kasta waxa ay xoogga saaraysaa arrin gaar ah, taas oo raad ku leh dhigashada dugsiga iyo ka qayb qaadashada waxbarashada marka ay ka gudbayaan heerka waxbarashada ee dugsiga maalin kasta.

**Power Point** **Xisadda 5: boggaga 13-14: Dugsiga ka hore**

- Ogow in ay jiri karaan arrimo kale oo muhiim u ah ka gudubka heerka waxbarashada ee ardayga ee dugsiga ee maalin kasta. Kuwaas waxaa ka mid ah caruurta oo loo caga jugleeyo marka ay dugsiga u socdaan, taas oo keeni karta cabsi iyo in ay ardaydu ka maqnaadaan dugsiga oo aysan si firfircoon uga qayb gelin waxbarashada. Hawl-qabadkani waxa uu xoogga saarayaa hurdada, quraacda iyo shaqada guriga.

- Kooxda 1 waxa ay xoogga saaraysaa **hurdada**, kooxda 2 waxa ay xoogga saaraysaa q**uraacda**, kooxda 3 waxa ay xoogga saaraysaa **shaqada guriga.** U qaybi koox kasta tilmaamaha ku jira **Agabka 5.3a** (eeg sadex da sanduukh ee hoose). Koox kasta waa in ay magacawdaa qof xog-hayn ah.

**Kooxda 1, ka fekera arrimaha la xiriira hurdada.**

Soo qaado gobol warqad ah oo dhexda ku sawir cunug hurda. Ka dibna ka dooda qodobada soo socda oo qoraal kooban ku qor warqad.

- Maxaa sabab u ah in caruurtu ku nool deegaankiina in aysan helin hurdo ku filan?
- Sidee hurdo la'aantu raad ugu yeelanaysaa in ay caruurtu waxbarashada ka wada qayb galaan?
- Sidee hurdadu u taageertaa ka qaybgalka waxbarashada loo wada dhan yahay ee caruurta?
- **Maxaa la samayn karaa** si loo hubiyo in ay caruurtu heleen hurdo ku filan?

**Kooxda 2, Ka feker arrimaha ku saabsan quraacda.**

Soo qaado gobol warqad ah oo dhexda ku sawir cunug quraac cunaya ama sawir saxan iyo qaado. Kadibna ka dooda qodobada soo socda oo qoraal kooban ku qor warqad**.**

- Maxay tahay sababta aysan caruurta ku nool deegaankaaga aysan u soo quraacan ka hor inta aysan iman dugsiga.
- Sidee quraac la'aantu raad ugu yeelanaysaa in ay caruurtu waxbarashada ka wada qayb galaan?
- Sidee quraacdu u taageertaa ka qaybgalka waxbarashada loo wada dhan yahay ee caruurta?
- Maxaa la samayn karaa si loo hubiyo in ay caruurtu wax soo cuneen ka hor inta aysan dugsiga iman?

**Kooxda 3 Ka fekera arrimaha la xirira shaqada guriga.**

Soo qaado gobol warqad ah oo dhexda ku sawir cunug shaqo guriga ka qabanaya. Ka diba ka dooda qodobada soo socda oo qoraal kooban ku qor warqad**.**

- Maxay tahay shaqada ay caruurtu qabtaan? Maxay tahay sababta?
- Sidee shaqada guriga, beerta ama bulshada dhexdaada laga qabto ay raad xun ugu yeelan kartaa waxbarashada caruurta?
- Sidee waxbarashada caruurta uga faa'iideysan kartaa shaqada?
- **Maxaa la samayn karaa** si loo hubiyo in shaqada caruurtu aysan six un raad ugu yeelan waxbarashada caruurta ee loo wada dhan yahay?

· Koox kasta waa in ay ka fekertaa markii ay ahayeen dhalinyaro ama caruur. Isku day in aad bixiso tusaalooyin si aad u soo muujiso qodobada aad ka doodaysaan.

· 15 daqiiqo ka dib, haki hawl-qabadka, hase yeeshee ha weydiin ka-qayb-galayaasha in ay falcelin sameeyaan. U sheeg ka-qayb-galayaasha, in hadda la daawan doono muuqaal kale oo ay diyaarisay EENET oo laga soo qaatay "Maalinta ka wada qayb galka dugsiga" ee taxanaha oo ladhaho "**Dugsiga ka hor".** (Muqaalkan waxa uu ku jiraa cajalad taas oo la idin siiyay xilligii xirmada aasaasiga ee tababarka, waana taxane ka kooban 10 muuqaal oo ku saabsan maalinta loo wada dhan yahay ee dugsiga.

- Inta ay daawanayaan muuqaalka, u sheeg ka-qayb-galayaasha in ay ka fekeraan in uu jiro wax ay ku darayaan shaqo kooxoodkooda ku saabsan 'Hurdada', 'Quraacda' iyo 'Shaqada'

- Muuqaalka waxa uu soconayaa 7.30 daqiiqo oo ka daawada: https://www.youtube.com/watch?v=fhi1PiMoYLc. Qoraal ku saabsan muuqaalka waxa aad ka heli kartaa **Agabka 5.3b**

- Marka la daawado muuqaalka, sii ka-qayb-galayaasha 10 daqiiqo oo ay kaga doodaan wixii ay ku soo arkeen muqaalka iyo in ay jiraan wax ay jecel yihiin in ay ku daraan wixii ay warqada ku qoreen.

- Ugu dambeyntii u sheeg koox kasta in ay warqada ku dhejiyaan derbiga.
- Qof ka mid ah koox kasta ha istaago warqada ay kooxdu qortay dhinaceeda. Inta kale ee kooxdu waxa ay booqnayaan warqadaha ay qoreen kooxaha kale, si ay u ogaadaan waxa ay ka doodeen. Waxay ay ku dari karaan qodobo dheeraad ah, haddii ay ula muuqato in ay wax ka tageen. Taas badelkeed, ka-qayb-galayaashu waxay ku dhex soconaya fasalka gudihiisa oo akhrinaya wax ay qoreen kooxaha kale.
- 5-10 daqiiqo ha qaadato in la akhrinayo warqad kasta, ka dibna ha loo gudbo warqada kale.

## Xogta tababaraha

Waxa aad adeegsan kartaa fekradahaan si aad u dhammaystirto waxa aysan ka jawaabin ka-qayb-galayaashu ama aad u caawiso, haddii ay ku adkaato in ay ka jawaabaan.

### Hurdada

**Maxaysan caruurtu u helin hurdo ku filan?**

- Buuqa, deganaansho la'aanta, shaqo guriga oo badan, ka shaqaynta layliyada, xanuun, farxada, naxdinta.
- Daawashada cayaaraha/filimada, adeegsiga baraha bulshada habeenkii xilliyada dambe.

**Hurdo la'aantu waxa ay siyaabo kala duwan raad ugu leedahay waxbarashada caruurta ee loo wada dhan yahay.**

- Feejignaan la'aan, xasuusta oo yar, niyad xumo, fasalka oo lagu dhex seexdo, jirka oo aan wada shaqaynayn, cunuga oo aan jeclayn in uu la cayaaro caruurta kale, dabeecad adag.

**Maxaa la samayn karaa si loo hubiyo in caruurtu helaan hurdo ku filan si ay si wanaagsan wax u bartaan?**

- Ogow caruurta daalan ama dugsiga ku dhex seexata (iyada oo la adeegsanayo guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay ee dugsiga). La hadal caruurta iyo waalidkood si loo ogaado sababaha keenay arrimaha la soo sheegay.
- Waalidka sii talo ku saabsan muhiimada ay hurdadu caruurta u leedahay ama ku dhiirigeli in ay u tagaan xarumaha caafimaadka ee deegaanka ama xarumaha adeegga bulshada si ay u sameeyaan ololе ku saabsan caafimaadka iyo bedqabka hurdada caruurta.

## Quraacda

**Maxay tahay sababta aysan caruurtu aysan u soo quraacan ka hor inta aysan dugsiga tegin.**

- Qoyska oo aan awoodin, waalidka oo aad uga mashquula in ay quraac u sameeyaan caruurta, ama waalidka oo shaqada goor hore aada oo aan hayn waqti ay quraac ku sameeyaan. Tusaale ahaan, in ay caruurtu shaqo qabtaan, ama ay dugsiga muddo dheer u socdaan ama ay goor dambe subixii kacaan.

**Raadka ay quraac la'aantu ku leedahay waxbarashada caruurta ee loo wada dhan yahay.**

- Feejignaan la'aan iyo xasuus yari, niyad jab, caadifad yaraan, welwel, welbahaar, dugsiga oo laga tago iyo hab-dhaqan xun.
- Ma awoodaan in ay ka qayb qaataan cayaaraha sida kubada(banooniga).
- Raad xun ayay ku yeelayataa koritaanka jirta iyo maskaxda.
- Dugsiga oo laga maqnaado, taas oo keenta in ay ardaydu dugsiga ka haraan ama ay imtixaanka ku dhacaan.

**Maxaan samayn karnaa si aan u hubino in ay caruurtu soo quraacdeen inta aysan iman dugsiga ka hor?**

- Ogow cunuga baahan. La hadal waalidka iyo caruurta si aad u ogaato sababta aysan caruurtu cunto u soo cunin. U sharax muhiimada ay quraacdu u leedahay waxbarashada oo ku dhiirigeli waalidka in ay caruurta quraac siiyaan haddii ay heli karaan.
- Waalidka ku xir xarumaha caafimaadka ama adeegga daryeelka, haddii ay jiraan taageero qoysaska la siiyo, gaar ahaan qoysaska ay ku adag tahay inay quraac siiyaan caruurtooda.
- Kala shaqee dugsiga ama guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay ee dugsiga si dugsiga quraac loogu siiyo caruurta, taas oo ay taageereen bulshada ama ganacsatada deegaanka.
- La shaqee ururada ay suurogalka tahay inay waalidka ka taageeraan sidii ay dakhli u samaysan lahaayeen si ay u awoodaan in ay quudiyaan caruurtooda.
- La xiriir barnaamijka quudinta caruurta ee hay'adda WFP ama kuwo kale.

**Shaqada**

**Maxay tahay shaqada ay caruurto qabato?**

- Shaqada guriga sida nadaafada, cunto karinta, biyo dhaanka, xaabo guriga, xanaanaynta caruurta, dadka waaweyn, naafada, xoolo raacista, wax iibinta, beerista, jarista iyo miro gurashada.

**Maxay tahay sababta ay shaqadu caruurta ugu yeelatay raad xun oo ku saabsan waxbarashada loo wada dhan yahay ee caruurta?**

- Caruurta oo daalan ama dugsiga ka soo dib dhaca mar kasta.
- Caruurta oo dugsiga ka daahda, oo casharka ka maqnaata
- Caruurta oo dugsiga taga iyaga oo aan nadiif ahayn ama la ciqaabo
- Caruurta waxa suurogal ah in ay shaqada ay ka helayaan lacagta ay uga faa'iido badan tahay dugsiga oo ay markaas dugsiga ka haraan kal hore.

**Sidee shaqadu uga qayb-qaadan kartaa waxbarashada?**

- Caruurtu waxa ay baran karaan xirfadaha gacan wax ka qabashada, falanqaynta iyo xalinta mushkiladaha, kuwaas oo muhiim u ah nolosha oo ka caawinaya waxbarashada.
- Caruurtu waxa ay yeelanayaan dareen masuuliyadeed, isku kalsooni iyo hal-abuur.
- Shaqada guriga waxa suurogal in ay qoyska ka caawiso in dhaqaale soo galo, taas oo awood u siinaysa qoysasku inay caruurtooda u diraan dugsiyada

**Maxaan samayn karnaa si aan u hubino in shaqadu aysan si xun raad ugu yeelan waxbarashada loo wada dhan yahay ee caruurta?**

- Waxaad la hadli kartaa caruurta iyo waalidkood si aad u ogaato shaqada ay caruurtu qabato, gaar ahaan haddii aad ka shaki qabto in shaqadu ay caruurta si xun raad ugu yeelatay.
- Waalidka ku dhiirigeli in ay shaqada ka yareeyaan caruurta ama jadwalkeeda badalaan si aysan saameyn ugu yeelan imaatinka dugsiga.
- Dugsiga u sheeg in uu wax ka bedelo nidaamkiisa, sidaas darteed waxaa casharada la bilaabi karaa goor dambe ama caruurta subaxdii shaqaysa in aan la ciqaabin.
- Isku xir ururada deegaanka ee awooda u leh in ay waalidiinta ka caawiyaan sidii ay dhaqaale u soo saari lahaayeen, sidaas darteed qoysasku way ka maarmi karaan in ay ku tiirsanaadaan shaqada caruurtooda.

- Si guud uga falceli koox kasta, kaas oo ku saabsan sida istiraajiyadaha muhiimka ah ay wax uga qabanayaan saddexda arrimood. Arrintani waa in ay keentaa talooyin ku saabsan su'aasha ah 'waxa aan aan samayn karno.....?

- Tus soo bandhniga muuqaalka ku saabsan barnaamijka quudinta dugsiga oo weydii ka-qayb-galayaasha sida uga war hayaan hal-abuurada ka mid ka ah ee ka jira deegaanka.

**Power Point** **Xisadda 5: bogga 15: barnaamijka quudinta dugsiyada**

# Xisadda 6: Kaalinta Ururada Dadka Naafada ee ogaanshaha caruurta dugsiyada ka maqan iyo taageerida ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay

**Fariimo muhiim ah**

- Ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay waxa uu ka bilowdaa guriga iyo bulshada, arrintaas oo soconaysa marka dugsiga gaaro oo uu fasalka galo. Taageerida ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay waxaa ka masuul ah waalidka iyo dadka caruurta haya iyo sidoo kale shaqaalaha dugsiga iyo macallimiinta.
- Ururada Dadka Naafada ah waxa ay fure u yihiin ogaanshaha caruurta dugsiyada ka maqan iyo fududeynta ka gudubka heerka waxbarashada loo wada dhan yahay. Kaalinta ay ka qaadan karaan arrimahaa oo kala duwan waxaa ka mid ah:
  - **Raadinta iyo ururinta xogo si loo cadaymo loogu helo is bedelka**
  - **Fududeynta wadashaqeyn si loo dhiso iskaashi iyo isku xirnaan xooggan oo ku saabsan is bedelka.**
  - **Kor u qaadista wacyigelin ku saabsan is bedelka ee looga baahan yahay waxbarshada loo wada dhan yahay.**
  - **Adeegsiga siyaasada si saameyn loogu yeesho go'aan gaarista ku saabsan is bedelka**
  - **Kormeerka iyo taageerada hab socodka is bedelka ee waxbarashada loo wada dhan yahay.**

## Xogta aasaasiga ah tababaraha

Xisaddan waxa ay sharxaysaa istiraajiyado kala duwan oo taageeraya ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay. Waxaa ay eegaysaa istiraajiyada ku saabsaabsan dugsiga ama guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay iyo sidoo kale hal-abuurada ama taageerada ay ku bixiyaan ururada deegaanka sida Ururada Dadka Naafada ah.

In taas waxaa dheer, in xisaddani ay furayso dood ku saasban fursadaha wada shaqaynta ku saabsan ogaanshaha ardayda dugsiyada ka maqan iyo taageerada ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay ee heer kasta. Hawl-qabadka ugu dambeeya waxa laga codsanayaa dugsiyada tijaabada ah in ay la wadaagaan istiraajiyadaha ay ilaa hada layimaadeen si loo ogaado

ardayda dugsiyada ka maqan iyo taageerida kala guurka heerarka. Waxaa lala wadaagi doonaa dulmar kooban oo ku saabsan siyaasadaha heer qaran ee guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay ama dugsiyada tijaabada ah ama waxa ay la wadaagi doonaan kasoo qeybgalyaasha tababarka xog ku saabsan deegaankooda. Marka ka qeybgalayaashu ay bulshada tababaryaan, xubnaha metalaya guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay, xiriiriyaha waxbarashada loo wada dhan yahay ama maamulayaasha dugsiyada dugsiyada tijaabada ah waxa ay soo jeedin karaan hababkii/istaraatijiyadii ay isticmaaleen. Waa arrin muhiim ah in si gaar ah xoogga loo saaro istiraajiyadaha taageeraya ka gudubka heerka waxbarashada ee xilliyada collaada iyo abaaraha, iyo sidoo kale dib ugu noqoshada dugsiga marka dugsiyada dib loo furo.

### Xisaddan, ka-qayb-galaaysha waxa ay:

- ü Sharxi doonaan istiraajiyadaha kala duwan ee taageerida ka gudubka heerka waxbarashada.
- ü Ka doodi doonaan fursadaha wada shaqaynta ee dugsiyada tijaabada ah ama guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay ee dugsiga si loo ogaado ardayda dugsiyada ka maqan oo loo taageero ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay.

## Hawl-qabad 6.1: Adeegsiga siyaasad taageeraysa ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay

1 60 daqiiqo

### Tilmaamo

- Xasuusi ka-qayb-galayaasha in xisaddii 2aad lagu soo qaatay siyaasado muhiim ah oo dhowraya xaquuqda waxbarashada caruurta ee Soomaaliya.
- U sheeg in hadda in la eegi doono sida aan u awoodno in siyaasadahaasi ay taageeraan oo raad ku yeeshaan ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay.
- U sheeg ka-qayb-galayaashu in ay kooxo isu qaybiyaan

- U sharax ka-qayb-galayaashu in ay samayn doonaan jilitaan ku saabsan shirka guddiga waxbarashada bulasha, kaas oo ay ka soo qayb geli doonaan Ururada Dadka Naafada ah.

- Koox kasta sii nuqul ka mid ah **Agabka 6.1: Adeegsiga siyaasada si raad loogu yeesho is bedelka.**
- Kor u akhri xaladda ku qoran aqabka, sidaas darteed qof kasta waxa u cad waxa ay xaaladdu ku saabsan tahay iyo waxa loo baahan yahay in ay sameeyaan.

- Hubi in kooxaha oo dhan ay haystaan:
  - Nuqul ka mid ah dastuurka ku meel gaarka ah ee Soomaaliya (2012) (**Agabka 2.2a**)
  - Qodobka 24 ee **Axdiga Qaramada Midoobay ee Xaquuqda Dadka Naadafa ah (Agabka 2.2c)**

**Power Point** — **Xisadda 6: bogga 1: Tilmaamaha jilitaanka**

- U sheeg kooxaha in ay ku bixiyaan 10 daqiiqo diyaarinta jilitaanka iyo in ay ka fekeraan kaalintooda. Kormeer oo caawi kooxaha haddii loo baahdo

- U sheeg kooxaha in ay bilaabaan jilitaanka. Waxa uu qaadanayaa 35 daqiiqo.

- Inta uu socdo jilitaanku, kormeer oo dhegayso arrimaha ugu muhiimsaan iyo qodobada ay sheegeen. Waxa suurogal ah in aad u baahan tahay in aad qodobadaas tixraac ka dhigato marka ay dooda guud sameynayaan ee ka dambaysa jilitaanka.

**Power Point** — **Xisada 6 bogga 2: Su'aalaha jilitaanka ka dambeeya**

- Marka ay kooxuhu sameeyaan jilitaanka, u sheeg qof kasta in uu dib ugu noqdo meeshiisi. Soo bandhig su'aalaha oo u sheeg kooxaha in ay ka doodaan su'aalahan:

  - Sidee ayey waxtar u lahaayeen in labada siyaasadood loo adeegsado si ay guddiga waxbarashada looga doodo dhibaata caruurta?
    - Haddii ay ahayd mid waxtar leh, sidee siyaasaduhu u caawiyeen?
    - Haddii aysan waxtar lahayn, maxay tahay sababtu?

- ü Tani ma ka dhici kartaa noloshada dhabta ah?
- ü Xal wanaagsan ma ka soo baxay dooda, kaas oo caawinaya in caruurtu dugsiga dhigtaan oo la taageero ardayda horey dugsiyada u dhigan jirtay.
- ü Ma jiraan wax dib looga milicsado jilitaanka oo ka caawin kara ururada dadka naafada ah in ay ka taageeraan dugsiyada ka gudbida heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay.

## Hawl-qabad 6.2: Sheekada Hodan iyo Yaasmiin

1 30 daqiiqo

### Tilmaamo:

- U sheeg ka-qayb-galayaasha in aad doonayso in kor loo akhriyo labada sheeko. Sheekooyinku waxa ay ku saabsan yihiin arday la kulantay h caqabado markay u gudbeen dugsi dhigasho iyo markay dugsigyada u kala gudbayeen.
- Kor u akhri marka hore sheekada Hodan. **Agabka 6.2a: Sheekada Hodan.** Si tartiib ah oo cad u akhri, si qof walbaa ulasocdo sheekada.
- Tus soo bandhigida (Powerpoint) watasu'aalaha (hoos) oo si guud u weydii ka-qayb-galayaasha su'aalaha, kuna qor jawaabahooda warqad. Haddii aad filayso in ay ka-qayb-galayaashu u baahan yihiin waqti ay dib wax ugu milicsadaan sheekada, u sheeg inay si kooban labo-labo uga doodaan su'aalaha marka hore.

**Power Point** **Xisad 6: bogga 3: Su'aalaha dooda**

- Maxay tahay baahida Hodan?
- Maxay yihiin istiraajiyada wax looga qaban karo baahideeda?
- Maxay samayn karaa dugsiga ama guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay ee dugsiga?
- Sidee Ururada Dadka Naafada u taageeri karaan guusha ka gudubka heerka waxbashada?

- Ka dib akhri sheekada Yaasmiin, **Agabka 6.2b: Sheekada Yaasmiin**, ka dibna raac tilaabooyin la mid ah kuwii hore. Mar kale, warqad ku qor jawaabta ka-qayb-galayaasha.

- Ugu dambayntii, weydii ka-qayb-galayaasha, haddii ay ka war hayaan dhibaato lamid ah oo ka jirta deegaankooda. Mid ama labo ka mid ah ka-qayb-galayaashu waxa ay sheegi karaan tusaalooyin haddii ay hayaan.

| **Xogta tababaraha** |
| --- |
| Ujeeddada hawl-qabadkani waa in la sheego fikrado ku saabsan siyaabo kala duwan ee gacan ka geysan kara ka gudbida heerka waxbarshada si loo wada dhan yahay. Ma jirto jawaab sax ah iyo mid khaldan madaama ay jiraan siyaasado kala duwan oo caawin kara in wax laga qabto dhibaato isku mid ah. Warqad ku qor fikradaha inaga caawinaya in la diyaariyo hawl-qabadka 6.3 |

## Hawl-qabadka 6.3: Siyaasada ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay

1 60 daqiiqo

- Xasuusi ka-qayb-galayaasha in ka gudbida heerka waxbarashada ee guulaysata ay u baahantahay in ay **taageero ka hesho guriga.** Waxay u baahan tahay wada shaqayn ka dhexaysa dugsiga iyo waalidka iyo qoysaska si ay u fudedeeyaan hab sami u socodka ka gudbida heerka waxbarashada, gaar ahaan ardayda baahiyaha gaarka ah leh.

- U qaybi koox kasta kaararka ku jira **Agabka 6.3a: Kaararka caqabadaha** iyo **Agbaka 6.3b: Kaararka istiraajiyadaha**. Waa in midabo kala duwan lagu qoro kaararka ku jira **Agabka 6.3a** iyo **Agabka 6.3b**.

- U sheeg ka-qayb-galayaasha in ay aqoonsadaan qaar ka mid ah caqabadaha, maadaama qaar ka mid ay horey ugu soo arkeen casharka 5 oo qeexaya ardayda khibradaha kale duwan u leh ka gudubka heerka waxbarashada.

**Power Point** **Xisadda 6: bogga 4: Istiraajiyadaha ka gudubka waxbarashada ee loo wada dhan yahay**

- U sheeg ka-qayb-galayaashu in ay isku aadiyaan istiraajiyadaha iyo caqabadaha ay wax ka qabanayaan. U sheeg in aysan ahayn hal kii kaar ee istiraatiijiyad inuu waxkaqaban karo hal carqabad; Dhawr istiraatiiji baa laga yaabaa inay dhawr carqabadood xaliyaan. Sidaas darteed, waxaa laga rabaa kooxaha in kaararka koox koox u dhigaan si ay u muujiyaan istiraajiyadaha la xiriira dhowr caqabadood.

- U sheeg ka-qayb-galayaasha istiraajiyadaha in ay ka mid yihiin masuuliyado dugsigu leeyahay iyo masuuliyada ay leeyihiin guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay ee dugsiga oo wada shaqayn la leh ururada dadka naafada ah ama ururada kale.

- Kaarka banaan, ka-qayb-galayaashu waxa ay ku qori karaan caqabadaha iyo istiraajiyadaha, haddii ay ka-qayb-galayaashu ogaadaan wax caqabad ah inta ay doodu socoto waxqabadku.

- 15-20 daqiiqo ka dib, u sheeg kooxaha in ay ka falceliyaan go, aanada ay ka yeesheen waxyaabaha ku haboon istiraatiijayadaha ku haboonoo ha ka doodaan:

  - ü Kuwaasi ma yihiin siyaasado waxtar leh?
  - ü Arday/dugsi/qoys/bulsho keebaa leh masuuliyada inuu fuliyo istiraatiijiyadaas?
  - ü Istiraajiyadee ayey ururada dadka naafada ah taareegi karaan?



Isku aadinta istiraajiyada iyo caqabadaha

[Sharaxaada muuqaalka: Lix nin oo ka mid ah tababarayaasha oo ku tiirsan miiska hareerihiisa. Miiska waxaa dul saaran kaararka cad ee ‘istiraajiyadaha’ iyo kaararka jaalaha ah ee ‘caqabadaha’, kuwaas oo ay tilmaamayaan oo ay kor u qaadanayaan.]

Tixraaca tababaraha, shaxda hoose waxay ku talinaysaa caqabadahay iyo istiraajiyadaha iskuxiran:

<table>
<tr><th>Caqabadaha</th><th>Istiraajiyadaha</th></tr>
<tr><td>Ma heli karo jid loo maro dugsiga cusub.</td><td>Ardayda cusub bar goobta oo sii khariidada oo isku xir ardayda isku faca ah (Tusaale, saaxiibka fasalka) si uu u caawiyo in ay wadooyinka dugsiga u helaan.</td></tr>
<tr><td>Dugsiga cusub wuu ka fog yahay gurigayga oo waxaan ka baqayaan in aan keligay aado.</td><td>Ku dhiirigeli ardaydu in ay istaageeraan marka ay dugsiga u socdaan iyo marka ay dusgiga ka imanayaan.</td></tr>
<tr><td>Waalidkay waa sabool oo ma awoodaan in ay iga bixiyaan lacagta dugsiga.</td><td>Ku dhiirigeli waalidka in ay caruurtooda geeyaan dugsiyada caadiga ah, kuwaas oo ay lacagtoodu yar tahay.</td></tr>
<tr><td>Waalidkaygu uma muuqato in ay qiimo leedahay waxbarashada dugsiga sare oo aan sii wato. Waxa ay doonayaan in aan shaqaysto intii aan dugsi sare dhigan lahaa.</td><td rowspan="2">Si joogta ah qoysaska iyo bulshada ugu wacyi geliya xaquuqda waxbarashada ee caruurta oo kala hadla qoysaska qiimaha mustaqbalka ee ay waxbarashadu caruurta u leedahay.</td></tr>
<tr><td>Intii lagu jiray xiritaanka dugsiga, waxa aan bilaabay in aan ka ganacsado canjeelo oo waxa aan dareemayaa in aan loo baahnayn in aan dugsiga dib ugu noqdo.</td></tr>
<tr><td rowspan="2">Waxaan guursaday xilligii karantiilka oo waxaan ka xishoonayaa in aan dugsiga dib ugu noqodo, maadaama ay ardayda aan is le’eg nahay ay igu qoslayaan.</td><td>Hubi in ay ardayda nugul helaan la talin iyo hagid (tusaale ahaan, dhalinyarada hooyooyinka ah)</td></tr>
<tr><td>Tixraac oo adeegso siyaasada iyo haggida dawlada si aad u taageerto ka gudbida heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay. (tusaale ahaan, dawladu waxa ay dejisay tilmaamo dhalinyarada hooyooyinka iyo aabayaasha ah ee dib ugu soo noqonaya dugsiga.</td></tr>
</table>

| Caqabadaha | Istiraajiyadaha |
|---|---|
| Waalidkey ma fahansana in aan layliyada guriga uga shaqeeyo. Waxa ay rabaan in aan caruurta xanaaneeyo oo aan shaqada guriga wax ka qabto. | Ku martiqaad waalidka ama dadka caruurta haya maalinta furitaanka dugsiga si laysula wadaago xog ka hor inta aan ardaygu fasalka tegin. U sharax waxa uu filayo dugsigu iyo sida ay waalidku iyo dadka caruurta haya looga qayb gelin karo waxbarashada caruurtooda. |
| Gabar ahaan, hadda waan weynahay, oo waa in aan shaqo badan ka qabto guriga. Arrintaasi waxa ay keentay in aan dugsiga ka dib dhaco oo aan dhib la kulmo | Awood u sii macalliinta ama xiriiriyaha waxbarashada loo wada dhan yahay ee dugsiga in ay booqdaan guryaha ardayda qaarkood si ay u ogaadaan baahida ardayda iyo xaaladda qoysaskooda. |
| Waalidkayga kama maqnaan karo maalinta oo dhan | Dugsigu waxa uu ku matri qaadi karaa waalidka iyo dadka caruurta haya fasalka( gaar ahaan xanaanada) si ay u caawiyaan fariisinta caruurtooda. Waalidka ka qayb geli samaynta qorshaha ka gudubka heerka waxbarashada iyo hawl-qabadyadeeda. |
| Waalidkey ma fahan sana naafonimadayda oo waxa ay ka welwelayaan in aanan dugsiga ka helin taageeradii aan u baahnaa. | Guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay ee dugsiga waa in ay ka qayb geliyaan xubnaha ururada dadka naafada ah in ay caawiyaan sida kor loogu qaadayo in ay bulshadu fahamto naafonimada oo ay taageerto ka gudubka heerka waxbarashada ee ardayda baahiyaha gaarka ah leh. |
| Waxaan doonayaa in aan dhigto dugsiga xirfadaha. Ma garanayo dugsiga loo wada dhan yahay ee ardayda baahiyaha gaarka ah leh. Ma jirto cid dugsigayga dhigata oo garanaysa. | Hubi in dugsiyada sare ay hayaan xog ku saabsan helitaanka doorashada waxbarasho loo wada dhan yahay ee jamacadeed iyo xirfadaha. |
| | Hubi in dugsiga sare, jaamaca iyo dugsiyada xirfaduhu ay bixiyaan kobcinta xirfada shaqada oo ay dhiirigeliyaan ardayda baahiyaha gaarka ah leh. |
| Horey uma arag dugsigayga cusub ka hor maalintii ugu horeysay ee dugsiga. Waan cabsaday. | Ka caawi ardayda in ay booqdaan fasalka ka sareeyo ama dugsiga ay u gudbayaan, si ay u gartaan waxyaabaha ku haraysan dugsiga, dadka iyo hab socodka ay marayaan inta aysan gudbin. |

| Caqabadaha | Istiraajiyadaha |
|---|---|
| | Dugsiga waxa uu isku duba ridi karaa 'maalinta hordhaca' inta lagu jiro xilliga dugsiga ka hor ka gudbida heer waxbarashada. Maalintaas ardayda cusub waxa ay la kulmi karaan macallimiinta wax u dhigi doonta sannadka soo socda, khibrada cashadara qaarkood iyo in ay la kulmaan ardayda ay mustaqbalka isku fasalka yihiin ee dugsiyada kale. |
| | Qorshee hawl-qabadka lagu dhisayo saaxiibtinimada usbuucyada ugu horeeya ee casharada. |
| Ma dareemayo in aan dugsiga ka mid ahey. | Hubi in dhammaan ardayda cusub laga qayb geliyey hawl-qabadyada hal-abuurka iyo ciyaaraha ee manhajka ku jira am aka baxsan, si durba ula qabsadaan bulshada cusub. |
| Waa la ii cago jugleeyaa oo waan cabsanayaa xilliga nasashada iyo xilliga qadada | Samee siyaasada ka hortaga cago juglaynta oo hubi in dadka shaqeeya xilliyada nasashada iyo qadada loo sheegay arrimaha ku saabsan ardayda cusub. |
| | Hubi in qof kasta ogyahay meesha ay tahay inuu tago haddii uu ogyahay inuusan badbaadayn (gaar ahaan xilliga nasashada ee dugsiga). |

## Hawl-qabad 6.4: Fursadaha wada shaqaynta: Maxay tahay kaalinta ururada dadka naafada ah ee taageerida dugsiyada?

1 90 daqiiqo

Hawl-qabadkan waxa uu dugsiyada tijaabada ah weydiisanayaa in ay soo bandhigaan istiraajiyadaha ay meelmariyeen ee lagu ogaanayo ardayda dugsiyada ka maqan iyo taageerada ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay ee jira.

Marka la joogo heer qaran waxaa lala wadaagi doonaa si kooban qorshaha hawl-qabadyada ee guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay ee dugsiga

ayadoo la isticmaalayo powerpoint ama xubnaha fududeeyaasha ah ee ururada dadka naafada ah waxa ay isla wadaagi karaan xog ku saabsan degmadooda.

Marka lajoogo heerka 2aad ee tababarka loogudbinayo bulshada, xubnaha metalaya guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay, xiriiriyaha waxbarashada loo wada dhan yahay ama maamulayaasha dugsiyada dugsiyada tijaabada ah waxa ay bixin karaan istiraajiyadaha ay haystaan.

Waa arrin muhiim ah in si gaar ah xoogga loo saaro istiraajiyadaha taageeraya ka gudubka heerka waxbarashada kadib xilliyada hayaanka iyo barakaca ama xilliyada collaada iyo abaaraha, iyo sidoo kale ka gudbida fasalada iyo dugsiyada.

**Power Point** **Xisadda 6: booga 5: Xogta ku saabsan dugsiyada tijaabada ah**

- Ku martiqaad dadka matelaya guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay ee dugsiga ama maamulaha in ay la wadaagaan waxa ay sameeyaan ee ku saabsan ogaanshaha ardayda dugsiyada ka maqan iyo taageerida ka gudbida heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay ee dugsiyadooda. U sheeg in ay xoogga saaraan istiraajiyadaha u baahan wada shaqaynta ee bah wadaagta dugsiga ama ururada kale. Soo bandhigidoodu waa in ay xoogga saartaa:

  - **Maxay sameeyaan dugsiyadu ama guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay ee dugsiyadu si u ogaadaan ardayda dugsiyada ka maqan?**
  - **Maxay yihiin istiraajiyadaha ay haystaan si ay u taageeraan ka gudbida heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay?**
  - **Ma jiraan istiraajiyad u gaar ah marka dugsiyada dib loo furo ka dib collaad iyo abaar si loo taageero ardayda xilliga dib ugu soo noqoshada dugsiyada?**
  - **Sidee ururada dadka naafada ah ay u taageeri karaan?**

- Weydii su'aalo ka-qayb-galayaasha oo u fur dooda soo bandhigida ka dib.
- Xooji muhiimada ay leedahay taageero isku xiran, taasoo ah in dugsiyadu la shaqaynayaan ururada, waalidiinta iyo adeegyada si loo hubiyo in ay ardayda iyo qoysaskooduba helaan waxbarasho.
- Ka dibna u sheeg in ka-qayb-galayaashu ay isku kooxeeyaan heer gobol (tusaale ahaan, Garoowe, Qardo, Kismaayo, Jawhar iyo Baydhabo, iwm).

Marka wax la kooxaynayo, tixgeli sida maangalka ah wax loo kooxayn karo ama aad u qaban karto dood guud.

**Power Point**

## Xisadda 6: bogga 7: Maxay tahay kaalinta ay qaadan karaan ururada dadka naafada ah?

- U sheeg kooxaha in 30 ilaa 40 daqiiqo ee soo socda ay koox ahaan uga doodi doonaan, iyaga oo xoogga saaraya su'aashan:

  **Maxay tahay kaalinta ay qaadan karaan ururada dadka naafada ay si ay dugsiyada uga taageeraan ogaanshaha ardayda dugsiyada ka maqan oo ay u taageeraan ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay?**

- U sheeg kooxaha inay sheegaan talooyin dhowr ah oo warqad ku qor.
- Ka dibna la wadaag bogga ay ku qoran yihiin kaalimaha muhiimka ah ee ay ururada dadka naafada ah ka qaadan karaan in ay dugsiyada ka taageeraan ogaanshada ardayda dugsiyada ka maqan iyo taageerida ka gudbida heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay:

  - o **Raadinta iyo ururinta xogo si loo cadaymo loogu helo is bedelka**
  - o **Fududeynta iskaashiga si loo dhiso hab-wadaag iyo isku xir xooggan oo ku saabsan is bedelka.**
  - o **Kor u qaadista wacyigelin ku saabsan is bedelka ee looga baahan yahay waxbarshada loo wada dhan yahay.**
  - o **Adeegsiga siyaasada si saameyn loogu yeesho go, aamada oo loo helo is bedel**
  - o **Kormeerka iyo taageerida hab socodka is bedelka ee waxbarashada loo wada dhan yahay.**

- U sheeg kooxaha in ay si faahfaahsan uga doodaan su'aasha muhiimka ah iyo kaalimada kala dudan.
  U sheeg kooxuhu in ay:
  - Tixgeliyaan wixii ay horey u soo bandhigeen dugsiyada ama guddida waxbarashada loo wada dhan yahay ee dugsiyada ama talooyinka ay bixiyeen ee ku saabsan sida ururada dadka naafada ah ay taageero u bixin karaan.
  - Ka fekeraan caqabadaha kala duwan iyo istiraajiyadaha laga soo dooday maalmihii la soo dhaafay.

- Kooxuhu waa in ay warqad ku qoraan fikradahooda, oo ay tusaalooyin keenaan haddii ay suurogal tahay.

- 30 daqiiqo ka dib, si guud, u weydii koox kasta in ay dib ula wadaagaan fikradahooda kooxaha kale, ka dibna faalo iyo su’aal ay ka dhiibtaan kooxaha kale.

# Agabka

Xiramada

3

# Agabka 1.1: Qeexidda arrimaha: Waa kuwee ardayda dugsiyada ka maqan? Maxay dugsiyada uga maqan yihiin?

## 1. Caqabadaha waaweyn ee hortaagan waxbarashada ardayda

Waxa jira caqabado waaweyn, oo isku dhafan oo hortaagan waxbarashada ardayda. Caqabadahaas waxaa loo kooxayn karaa saddex qaybood:

a) **Deegaanka iyo agabka**

b) **Hab-fikirka iyo aaminaanshaha**

c) **Siyaasadaha iyo hab-dhaqanka**

Waxaa suurogal ah in aad horey ula soo kulantay caqabadaha ka wada qaybqalka ee intii ay socdeen tababaradii ku saabsanaa waxbarashada loo wada dhan yahay. Caqabadaha ka wada qaybgalku waa caqabado raad ku leh **joogitaanka** dugsiga, ka **qayb-galka** hawl socodka barashada iyo **guul ka gaarista.**

Si dhaqso ah u xasuusi in ay caqabadaha ay ka mid yihiin:

- **Caqabadaha deegaanka:** tusaale ahaan, dhismaha dugsiga, waxyaabaha ku hareereysan dugsiga, iyo musqulaha oo aan la heli karin;
- **Caqabadaha agabka:** Tusaale ahaan, macallimiin yaraan, ardayda fasalka dhigata oo tiro badan.
- **Caqabadaha hab-fikirka:** Tusaale, cabsida, xishoodka, rajo xumo
- **Caqabadaha siyaasada:** tusaale, jadwalka dugsiga oo aan dabacsanayn, afka wax lagu barto.
- **Caqabadaha hab-dhaqanka:** tuseaale ahaan, habka waxbarista oo aan lahayn is dhexgalka iyo iskaashiga.

Buugga tababarkan, waxaan ku eegaynaa caqabadaha sababay in ay ardaydu dugsiyada ka maqan yihiin- kuwaas oo intooda badan la mid ah caqabadaha waxbarashada loo wada dhan yahay.

## a) Deegaanka iyo agabka

Deegaan waxaa loola jeedaa dhismayaasha iyo deegaanada dabiiciga ah, taas oo caqabad ku ah dal gaar ah, gobol gaar ah, degmo ama tuulo gaar, miyi ama magaalo.

Meesha uu ardaygu ku nool yahay ayaa raad ku leh ama dugsi ha dhigto ama yuusan dhigane. Tusaale ahaan, sida caadiga ah dugsiyo badan oo si hawl yar loo tegi karo ayaa ku yaala magaalooyinka, marka la eego deegaanada miyiga ah. Sidaas darteed, ardayda dugsiyada ka maqan waxa ay ku badan yihiin degaanada miyiga ah.[4] Deegaanada fog fog ee ay dugsiyadu ka fog yihiin meelaha ay la degan yahay, waxaa adag in dugsiga la aado (tusaale, buuraha waaweyn ee aan laga gudbi karin), kaabayaasha (tusaale ahaan, jidadka, buundooyinka) caqabadaha cimilada (tusaale ahaan, daadadka soo noqnoqda), taas oo ku adag ardayda qaar kood in ay taagaan dugsiyada tirada yar ee deegaanka laga heli karo. Deegaanada laga soo hadlay waxa ay ka qayb qaadan karaan in ay ardaydu dugsiyada ka maqnaadaan.

**Agabka** – sida **dhaqaalaha/agabka, dadka,** iyo **dhaqanka** – waxa ay raad ku leeyihiin waxbarashada ardayda. **Dhaqaalaha** qoyska iyo bulshada waxa uu raad ku leeyahay in ay qoysasku u diri karaan caruurta dugsiyada iyo in ay bulshadu leedahay dugsi ay caruurtu u dhigtaan iyo in kale. Qoysaska saboolka ah waxaa suurogal ah in ay ku tiirsan yihiin shaqada caruurtooda si ay u noolaadaan, sidaas darteed waxa ay waxbarashada caruurta ka dood bidayaan shaqadooda. Dugsiyada ku yaalada meelaha saboolnimadu ka jirto waxa ay dhibaato ku qabaan in ay helaan macallimiin, fasallo iyo agab ku filan si ay u taageeraan ardayda gaartay da'da dugsiga oo dhan.

Tirada macallimiinta oo yar ama aan tirada macallimiinta tababaran oo yar waa arrin la xiriirta **cududa shaqaalaha,** taas oo raad ku leh in ay ardaydu dugsiyada dhigtaan.

Qoysaska aan aqoonta u lahayn qorista iyo akhriska iyo aasaaska xisaabta, kuwaas oo aan soo marin waxbarashada tooska ah, waxaa suurogal ah in ay ku adkaato in ay caruurtooda ka taageeraan waxbarashada, taas oo keeni karta in aysan ardaydu dugsiyada dhigan ama ay ka haraan dugsiyada (arrintani sidoo kale waxa ay la xiriirtaa hab-fikirka iyo khibrada).

[4] UNESCO, 2005

## b) Hab-fikirka iyo aaminaanshaha

Hab-fikirka qofka, qoyska iyo bulshadu waxa uu noqon karaa qodobka ugu weyn ee ardaydu uga maqan yihiin dugsiyada. Tusaale ahaan, qoysaska iyo bulshada qaarkood waxa ay aaminsan yihiin in ardayda naafada ah aysan dugsiyada dhigan karin. Waxaa suurogal ah in qoysaska iyo bulshooyinka qaarkood ay dareemayaan in ay gabdhuhu guriga joogaan oo aysan dugsiyada dhigan. Ardayda qaarkood waxaa dugsiga ugu cago jugleeya ardayda kale (ama macallimiin), maadaama ay ka yimaadeen qoysas la takooro. Ardayda loo cago jugleeyo waxaa suurogal ah in ay dugsiyada ka haraan, si ay uga fogaadaan xadgudubkaas.

Waalidka iyo dadka caruurta haya oo aan dugsi horey u soo dhigan waxaa suurogal in ay qiimo badan u arag in ay caruurta u diraan dugsiyada. Cilmi baaris ayaa sheegaysa in khibrada waxbarashada ee hooyadu ay muhiim u tahay go'aanka ay hooyadu caruurta dugsiga ugu dirayso.[5] Cilmi baaris ay samaysay UNESCO (2005) waxa ay heshay in guud ahaan dunida, ardayda gaartay da'da dugsiga oo aysan hooyooyinkoodu wax baran ay dhici karto in ay caruurtoodu dugsiyada ka maqnaadaan in labo jeer ka badan yihiin caruurta ay hooyooyinkoodu wax barteen.

Waxaa marmarka qaarkood dhici kara in aqoon la'aantu ama fahan la'aanta iyo cabsidu ay keenaan hab-fikir xun.

## c) Siyaasadaha iyo hab-dhaqanka

Siyaasadaha heer qaran, deegaan iyo dugsi waxa ay ka qayb qaadan karaan caqabadaha sababay in ay ardaydu ka maqanaadaan dugsiyada. Tusaale ahaan, haddii uu dal uusan lahayn siyaasad ku saabsan waxbarashada lacag la'aanta, waxaa suurogal ah in arday badan ay dugsiyaga ka maqnaadaan, taas oo ay sabab u tahay waalidka ama dadka caruurta haya oo aan awoodin in ay bixiyaan lacagta dugsiga.

Haddii ay siyaasada dugsigu ay dhaqangelinayso in waxbarashada dugsiga la bilaabo subaxdii hore oo aysan dabac u lahayn ardayda dugsiga ka soo daacda. Siyaasadan waxa ka dhalan karta in dugsiyada laga faquuqo ardayda dugsiga ka soo daahda, kuwaas oo ka yimaada meelo fog fog.

[5] UNESCO, 2005

Hab-dhaqanka, gaar ahaan dhaqan-gelinta barista iyo barashada waxa ay raad ku leedahay khibrada ardayga ee dugsiga. Ardayda qaarkood waxa ay go'aan sadaan in aysan dugsiga aadin, maxaa yeelay waxa ay dareemayaan caajis, xiiso la'aan iyo farxad la'aan. Habka wax barista ee macallinka xudunta u yahay iyo habka wax barista ee joogtada ah waxaa suurogal ah in lumiyaan xiisaha ardayda ee fasalka ama ay dugsiga ka baxaan. Waxa kale oo suuragal ah in ay dugsiga tagaan iyaga oo ka cabsanaya ciqaab. Arrimahaas oo dhan waxa ay xiriir la leeyihiin hab-dhaqanka. Inta badan, habdhaqanka waxbarista oo liita waxaa sababa tababarka macallimiinta oo liidata.


## 2. Caqabadaha gaarka ah ee ardayda dugsiga ka horjoogsada

Waxaa jira caqabado gaar ah oo ardayda dugsiyada ka horjoogsada. Caqabadaha guud iyo kuwa gaarka ah ee raad ka yeesha imaatinka ardayga ee dugsiga waa kuwo isku xiran, arrintaas waxa ay noqonaysaa mid aad u cad marka la geero arrimaha sababay.

# Caqabadaha isku-xiran ee waxbarashada loo wada dhan yahay




Tiro yar oo macallimiin ah oo tababaran



Macallimiin tiro yar oo tababaran iyo fasalo arday tiro badan



Ardaydu waxa ay helaan waxbarasho tayo hoosaysa




Ardaydu dugsiga waxa ay uga haraan in aysan wax baranayn darteed



Waalidka iyo dadka caruurta haya ma dareensana qiimaha ay leedahay in ay caruurta dugsiyada u diraan

iyo




Dugsigu waxa uu ka fog yahay gurayaha ardayda

Marka laga sootago in ay fudud yihiin, haddana ma jiro sabab keliya ee caruurtu ay dugsiga uga haraan. Inta badan waxaa jira sababo isku xiran oo saamayn leh. Tusaale ahaan, tiro yar oo macallimiin ah oo tababaran, waxa ay sababi karaan in dugsigo helo hal macalin oo macallimiin uu tababarkoodu liito ay masuul ka noqdaan fasalo ay dhigtaan arday tiro badan. Arrintani waxa ka dhalan karta in ay ardaydaasi helaan waxbarasho tayo liidata iyo in ay ardayda qaarkood dugsiga ka haraan, madaama aysan waxba ka baranayn dugsiga ama uu waaldiku dareemo in aysan qiimo lahayn in caruurta dugsiyada loo diro. Waxa kale oo suurogal ah in dugsigu uu aad u fog yahay, taas oo raad ku yeelata imaatinka ardayda ee dugsiga.

Tusaalaha sare, waxaan oran karnaa wax barista liidata ayaa sabab u ah in ay ardaydu dugsiyada ka haraan. Si kasta ha ahaatee, arrintani waxba kama qaban karto sababta ka dambaysa tayo darada wax barista (macallimiinta oo yar, tababarka habka wax barista ee ardaygu xudunta u yahay iyo maamulka fasalka oo aan jirin) ama arrimaha kale ee ka qayb qaadanaya in ay ardaydu dugsiyada ka haraan (sida hab-dhaqanka iyo khibrada waxbarasahda ee waalidka ama dadka caruurta haya).

Qaar ka mid ah caqabadaha gaarka ah ee ardayda ka horjoogta dugsiyada waxaa ka mid ah:

- Da'da;
- Colaadda iyo masiibooyinka;
- Naafanimada;
- Isirka iyo Dhaqanka
- Jinsiga
- Caafimaadka
- Afka/luuqada
- Tahriibta/hayaanka
- saboolnimada

## Da'da

Da'du waxa ay raad ku leedahay in ay caruurtu ka haraan dugsiyada. Marka uu ardaygu dugsiga bilaabo goor dambe (ka dib ardayda ay isku faca yihiin) ama uu fasalka ku soo noqdo, waxa inta badan suurogal ah inuu dugsiga ka haro

inta uusan dhammaysan.[6] Meelaha qaarkood, waxa ka jirta in culays la saaro in ardaygu uu shaqeeyo isaga oo da' yar, taas oo ka reebaysa dugsiga.

## Colaada iyo Masiibooyinka

Colaadaha (sida dagaalada sokeeye) iyo masiibooyinku (sida fatahaadaha, dul gariirka) waxa ay noqon karaan arrinta ugu weyn ee ardayda dugsiyada ka reebta. Waxa suurogal ah in dugsigu uu burbur soo gaaro ama la burburiyo dhammaantiis. In dugsiga la aado ama laga yimaado waxa ay noqon kartaa mid aan lagu badbaadi karin. Xitaa marka uu dugsigu furan yahay, waxa suurogal in aysan ardaydu ku badbaadi karin. Dalalka qaarkood, ardayda waxaa lagu khasbaa in dagaalada ka qayb qaataan.

## Naafonimada

Ardayda naafada ah inta badan waa la faquuqaa. Taasna waxa sabab u noqon kara:

- Hab-fikirka iyo aaminaanshaha- meelaha qaarkood, dadku waxa ay aaminsan yihiin in ardayda naafada ah aysan dugsiyada dhigan karin;
- Tegitaanka- dugsiyada waxaa suurogal ah in aysan tegi karin ardayda naafada ah;
- Agab iyo awood la'aan- dugsiyada qaarkood (waxay aaminsan yihiin in aysan haysan) waxa aysan haysan agab iyo awood, marka laga eego tirada shaqaalaha, tababarada si ay si hagaagsan wax u baraan ardayda naafada ah.

## Isirka iyo dhaqanka

Ardayda waxa suurogal ah inay dugsiyada uga maqan yihiin dhaqan ama isir ahaan. Arrintani waa mid inta badan la xiriirta dadka laga tiro bdan yahay. Colaadda ku salaysan isirka ayaa suurogal ah in ay xaalada uga siidarto. Ardayda qaarkood waxaa suurogal ah in ay dugsiga ka baxaan haddii ay la kulmaan hayb-sooc iyo cago-juglayn ku salaynsan isirkooda

Waalidka ama dadka caruurta haya qaarkood, waxa ay caruurta ugu diri waayaan, dugsiga oo aan lagadhigan dhaqanka qoyskooda.

[6] UNESCO, 2005

## Jinsiga

In kasta oo ay xaaladu is bedelayso, haddana waxaa weli jira in gabdhuhu ku badan yihiin ardayda dugsiyada ka maqan dunida oo dhan. Gobolada qaarkood, waxa ka jirta saami balaaran oo gabdho ah oo dugsiyada ka maqan iyo gobolo kale oo ay is le'eg yihiih wiilasha iyo gabdhaha dugsiyada ka maqan ama boqolay sare oo wiilal ay dugsiyada ka maqan yihiin, gaar ahaan wadamada warshadaha leh.[7]

Hab-fikirka xun iyo dhaqanka guracan waxa uu sii wadaa in uu raad ku yeesho waxbarashada sida gabdhaha yar yar oo guurka lagu khasbo, taas oo aad u yaraynaysa in ay dugsiyada dhigtaan.

## Caafimaadka

Caafimaadka oo liita sababo la xiriira nafaqo xumo iyo cuduro, waxa suurogal ah in ay ardaydu dugsiyada ka maqnaadaan. Waxaa jira takoor la xiriira cudurada qaarkood sida AYDHISKA, taas oo keenaysa in qofka laga saaro bulshada ama dugsiga. Caafimaadka waxaa si toos ah ula xiriira caqabado kale sida saboolnimada, colaaddaha iyo masiibooyinka.

## Afka/luuqada

Afka dugsiga wax looga barto waxa uu noqon karaa caqabad haddii ay kala duwan yihiin afka ardaydu ku hadasho iyo afka dugsiga wax looga barto. Ardaydu waxa suurogal ah in ay dhib ku tahay in ay wax bartaan oo ugu dambayntii ay dugsiyada ka haraan. Arrintani inta badan waxa ay raad ku leedahay ardayda ka soo jeeda qoysaska laga tiro badan yahay. Arrimaha la xiriira afka waxa uu ku xiran yahay isirka iyo dhaqanka.

## Hayaanka

Geediga dadku ay meel ka soo guuraan oo u guuraan meel kale- sababtu ha noqoto mid dhaqaale, mid ka carar colaad iyo masiibo ama mid dhaqan- waxa ay raad ku leedahay waxbarashada ardayda. Ardayda lagu khasbo in ay ka tagaan guryahooda, taas oo ay sababtay masiibo ama colaad, inta badan waxa ay noqdaan kuwo qaxooti ku ah xero ku yaala dalal kale, halkaas oo ay ku yar yihiin helitaanka waxbarashada. Ardayda kale u barakacay goobo kale oo dalkooda ka mid ah, waxa inta badan ku yar in ay helaan waxbarasho caadi ah.

---

[7] UNESCO, 2005

Xitaa ardayda u guurey arrimo dhaqaale la xiriirta, waxaa suurogal ah in ay dugsiga ka haraan. Waxa suurogal ah in ay dhib kala kulmaan caqabado la xiriira afka iyo dhaqanka oo aysan waalidkood awoodin in ay ka bixiyaan lacagta dugsiga.


## Saboolnimada

Dalal badan oo dunida ka mid ah, saboolnimadu waa caqabada ugu daran ee ardayda dugsiyada ka reebta. Meelaha saboolka ah, waxaa ku yaala dugsiyo tiro yar oo haysta agab yar iyo macallimiin aan aad u tababarnayn. Arrimahaasi waxa ay ka qayb qaadanayaan in ay ardaydu dugsiyada ka maqnaadaan. Qosyaska qaarkood ma awoodaan in ay caruurtooda u diraan dugsiyada oo waxa suurogal ah in ardayda lagu khasbo in ay shaqeeyaan intii ay dugsiyada dhigan lahaayeen. Dunida oo dhan, in kasta oo siyaasado ay sheegayaan in waxbarashadu ay lacag la'aan tahay, hadana waxa mar kasta jira kharash qarsoon, sida dharka, buuggaagta, iwm.

# Agbaka 1.2: Caqabadaha isku-xiran



Tiro yar oo macallimiin ah oo tababaran



Macallimiin tiro yar oo tababaran iyo fasalo arday tiro badan



Ardaydu waxa ay helaan waxbarasho tayo hoosaysa




Ardaydu dugsiga waxa ay uga haraan in aysan wax baranayn darteed



Waalidka iyo dadka caruurta haya ma dareensana qiimaha ay leedahay in ay caruurta dugsiyada u diraan

iyo




Dugsigu waxa uu ka fog yahay gurayaha ardayda

# Agabka 1.3a: Dulmar ku saabsan caqabadaha ardayda dugsiyada ka horjoogsada

## Caqaabahada guud ee ardayda dugsiyada ka horjoogsada

- Deegaanka iyo Agabka
- Hab-fikirka iyo aaminaanshaha
- Siyaasada iyo dhaqan gelinta

## Caqabadaha gaarka ah ee ardayda dugsiyada ka horjoogsada

- Hab-fikir la xiriira da'da
- Hab-fikir la xiriira dabaqad
- Colaadda iyo masiibooyinka
- Fikir lagahaysto dadka naafada ah
- Hab-fikirka la xiriira isirka iyo dhaqanka
- Hab-fikirka la xiriira jinsiga
- Caafimaadka
- Afka/luuqada
- Hayaanka
- Saboolnimada


## Agabka1.3b: Sawirada caqabadaha hortaagan waxbarashada ardayda




[Sharraxaada muuqaalka: dhinaca bidix ee sawirka, waxa jira teendhooyin waaweyn oo cad cad oo midba midka kale ka dambeeyo. Teendhada ugu horeysa, haweenay ayaa taagan, taas oo tilmaamaysa sabuurada. Waxa kale oo jira koox caruurta ah oo iyada u jeeda oo dhulka fadhiya. Teendhooyinka waxaa looga teeday goobta inteeda kale derbi biro dhaadheer ka samaysan. Labo askari iyo taangi ayaa taagan dhinaca midi gee derbiga. Dhulka waxa yaala in yar oo qasan ah.]


DUGSI
DUGSI


[Sharraxaada muqaalka: sawirku waxa uu muujinayaa wado lugeed dheer oo u dhex marta dhul keyn ah oo boor iyo dhagax leh. Waxa ka muuqda wiilal wada dhinaceeda ari la jooga. Dhinaca bidix ee wadada waxaa ku yaala dugsi. Dhinaca midig ee wada waxa ku taal tuulo. Labo cunug oo ku lebisan dharka dugsiga ayaa wadada maraya.]


SUULI
GIRLS
SUULI
BOYS

[Sharraxaada muuqaalka: Labo saf oo dheer, mid wiilal ah iyo mid gabdho ah oo taagaran oo sugaya in ay galaan musqulo. Safka wiilasha waxaa ku jira mid ul ku taagan iyo mid baras qaba. Dhismaha musquluhu waa mid burbusan. Dhinaca bidix, wiil ka ku kaadinaya banaanka. Dhabarkana waxaa ka yaala dhismaha dugsiga.]



[Sharraxaada muuqaalka: Fasal ciriiri ah oo ay ku jiraan arday badan oo u fadhiya safaf isku dhow. Macallin tilmaamaya sabuurada ayaa hortooda ka muuqda. Derbiyada iyo dariishahada fasalku waa ay burbursan yihiin.]




[Sharraxaada muuqaalka: Nin hor fadhiya safiito shaxeed oo miis yar dul saaran. Wiil yar oo ku lebisan dharka dugsiga ayaa gacanta ku haya waraaqo wax ku qoran yihiin oo u taagaya xagga ninka. Ninku hortiisa ayuu u jeeda oo gacanta ayuu kor u taagayaa. Ninka wejigiisa waxa ka muuqata xanaaq.]



[Sharraxaada muuqaalka: Gabar yar oo guri tirtiraysa oo uu dhinac yaalo baaldi. Waxaa ka dambeeya fadhi iyo labo sawir oo derbiga ku dhegan, mid waxa ka muuqda afar qof (labo qof oo waaweyn iyo labo caruur ah), midka kalena waxa ka muuqda labo caruur ah. Wiil soconaya ayaa dhaafay gabadha nadiifinaysa guriga. Wiilk waxa uu xiran yahay dharka dugsi oo waxa uu dhabarka ku sitaa boors. Gabadhu waxa ay eegaysaa wiilka. Gabadhu way caraysan tahay.]




[Sharraxaada muuqaalka: Gabar qaan gaar ah oo aan xirnayn dharka dugsiga oo cunug dhabarka ku xambaarsan. Gabdhuhu waxa ay taagan tahay dugsiga dibadiisa oo waxa ay fiirinaysaa dugsiga. Labo gabdhood oo xiran dharka dugsiga ayaa taagan dugsiga hortiisa oo soo eegaya gabadha oo la hadlaya.]



[Sharraxaada muuqaalka: Khariidada muuqaalka Afrika. Dhinaca sare, waxa ka muuqda qof saaran gaariga naafada oo uu dhabarkiisa ka muuqato xariiqo muujinaya dhaqdhaqaaq. Dhexda, haweenay gacanta haysa cunug oo uu ka dambeeyo raad muujinaya dhaqdhaqaaq. Xagga dambe, qof hoos u socda oo uu raad ka dambeeyo, kaas oo muujinaya dhaqdhaqaaq. Muuqaalada oo dhan waa sawir xariiqeed.]



[Sharraxaada muuqaalka: Haweenay hor taagan arday kuraas ku fadhida oo hadlaysa oo kor tilmaamaysa. Ardaydu waxa ay fadhiyaan gadaasheeda. Safka hore fasalka, arday ayaa eegaya dariishada dhabarkeeda. Arday kale ayaa madaxa saaray gacmihiisa oo miiska dul saaran.]



[Sharraxaada muuqaalka:  Wiil ku fadhiya gaariga naafada oo hoos eegaya. Waxa ka dambeeya dhowr jaranjaro si uu u koro albaabka fasalka. Albaabka waxaa ka muuqda macallin wax dhigaya.]




[Sharraxaada muuqaalka: Nin ul haysta ayaa taagan fasalka hortiisa. Waxa uu u muugdaa mid caraysan. Wiil hortiisa taagan ayuu usha ku fiiqaya/taagayaa. Wiilku madaxa ayuu hoos u dhigay. Ardayda fasalka ku jirta ayaa wiilka soo fiirinaysa. Albaabka bannaankiisa waxa ka muuqda wiil istaagan garoonka oo quraxdu hayso.]


Suaasha 2-aad
way sahlaneyd
Cid caawinaad u
baahan majirtaa?
Ma dhameyseen?
Mimi hapana
jua

[Sharraxaada muuqaalka:  Waxa yaala labo kursi oo mid kasta ay ku fadhiyaan saddex caruur ah. Derbiga waxaa ku dhegan waraaqo wax ku qoran yihiin. Dhinaca bidix, waa saddex gabdhood oo si iska soo horjeeda u fadhiya oo mid kasta uu horyaalo buug furan.  Mid ka mid ah gabdhaha waxa ay leedahay:" Su'aasha 2-aad way fududeyd", gabar kalena waxay haysataa ulsha lagu tukubo. Gabadha saddexaad waxa ay eegaysaa macallin is taagan meel u dhow oo oranaya:" Cidna ma u baahan tahay caawimo?" Dhinaca midid, waxa jooga labo wiil oo midba midka kale ku leeyahay:"ma dhamaysay". Wiil kale ayaa gooni fadhiya oo fekeraya" mimi haa." (Ma fahmin). Erayada kale oo ku qoran goobada hadalku ee sawirka ka muuqda waa af Soomaali.]



[Sharraxaad muuqaalka: Waxa yaala labo kursi oo mid kasta ay ku fadhiyaan saddex arday. Dhinaca bidix, waa saddex gabdhood ayaa u fadhiya si iska soo horjeeda. Mid ka mid ah gabdhaha ayaa hadlaysa, gabadha saddexaad ee ku xigta waxa dhinaceeda taala ulsha lagu tukubo. Warqado wax ku qoran yihiin ayaa ku dhegan derbiga. Dhinaca hore ee miiska midig, waxa fadhiya saddex wiil. Wiilka fadhiya dhinaca bidix waxa uu u muuqdaa in uu ka weyn yahay wiilasha kale ee qolka ku jira. Wiilku gooni buu fadhiyaa oo waxa uu u muuqdaa mid caraysan. Wiilasha kale way hadlayaan oo waxa ay u shaqaynayaa si wada jir ah.]


DUGSI

[Sharraxaada muqaalka: Dhinaca midig waxa jooga saddex arday oo waraaqo haysta. Waxaa ka dambeeya dhismaha dugsiga. Labo ka mid ah ardayda waa ay ilko cadeynayaan, oo waxa warqadaha ugu qoran 90% iyo 100%.  Wiilka saddexaad waxa uu u muuqdaa mid caraysan oo warqadiisa 20%. Wiilku waxa uu eegayaa labo wiil oo dhulka jilbo jabsan. Wiilasha hortooda waxa kursi ku fadhiya mid. Wiilashu waxa ay dhalaalinayaan kabihiisa.]



DUGSI

[Sharraxaada muqaalka: dhainaca bidix, waxaa ka muuqda dugsi ay labo gabdhood oo qaba dharka dugsiga hor taagan yihiin iyo mid ama labo ka mid ah shaqaalaha dugsiga. Ardayd waxa ay taagan yihiin dugsiga bannaankiisa. Dhinaca hore ee dugsiga, waxaa jooga saddex gabdhood oo wada baaldi iyo jirigaan oo aan dharka dugsiga xirnayn oo biyo soo dhaaminaya. Waxa ay eegayaan dhinaca dugsiga.]


DUGSI

[Sharraxaada muuqaalka: Dhinaca bidix waxaa ah. Waxa uu u eg yahay mid xiran. Waxa ku wareesan dayr oo labo askari ayaa taagan dayrka hortiisa. Dhinaca midig, waxa ku yaala guryo iyo dhismayaal dundunsan. Labo wiil ayaa kubad ciyaaraya, gabarna waxa ay cunto ku diyaarinaysaa guriga hortiisa. Mid ka mid ah jidadka ayaa xiran.]

# Agabka 2.1: Sawirka siyaasada




[Sharraxaada muuqaalka: Bogga waxa ka muuqda saddex muuqaal oo midba mid ku xigo. Muuqaalka ugu horeeya waa bogga ugu horeeya ee dukuminti. Waa cadaan iyo cagaar. Dhinaca sare waxa ku yaal summada dawlada oo ay hoosteeda ku qoran tahay Dawlada Faderaalka ah ee Soomaaliya, oo ay hoosteeda ku qoran tahay, Siyaasada Qaranka ee Wasaaradda Waxbarashada, oo uu ka sii hooseeyo cinwaan kale oo ah: Waxbarashada Baahiyaha gaar ah ee Naafada iyo Waxbarashada loo wada dhan yahay, Diseember 2018. Muuqaalka ku xigga waa warqad cad. Warqada waxaa ku qoran xeerka hab-dhaqanka ee koox. Cinwaankan waxaa ka hooseeya qodobo. Qodobka ugu horeeya waxa uu leeyahay: Xubnuhu waa in ay is ixtiraamaan. Mida labaad waxa ay leedahay: Haddii qof tumi waayo durbaan, waa in uu xoghaynta fariin u diro ka inta uusan waxsameyn. Midka xiggta waxa ay leedahay: Xubnuhu waa in ay waqtiaga ku yimaadaan. Mida xigta waxa ay leedahay: xubin kasta waxa in uu shaah siiyaa xubnaha kale, usbuuc kasta. Dhinaca midig, waxa ka muuqda bogga hore ee dukumiinti leh midab buluug ah iyo mid cad. Dhinaca sare ee bogga waxa ku qoran summad ay hoosteeda ku qoran tahay Dawlada Faderaalka ah ee Soomaaliya (Soomaali iyo Ingiriis). Cinwaankaas hoostiisa waxa ku qoran Dastuurka ku meel gaarka ah oo uu ka sii hooseeyo cinwaan kale oo ah: Waxaa la qaatay Agoosto 1, 2012, Muqdisho, Soomaaliya.]

# Agabka 2.2: Siyaasada xaquuqda waxbarashada ee Soomaaliya

## Agabka 2.2a: Dawlada Faderaalka ah ee Soomaaliya, Dastuurka ku meel gaarka ah ee 2012(qaybaha muhiimka ah)

**Qodobka 10. Sharafta bini aadamka**

(1) illaahay ayaa siiyey sharaf qof kasta oo bini aadanka ah, taas oo aasaas u ah xaquuqda bini aadanka

(2) Sharafta bini aadamku waa lama taabtaan oo waa in la wada dhowraa

(3) Dawladu waa in aysan adeegsan wax ay wax ku yeelayso sharafta bini aadanka.

**Qodobka 11. Sinnaanta**

(1) Muwaadiniinta oo dhan, iyada oo aan loo kala saarin jinsi, ama heerka dhaqaalaha, siyaasada, qabiilka, naafonimada, shaqada, dhalashada ama af guriga waa in ay sharicga hortiisa ku yeeshaan xaquuq iyo waajibaad isku mid ah.

(2) Waxaa la arkaa in uu dhacay takoor, haddii uu dhaco ficil eex ah ama qof xaquuqdiisa la xanibo, xitaa haddii aan ficilkaas loogu talo gelin raadka uu yeeshay.

(3) Dawladu waa in aysan qofna ku takoorin si ku salaysan da'da, midabka, qabiilka, dhaqanka, af guriga, jinsiga, dhalashada, naafonimada, aragtida siyaasadeed, shaqo ama maal.

(4) Dhamman barnaamijta gobolku sida sharciga ama siyaasada iyo tilaabooyinada maamulku ee loogu talo galay in si buuxda loogu gaaro sinnaanta dadka ama kooxaha dan yarta ah ama dadka horey ula soo kulmay takoor, waa in aan loo arkin takoorid.

**Qodobka 30. Waxbarashada**

(1) Waxbarashadu waa xaquuq aasaasi ah oo uu leeyahay muwaadin kasta oo Soomaali ah.

(2) Muwaadin kasta waxa uu xaq u leeyahay waxbarasho lacag la'aan ah ilaa iyo heer dugsi sare.

(3) Dawladu waa in ay mudnaanta siisaa horumarinta, balaarinta iyo fidinta waxbarashada caamka ah.
(4) Dugsiyo, machadyo iyo jaamacado gaar loo leeyahay waa in la sameeyaa si sharciga waafaqsan oo la saanqaadaysa barnaamijta waxbarashada iyo manhajyada waxbarashada ee dalka.
(5) dawladu waa in ay dhiirigelisaa kor u qaadida cilmi baarista, hal-abuurada, fanka iyo horumarinta dhaqanka, ciyaaraha dhaqanka, ciyaaraha kubada oo waa in ay kor u qaadaa dhaqanka iyo hidaha wanaagsan ee dadka Soomaaliyeed.
(6) dawladu waa in ka dhaqan gelisaa dhammaan dugsiyada dalka manhaj mideysan oo waa in ay hubisaa fulintiisa.

(7) Dawladu waa in ay kobcisaa waxbarashada tacliinta sare, machadyada farsamada iyo tiknoolajiyada iyo machadyada cilmi baarista.

(8) Waxbarashada Islaamku waa mid khasab ku ah ardayda dugsiyada dadweynaha iyo dugsiyada gaarka loo leeyahay.

**Article 12. Application of the Fundamental Rights**

1. (1) The fundamental rights and freedoms recognized in this Chapter shall always be respected in the making and application of the law. Likewise, they must be respected by all individuals and private organisations, as well as by every state institution and state official as they carry out their official functions.
2. (2) It is the responsibility of the state not only to ensure it does not violate rights through its actions, but also to take reasonable steps to protect the rights of the people from abuse by others.
3. (3) The rights recognized in this Chapter may be limited only by a law as provided for in Article 38.

# Resource 2.2b: United Nations Convention on the Rights of Persons with Disabilities (ratified by the federal government of Somalia on 6 August 2019).

**2.2 Ujeeddada**
Ujeeddada siyaasada waxbarashada baaiyaha gaarka ah, naafada iyo waxbarashada loo wada dhan yahay waa in ay qeexdaa oo sharciyaysaa yarenta waxbarashada baahiyaha gaarka ah oo waxbarashada laga dhigo mid loo wada dhan yahay ee ku jirta wasaaradda waxbarashada ee Soomaaliya.

**2. 3 Aragti**
Qaran taageera caruurta baahiyaha gaarka ah leh oo dhan iyo kuwa ka maqan dugsiyada oo si buuxda loo horumariyo kartida caruurta si ay awood ugu yeeshaan in ay ka qayb qaataan daryeelkooda iyo daryeelka dalka.

**2. 4 Yool:**
In la bixiyo adeeg baahiyaha gaarka ah iyo waxbarashada loo wada dhan yahay si isku dubaridan oo la siiyo agabka ku filan.

**2. 5 Ujeeddooyinka:**
Ujeeddooyinka siyaasadaan waa in:
1. La xoojiyo aragti hoggaamineed iyo mid maamul taas oo kor u qaadi doonta tirada ardayda, ka qayb-galka, iyo dhammaysashada dugsiyada ee ardayda baahiyaha gaarka ah leh.
2. La hubiyo in caruurta oo dhan ay helaan waxbarashada loo wada dhan yahay, iyada oo la xoojinayo hindisayaasha jiray ama barnaamijta waxbarashada baahiyaha gaarka ah, naafada iyo waxbarashada loo wada dhan yahay.
3. La fuliyo siyaasadaha kor u qaadista waxbarashada baahiyaha gaarka ah, naafada iyo waxbarashada loo wada dhan yahay, taas oo hagaajinaysa ka qayb galka dan-wadaagta ee maamulka iyo fulinta barnaamijta waxbarashada baahida gaarka ah, naafada iyo waxbarashada loo wada dhan yahay.
4. la xoojiyo nidaamka

**2.5 Istiraajiyadaha:**
1. Dejinta qorshaha waxbarashada baahida gaarka ah, iyo waxbarashada loo wada dhan yahay si looga shaqaysiiyo waxbarashada baahida gaar ah iyo waxbarashada loo wada dhan yahay ee nidaamka siyaasada.

2. Dib u eegista iyo wax ka bedelka sharciyada waxbarashada baahiyaha gaarka ah iyo waxbarashada loo wada dhan yahay.
3. hagidda iyo hoggaaminta dan-wadaagta ee fulinta siyaasada si waafaqsan sharciyada iyo heerarka dawlada.
4. In si joogta ah laysugu wargeliyo hababka ugu fiican ee maamulida ama fulinta waxbarashada baahiyaha gaarka ah, naafada iyo waxbarashada loo wada dhan yahay, cusboonaysiinta qalabka iyo agabka si loo gaaro heerarka lagu cabiro tayada ee barista iyo barashada ee caruurta baahiyaha gaarka ah leh.
5. Isku dubaridada iyo qabashada olole loogu qareemayo waxbarashada baahida gaarka ah iyo waxbarashada loo wada dhan yahay.
6. Hubinta dhaqaale in dhaaqale ku filan oo loo qoondeeyo barnaamijta waxbarashada baahida gaarka ah, naafada iyo waxbarashada loo wada dhan yahay.
7. Hubinta shaqo qorista iyo hawl gelinta shaqaalaha waxbarashada baahida gaarka ah, naafada iyo waxbarashada loo wada dhan yahay, iyada loo lala tashanyo cida ku haboon.
8. Providing guidance for adequate infrastructure/ facilities for SEND & IE
9. Establishing appropriate structures and systems for SEND & IE
10.Ensuring that affirmative action for learners with special needs is implemented in education institutions.
11. Conducting refresher programmes for the SN&IE in-service personnel.
12. Monitoring and evaluating SEND & IE programmes

## Agabka 3.1: Dheemanta 9 kaar – Caqabahada hortaagan ardayda dugsiyada dhigata

Kaararka waa in la jar jaraa ka hor inta aan la siin ka-qayb-galayaasha.

| | | |
|---|---|---|
| **Hab-fikir la xiriira da'da** | **Hab-fikir la xiriira fasalka ama xaaladda dhaqan-dhaqaale** | **Colaad** |
| **Fikir laga haysto naafada** | **Fikir laga haysto isirka** | **Hab-fikir la xiriira jinsiga** |
| **Caafimaadka** | **afka** | **tahriibta** |
| **Saboolnimada** | **Hab-fikir laga haysto diinta** | **masiibooyinka** |
| | Kaarar maran oo loogu talo galay in ka qayb-galayaashu ku qortaan fikradahooda. | |
| | | |

# Agabka 3.2: Dhacdooyin ku saabsan ardayda dugsiyada ka maqan

1. **Salmo** waxa ay adeegsataa gaariga naafada. Waxa ay doonaysaa in ay dugsiga deegaankeeda la dhigato saaxiibadeeda ay isku guriga yihiin. Dugsigu ma laha meel uu maro gaariga naafadu, sidaas darteed ina adeerkeed oo shaqo la'aan ah ayaa dugsiga u raaca si uu uga gudbiyo jaran jarada oo ay albaabka fasalka u gasho. Ina adeerkeed hadda waxa uu helay shaqo oo uma raaci karo dugsiga. Dugsigu waxa uu leeyahay, Salmo dugsiga ma dhigan karto haddii aysan helin cid caawisa. Salmo guriga ayey joogta intaas wixii ka dambeyey.

2. **Daahir** waxa uu leeyahay dabeecad guracan iyo caadifad daran. Marka uu dugsiga tago, kursiga kuma fadhiyi karo wax ka badan 15 daqiiqo oo inta badan dhibaato ayaa haysata marka ay xisadu dhammaato. Arritani waxa ay keentay in uu xanaaqo oo uu kulugyesho dhib badan Inta badan macallimiintu waxa ay ka saaraan fasalka. Si tartiib ah ayuu Daahir u joojiyey in uu dugsiga yimaado. Hadda, Daahir ma dhigto dugsiga oo waxa waqtigiisa ku lumiyaa in uu maalintii oo dhan la joogo wiilal ka waaweyn oo degan magaaladiisa, iyagoo dhibaato kala kulma dukaanlayda iyo booliska.

3. **Tawfiiq** araga ayuu naafo ka yahay oo wax barashaduna waa ay ku adag tahay. Waalidkiis waxa ay ka xishoodaan wiilkooda in lagu ceebeeyo oo waxa ay ku nool yihiin meel dugsiga ka fog, sidaas darteed Tawfiiq waxa uu reerka ka caawiyaa gadista khudaarta oo weligiis dugsi ma dhigan.

4. **Xasan** waa 11 sanno jir dhigta dugsi hoose. Waxa ay dhib ka haysataa barashada xisaabta, oo ma fahmo shaqada xisaabta oo inta badan jawaab khaldan ayuu qoraa. Macallinku waa uu dilaa Xasan marka uu xisaabta khaldo, sidaas darteed Xasan waxa uu ka maqnaadaa xisadda xisaabta. Usbuucii ugu dambeeyey ayuu Xasan dugsiga ka haray.

5. **Amina** waxba ma qorto oo dugsiga waxa ay ka hartay iyada oo 9 jir ah. Waxa ay guursatayy iyada oo 14 jir ah. Qoyska aamino waa mid sabool ah oo waxaa Aamino loogu guuriyey si reerkeedu u helaan wax uun lacag ah iyo amaan. Aamino weli waxa ay la nooshahay qoyskeeda.

6. **Faarax** waa toban jir ku nool magaalada Basra ee koonfurta Soomaaliya. Qoyskiisu waxa ay leeyihiin lo,o. Faarax waxa uu raaca ariga. Xilliga jiilaalka, qoysku waxa uu u guura deegaano u dhow si ay u helaan biyo iyo daaq. Faarax weligiis dugsi ma dhigan.

7. **Shaakira** waa gabar 14 jir ah oo dhigata fasalka todobaad. Waxa ay ka hartay dugsiga xilligii imtixaanka. Markii maamulka dugsiga uu booqday qoyskeeda, ka dib markii ay gashay labadii imtixaan ee ugu horeeyey waxa ay diiday in ay dugsiga dib ugu noqoto, waalidkeedna waxba uma sheegin si ay go'aan keeda wax uga bedelaan. Mar dambe oo ay la hadleen saaxiibadeed, waxa ay u sheegtay in dugsigu uusan faa'iido lahayn oo ay doortay in ay guursato oo ay qoyskeedu u guuriyeen nin weyn.

8. **Xalima** waa gabar 12 jir ah. Waxa ay la nooshahay qoyskooda oo ka kooban sagaal caruur ah oo ku nool labo qol oo yar yar. Caruurta midna ma dhigto dugsi. Hooyadee waxa ay maalin kasta u lugaysaa muqaaxiyo 6 km u jira si ay uga soo urursato haraaga cuntada si ay qosyku cunto uga dhigtaan. Sidoo kale, Xaliima waxa loo diraa in ay lows ku iibiso meel ay ka baxaan baabuurta waaweyn.

9. **Cumar** waa 10 jir. Waxa uu ku faraxsan yahay in uu dhowr sanno ka hor bilaabay dugsiga, hase yeeshee farxadiisu ma sii jirin. Macallinkiisa dulqaad ma la hayn si uu Cumar ula shaqeeyo. Cumar waa uu firfircoon yahay, hase yeeshee macallinkiisu waxa uu ku fekerayaa in uu xanuunsan yahay oo rabshoole yahay. Waxa is qabtay isaga iyo waalidkiis. Waalidku waxa ay isku dayeen in xal helaan, guulse lagama gaarin. Waxa ay dareemeen in ay sii kordhayso awood yaraantoodu, oo way isku buuqeen oo xanaaqeen, oo waxa ay caayeen Cumar oo waa ay ciqaabeen ama way joojiyeen in ay la hadlaan. Cumar saaxiibadiis waxa ay joogaan garoonka ciyaaraha oo derisku way ku jeesjeesaan oo caruurta lama ciyaari karo. Waxa ay ku yiraahdeen cayaarta ayuu naga halaynayaa. Cumar dib dambe dugsi uma aadin.

10. **Nawaal** waa gabar 10 jir ah. Markii waalidkeed ku dhintay shil gaari waxa loo keenay eedadeed. Marka ay Nawaal weydiiso eedaday waxyaabo ku saabsan dugsiga waxa ay ku tiraahdaa:" Waa in aad u shaqaysataa cuntada aad cunayso" madaama ay gabar ka tahay guriga eedadeed. Mar marka qaarkood eedadeed way dishaa.

11. **Maxamed** waxa uu ku dhashay tuulo ku dhow degmada Baydhabo. Maxamed waxa uu dhashay isaga oo indhoole ah. Markii uu jiray 6 sanno waxa uu doonayay in uu quraanka barto sida caruurta kale ee ay isku faca yihiin. Markii uu jiray 13 sanno waxa uu Maxamed go'aan saday in uu aado meel u dhow dugsi quraan oo uu ka maqli karay ardayda quraanka akhrisaysa iyo macallinka wax baraya. Sidaas ayuu Maxamed ku bartay afar jus oo quraanka ka mid ah. Waxa uu u tegay macallinkii oo waxa uu dusha ka akhriyey afar jus. In kasta oo uu macallinku si la yaab leh ugu farxay, hase yeeshee waxa uu dareemay in uusan Maxamed ka mid noqon karin ardaydiisa, maadaama uusan Maxamed buuxin karin sharuudaha aqbalaada dugsiga quraanka.

12. **Sahra** waa gabar 12 jir oo ka timid xerada barakacayaashe ee ku taal duleedka magaalada Muqdisho. Dhowr sanno ka hore ayey ka soo tagtay hoyadeed iyo walaaladeed, iyada oo ka soo carartay colaad ka jirtay tuuladeeda. Waxaa ka baaqday dhowr sannad dugsiyadeed. Sahra waxa ay hadda qoyskeeda kula nooshahay xero barakacayaal oo ku meel gaar ah oo ay ka jirto nolol ciriiri ah. Urur maalgeliya waxbarashada xerada ayaa Sahro ka taageeray waxbarashada, hase yeeshee waxa ay la hardamaysaa sidii ay waxbarashda xoogga u saari lahayd oo waxa ay dareemaysaa in ay waxbarashada ka weynaatay. Si tartiib ah ayey dugsiga uga hartay. Sidaas darteed Sahro waxa ay hooyadeed ka caawin kartaa in shaqaysato si ay qoyskeeda lacag u helaan.

# Agabka 3.3: Istiraajiyadaha iyo xalalka ogaanshaha iyo meelaha ay joogaan ardayda dugsiyada ka maqan

| | |
|---|---|
| XAGEE ayey joogaan ardayda dugsiyada ka maqan? | MAXAY yihiin istiraajiyadaha aan u adeegsan karno in aan ogaano oo aqoonsano meesha ay joogaan ardayda dugsiyada ka maqan? |
| YAA ka mid ah bulshada oo inaga caawin kara helitaanka ardayda dugsiyada ka maqan? | Maxay yihiin caqabadaha aan la kulmi karno?SIDEE uga gudbi karnaa caqabadahaas? |

# Resource 4.1: EENET’s ‘Qoraalka filim ka kusaabsan kala guurka loo dhanyahay. Maxay tahay sabanta xilliga kala guurka uu u yahay arrin muhiim ah waxbrashada loodhanyahay?

Dhammaan caruurtu waxay maraan xilliyo kala guur ah intey waxbarashada wadaan. Laga bilaabo inay guriga ka aadaan maalin koodii ugu horeeyay xanaano, ama dugsig ilaa maalinka ugu dambeeya ee dugsigooda, koleejkooda, ama jamacadooda kadibna ay bilaabaan shaqo.

Ugubida dugsi cusub ama fasal waxay yeelan kartaa xiiso, cabsi, jahawareer iyo xanaaq. Waxay noqon kartaa mid khalkhalisa ilmaha ama qoyska.

> Waa xilli walwalkeeda leh marka ilmuhu dugsiga u gudbaan. Koox cusub bey ku biirayaan, way korayaan, waxayna isku dayayaan in ay muujiyaan dhaqankooda. Way adagtahay marka ilmuhu ilmo kala u ku biirayo oo uu la qabsanayo.
> *(Olha Serova, hooyada Artem, dugsiga xanaanada, fasalka 2)*

Markasta oo ilmuhu ku biiraan goob waxbarasho oo cusub ama fasal, waqti bey ku qaadanaysaa inay la qabsadaan oo macalimiintuna fahmaan baahida ilmahaasu qabo.

Tan macnaheedu waa in xilliyada kala guurka aan caruurta ka qeybgalkiisa casharada iyo waxbarashadiisu Khalkhal gali karto, gaar ahaan caruurta taageerida dheeriga ah u baahan.

> Ahmed hada wuu la haysataa xanaanada. Dabcan, ka hooyo ahaan waa ka wawalsanahay waxa xiga, muxuu mustaqbalkiisu noqonayaa waana fahamsanahay in uu u gudbi rabo dugsi hose/dhexe. Sida muuqata waa inuu ahaadaa fasal loo wadadhanyahay. Haa, waa walwalsanahay. Laakin dugsiyada noocaan ah waa laga helaa Kharkive. Waxay leeyihiin aqoon iyo khibrad wayna aqbalaan caruurta naafada lanool. Sidaa darraadeed waxaan rajeynayaa markay Ilia dhamayso xanaanada inaan heli doono dugsi loo dhanyahay oo aad u fiican oo nala ku soodhaweeyo lanala aqbalo. *(Nina Arsentieva, hooyada Illia, xanaanada bulshadu leedahay no. 74, magaalada kharkiv*

Nidaamka waxbrasha loodhanyahay waa inuu xaqiijiyaa xilli kasta oo kalaguur ah si fiican loo qorsheeyo taageerana labaxsho ayadoo si buuxda looga qeybgalinayo waalidiinta si aan ilmana looga tagin xiligan adag.

## Kala guurka loodhanyahay wuxuu ka bilawdaa guriga.

Waalidiinta waxay ku leeyihiin saameyn wayn koriimada iyo waxbarashada caruurtooda xataa laga soo bilaabo intaysan dhalan.

Waxay u caawiyaan ilmaha bulsho ahaan, jir ahaan, garaad ahaan, hal-abuurid iyo koriimada dabeecadeed taasoo ilmaha ka dhigta mid adkeysi leh, iskiisna u fakara, xiriir sameysta oo wax qabsada.

Waalidiintu sida ugu fiican ee ay koriimadaan u taageeri karaa waa habka ciyaarta. .

Shaqooyinka ciyaar ahaan loo qabto waa mida ay waalidka iyo dadka ilmaha hayaa ay ku ogaan karaan in ay jirto meel ilmuhu ku dhibanyahay.

Dhisida koriimada xiliiga hore iyo ku barashada wayaabaha aasaasiga ah guriga waxay ka dhigtaa ugudbida heerka koobaad ee waxbarashada mid carqabadiisu yartahay. .

Caruurtu waxbadan bay bartaan oo sameeyaan markay guriga joogaan taasoo ah mid ay u baahan yihiin inay isticmaalaan xiliga ay waxbarashada ku jiraan.


## Wadida taageerada xilliga kala guurka ah.

Kala guurka loodhanyahay waa in ay u sahlanaato caruurta, qoyska, iyo macalimiinta marka caruurtu guriga ka tagaan ee dugsigooda ugu horeeyay ku biiraan, ama fasal cusub ama dugsi kale.


Majiro isbadal aan la filayn ama laga naxo. Walwal yar baa jira, caruutuna waxay si joogta ah u helaan taageerada ay u baahanyihiin si ay ugu dul dhisaan wixii horey u yaqaaneen ama ay qaban kareen.

Sideed gacan uga geysan kartaa in la siiwado taageeradaan?

## Agabka 4.2: Waa maxay ka gudubka heerka waxbarashada?



[Sharraxaad Muuqaalka: dhinaca sare, waa dhisme lagu qorey ‘dugsiga hoose/dhexe’.  Gabar baa jidka maraysa oo u socota dugsiga. Dhinaca midig, waa dhisme lagu qoray ‘dugsiga sare’. Gabadhii oo weynaatay ayaa jid maraysa oo u socota dugsiga sare, iyadoo ka soo gudubtay dugsiga hoose/dhexe. Dhinaca hoose, waa dhisme lagu qoray ‘jaamac’. Haweeynay dhalinyaro ah ayaa jidka maraysa oo ka timi dugsi sare oo u socota jaamacada.]


DUGSI SARE
DUGSI HOOSE

[Sharraxaada muuqaalka: Wiil xiran dharka dugsiga oo boorso dhabarka ku wara oo koraya jaranjaro. Erayga ‘Dugsi Sare’ ayaa lagu qoray xagga sare ee jaranjarada. Saddex caruur ah ayaa taagan xagga hoose ee jaranjarada. Caruurta waxaa ka mid ah cunug maro guntan oo kor u eega wiilka. Gabar cunug dhabarka ku sida oo u eg mid caraysan iyo wiil xiran ookiyaale madow oo ul sita oo dhinaca kale u socda. Eragy ‘Dugsi hoose’ ayaa ku qoran xagga hoose ee jaran jarada.]

# Agabka 4.3: Maxay ardaydu ka yiraahdeen ka gudubka heerka waxbarashada

Ma heli karo jid loo maro dugsiga cusub.

Waxaan ka welwelayaa in aanan helin saaxiibo cusub ama aanan si firfirciin uga qayb gelin dhacdoovinka dugsiga.

Waalidkeyga in badan lagama qayb gelin dugsiga. Hadda waxa aan ahay fasal sare, hase yeeshee weli waxa aan doonayaa in waalidkey la hadlo macallimiinta marka aan dhib la kulmo.

Horey uma arag dugsigayga cusub ka hor maalintii ugu horeysay ee dugsiga. Waan cabsaday.



Waxaan ku wareersanahay jadwalka cusub. Meesha aan aadayo iyo goorta aan aadayo? Waxaa la ii sheegaa in aan daahay.

Qof kasta waxa ay la tahay in aan 'weynahay' oo aan maareyn karo dugsigayga cusub. Weli waa cabsanayaa oo waan wareeray.

Dugsigu waxa uu ku yaalaa xaafad kale, taas oo cabsi ah.

Waxa aan dhib kala kulmaa in aan qof xun ahay marka la eego macallinka, sababtoo ah ma fahmo wuxuu iga rabo inaan sameeyo.

Runtii waa arrin adag in loo gudbo heerka kale. Imtixaanku kuma haboona Baahidayda.


Waalidkayga kama maqnaan karo maalinta oo dhan

Macallimiintaydii dugsiga hore waxa ay qorsheeyeen sida ay iiga caawinayaan maadooyinka. Dugsigayga cusub ma yaqaan arrintaas. Qorshaha taageerada oo dhan waa in dib loo bilaabaa mar kale. Waxaan ka rajaynayaa macallimiintaydii hore qorshaha lagu daro.

Macallimiintu si kala duwan ayey wax u sameeyaan dugsiga. Waxa ay wax u dhigaan siyaabo kala duwan. ma qaban karo waxa ay naga filanayaan.

Waxaan doonaya in aan dhigto dugsiga xirfadaha. Ma garanayo dugsiga loo wada dhan yahay ee ardayda baahiyaha gaarka ah leh. Ma jirto cid dugsigayga dhigata oo garanaysa.

## Agabka 5.2a: Ka gudubka heerka waxabarashada loo dhan yahay waxa uu ka bilowdaa guriga.



[Sharraxaada muuqaalka: Sawirku waxa uu muujinaya qoys ka muuqda dhexda iyo afar dhisme oo ku yaala dhinacyada. Qoysaska iyo dhismayaasha waxaa isku xiraya jid iyo xariiqo. Qoyska waxaa ka mid ah gabar yar, gabar weyn, wiil weyn, nin oday ah oo ul ku tukubaya, haweenay iyo nin. Erayga ‘qoys iyo guro’ waxa uu ku soo qoran yahay qoyska hoostiisa. Dhinaca bidix ee sare, dhismaha waxa ku qoran ‘xanaano’. Gabadha yar oo haysata gacanta gabadha weyn ayaa u socda dhinaca ‘xanaanada’. Waxa jirta xariiq xoodan oo ka imanaysa dhinaca sare ee xanaanata oo tilmaamaysa dhinaca midig ee sare ee dhisme uu ku qoran yahay ‘dugsiga hoose’. Gabadhii yarayd oo kortay ayaa maraysa jidka ka yimi qoyska oo u socda dugsiga hoose. Waxa jira xariiq xoodan oo ka imanaysa dugsiga hoose ee u socota dhinaca hoose ee dhisme ay ku qoran tahay ‘dugsi sare’. Gabadhi yarayd oo kortay ayaa maraysa jidka ka yimi qoyska oo u socota dugsi sare. Ugu danbayntii, waxa jira xariiq xoodan oo ku socota dhinaca bidix ee dhisme ay ku qoran tahay ‘jaamacad’. Haweenay dhalinyaro ah ayaa jidka maraysa oo ka timi qoyska oo ku socota jaamacada.]


## Agabka 5.2b:  Xirmo saddex sawir ah ee istiraajiyadaha



[Sharraxaada muuqaalka: Waa saddex caruur ah oo ku ciyaarada bannaanka. Labo wiil iyo gabar. Wiilka weyn waxa uu xigga dhinaca bidix oo waxa uu u muuqdaa mid wax laadaya. Waxaa hor yaala kubad. Wiil xiran funaanad jaale ah ayaa midigta jooga. Waxa uu u soo socdaa dhinaca kubada oo waxa uu haysaa ul dheer. Gabadhu waxa ay fadhidaa meel durugsan oo dhinaca bixid ah, oo way sabcinaysaa oo dhiirigelinaysaa. Waxaa ka dambeeya nin iyo haweenay daawana oo qoslaya.]


Inclusive
School

[Sharraxaada muuqaalka: Bannaanka waxa taagan saddex qof oo wada hadlaya. Mid ka mid ah habeenka waxa ay gacanta ku haysa warqad jaale ah oo ay u taagayso dadka kale. Nin ku xigga waxa bannanka dhismaha ku dhejinaya warqad leh midab jaale ah oo cinwaankeedu yahay 'Dugsiga loo wada dhan yahay'. Gadaal waxa jooga nin warqado siinaya labo qof oo meel wada fadhiya oo wada hadalaya. Waxaa ka sii dambeeya ri iyo guro iyo nin iyo wiil wax beeraya.]


DUGSI
Diiwaangalin

[Sharraxaada muqaalka: Dhinaca bidix, haweenay ayaa ag fadhida miis ay dhinaca kaga qoran tahay ‘diiwaangelinta’. Gadaal, dugsiga horetiisa, labo wiil ayaa miis u wada fasalka. Dhinaca bidix ee dambe miiska, saddex wiil oo uu ka mid yahay mid ul ku socda ayaa kubad ciyaaraya. Dhinaca midig, dad shiraya ayaa teeno hoos fadhiya oo waxa ay dhegaysanayaan haweenay hadlaysa.]

# Agabka 5.3a: Waxyaabaha saameynta ku yeesha kala guurka waxbarasha dugsiga ka hor

**Koox da 1ad., ka fekara hurdada.**

Warqad soo qaado oo dhexda uga masawir ilmo hurda. Kadib ka dooda su, aalahan soo soccda kuna qora jawaabaha warqad.

- Maxaa sababa in ilmaha dhigata dugsiyada bulshada ay heli waayaan hurdo kufilan?
- Sidee hurdo yaridu u saameysaa caruurta waxbarashadooda?
- Sidee hurdadu u caawisaa ilmaha inuu ka qeybqaato waxbrashada?
- Maxaa la sameyn karaa si loo xaqiijiyo inay hurdo ku filan helaan?

**Kooxda 2ad. Ka fekera quraacda.**

Soo qaado warqad oo waxaad dhexda uga masawirtaa ilmo quraac cunaya ama xitaa kaliya saxan iyo qaado. Kadib ka dooda su, aalahan soo socda kuna qora jawaabihiina warqad.

- Maxay tahay sababta caruurta dhigata dugsiyda bulshadiina aysan quraac usoo cunin intaysan dugsiga iman?
- Sidee bay u saameysaa quraac la'aantu in caruurtu ka qeybgalaan waxbarashada?
- Sidee bey u caawisaa quraacdu caruuta inay ka qeybgalaan waxbarashada?
- Maxaan qaban karnaa si aan u xaqiijino in ilmuhu soo quraacdaan intuusan dugsigu bilaaban?

**Kooxda 3aad- Ka fekera shaqada guriga.**

Soo qaado warqad dhexdana uga masawir ilmo qabanaya shaqo guri. Kadib ka dooda su, aalahaan soo socda idinkoo jawaabaha ku qoraya warqad.

- Shaqo noocee ah bey ka qabtaa ilmuha bulshadiina maxayna u qabtaan?
- Sidee bey shaqada guriga, mida beerta ama bulshada laga dhex qabtaa si taban raad ugu yeelataa waxbarashada caruurta?
- Sidee baa laga yaabaa in shaqadaas u caawin karto waxbarashadooda?
- Maxaa la qaban karaa si loo xaqiijiyo in shaqadaas aysan saameyn taban ugu yeelan in caruurtu waxbarashada ka qeybqaataan?

# Agabka 5.3b: Qoraalka Filimka EENET ee ‘Dugsiga ka hor’

**Dugsiga ka hor**

Cunug kasta waxa uu xaq u leeyahay waxbarashada tayo leh oo loo wada dhan yahay.

Waxa ka dhaca dugsiga gudihiisa ayaa ardayda ka dhigi kara mid laga qaybgela dugsiga ama mid la faquuqay.

Dhibaatada ka qayb galka waxbarashada wanaagsan waxa ay bilaabataa ka hor inta uusan cunugu gaarin albaabka dugsiga.

**Mashquulku wuxuu bilowdaa maalinkii**

Markuu ardaygu tooso subaxdii, waxaa suurogal ah in uu la kulmo caqabado, kuwaas oo raad ku yeesha ka qaybgalka waxbarashada.

Caruur badan, inta ay yar yihiin waxa ay guriga ka qabtaan shaqo- sida badan subaxdii inta aysan dugsiga aadin.

> “Waxaan qabtaa subaxdii, waan kacaa oo waxaan nadiifiyaa oo tirtiraa guriga oo wax baan kariyaa:

Marka guurigashaqo ay ka qabanayaan, caruurtu waxa ay caawiyaan qoysaskooda oo waxay bartaan xirfad iyo masuuliyad.

Hase yeeshee shaqada gurigu waxa ay hor istaagi kartaa waxbarashada caruurta.

Dhaqan ahaan waxaa la aaminsan yahay kaalinta haweenka iyo raga, in inta badan ay gabdhuhu qabtaan shaqada guriga, taas oo raad ku yeelanaysa in ay gabdhuhu ka qayb galaan waxbarashda.

Dabcan sidoo kale, wiilashu waxa ay qabtaan shaqo si ay u caawiyaan qoyskooda, taas oo raad ku yeelanaysa in ay ka qayb galaan waxbarashada sida raacista xoolaha ama in ay qabtaan shaqo ay lacag ka soo galayso.

> “Marka la eego jinsiga, dugsiyada waxa aan u dagaalnaa si loo helo fursado loo simanyahay, hase yeeshee taas kuma xirna anaga oo keliya. Waxa ay sidoo kale ku xiran tahay waalidiinta. Waalidku, gaar ahaan caruurta naafada ah, isku faham maaha oo waalidku waxa uu mudnaanta siiyaa wiilasha.”

Shaqada la qabto subaxdii waxa ay gabdhaha iyo wiilasha ka daahisaa dugsiga. Waxaa suurogal ah in ay dhib la kulmaan arrintaas darteed, taas oo keenta in ay dugsiga ka haraan.

Qabashada shaqada badan waxa ay keenaysaa in ay caruurtu aad u daalaan oo aysan si hagaahsan ugu feejignaan oo aysan u baran waxbarashada.

**Maxaan samayn kartaa?**

Waxaad la hadli kartaa caruurta fasalkaaga ama dugsigaaga si loo ogaada nolosha ka jirta guriga. Waxaad ka caawin kartaa in aad si wanaagsan isku dheelitirto shaqada iyo dugsiga.

Waxaad la kulmi kartaa waalidka si aad ugula hadasho raadka ay shaqadu ku leedahay waxbarashada caruurta. Waxaa suurogal ah in aad si wadajir ah u shaqaysaan si aad u samaysaan qorshe caruurta ka yaraynaya shaqada.

Waxa aad qaban kartaa dood balaaran oo ku saabsan xaquuqda waxbarashada gabdhaha, taas oo uu dalkaagu aqbalay in la dhowro, iyaga oo saxiixay axdiyada caalamiga ah.

**Quraacda**

Quraacdu waa xilliga ugu wanaagsan ee cuntada caruurta.

Nasiib daro, dunida milyiin caruur ah ayaa baahi ku aada dugsiga. Arrintani waxa ay raad ku yeelanaysa waxbarashadooda- waa mid aad u adag in ay feejignaadaan marka ay caruurtu baahan yihiin.

In waxbarashada laga dhigo mid loo wada dhan yahay waa in lagu daraa in la hubiyo in aysan caruuru baahi qabin.

**Maxaan samayn kartaa?**

> “Qorshaha quudinta dugsigu waa mid qiimo leh, sababtoo ah waxa uu dhiirigelinayaa caruurta ka soo jeeda bulshada saboolka ah in ay aadaan dugsiyada, sababtoo ah waa meelaha kaliya ay ka helaan cuntada. Sidaas darteed, waa hab wanaagsan oo lagu dhiirigelin karo imaatinka dugsiga ee ardayda ka soo jeeda bulshada dan yarta ah.”

Waxaad kormeeri kartaa caruurta si aad u aragto caruurta la harjadeysa waxbarashada gaajo awgeed.

Waxaad la hadli kartaa caruurta iyo waalidkood si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan xaaladooda oo aad u ogaato xalka caawin kara.

Waxaad ka caawin kartaa dugsigaa in uu bilaabo quraac, sidaas darteed casharka ka hor, caruurtu waxa ay heli karaan cunto lacag la’aan ah.

Ururada deegaanka iyo ganacsatadu waxa suurogal ah ay arrintaas taageeraan. Waxaad heli kartaa urur ka shaqeeya deegaanka oo dadka ka caawiya in dhaqaale abuuraan oo ku dhiirigelisa in ay la shaqeeyaan waalidiinta dugsigaaga.

Waxa kale oo aad ka caawin kartaa in dugsigu beer samaysto.

Caruurtu waxa ay baran karaan dhirta, beerista cuntada iyo dhowrista o deegaanka inta ay korayaan cuntada laga dhiganayo quraacda iyo qadada.

# Gaban-qabsi 6.1: Adeegsiga siyaasada si aad saameyn ugu yeelato is bedelka

## Jilitaanka: Kulanka Guddiga Waxbarashada Bulasha (GWB), kaas oo ururada dadka naadafada ah ee deeaganka loo sheegay in ay ka soo qayb galaan

### Xaaladda

Soomaaliya waxa soo maray abaaro ba'an, kuwaas oo raad ku yeeshay qoysas badan oo dhab aahaantii la hardamaya sidii ay u maareyn lahaayeen. Qoysas badan ayey abaaruhu ku khasbeen in ay Muqdisho aadaan, meeshaas oo ay ka jirto taageero wanaagsan iyo fursado shaqo lagaga heli karo magaalada weyn. Hadda waxa ay joogaan xero weyn oo barakacayaasha oo ku taal Muqdisho. Labo dugsi oo u dhow xerada barakacayaasha waxa ay la hardamayaan sidii ay u maareyn lahaayeen qoysaska cusub ee xerada barakacayaasha ee doonaya in ay caruurtooda u diraan dugsiyada si ay waxbarasho u helaan. Dugsiyadaasi waxa ay horeyba ula hardamayeen dhaqaalo yari. Shan ka mid ah caruurta xerada barakacayaasha ee doonaya inay dugsiga dhigtaan waa naafo.

Bulshada ku nool Muqdisho ee u dhow xerada barakacayaasha waa sabool oo inta badan caruurta caruurta dusiyadaas aadaa waxay ka yimaadaan qoysaskaas danyarta ah. Guddiga Waxbarashada ee Bulshada (GWB) ee deeagaanka waxa uu dareemayaan in dugsiyada ay haystaan culeysyo oo uusan qaban karin caruurta cusub ee timi xerada barakacayaasha, gaar ahaan caruurta naafada ah. Waxa ay la tahay in ay masuuliyad ka saaran tahay caruurta ka timaada qoysaska muddada dheer ku noolaa deegaanka Muqdisho, ee aan masuuliyad ka saarnayn caruurta ka timaada xeryaha barakacayaasha. Qaar ka mid ah caruurta xeryaha barakacayaasha ayaa horey loo aqbalay, hase yeeshee waxa ay horey u lahaayeen aqoon aad u yar, sidaas darteed waxaa ku adag ka qayb galka casharada iyo la qabsashada ardayda kale. Macallimiin badan ayaa niyad jabsan, sababtoo ah arday tiro badan ayaa fasaladooda dhigata oo ma garanayaan si ay u caawiyaan ardaydaas. Xaalada kacsan ayaa ka jirta dugsiga oo ku saabsan ardayda cusub. Ururada dadka naafada ah waxa ay u sheegeen in GWB ay qaban karaan kulan, maadaama ay aad uga welwelsan yihiin xaaladda jirta. Maadaama ay arrintaasi muhiimad u leedahay bulshada, GWB-du waa uu aqbalay in dadka deegaanka iyo dadka degan xeryaha barakacayaasha ay kulan yeeshaan si arrintaas looga hadlo.

## Jilayaasha

- **Saddex ama afar xunood oo ka mid ah ururada dadka naafada ah:** Xubnaha ururada dadka naafada ah waxa ay ka doodeen istiraatiijiyada oo waxa ay isku raaceen in ay tusaan GWB sida ay xaquuqda waxbarashada caruurta loogu xadgudbey- si ay arrintaas u tusaan waxa ay doonayaan in ay adeegsadaan Dastuuska Ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya iyo Axidga Qaramada Midoobey ee Xaquuqda Dadka Naafada ah, taas oo ay Soomaaliya saxiixday.
- **Guddoomiyaha GWB:** Guddoomiyaha GWB waa mid cusub oo waxa uu dareemayaa in masuuliyada ugu horeysa ee GWB uu yahay caruurta qoysaska mudda deganaa Muqdisho. Waa mid aad u xanaaq badan, waxayna doonaysaa in ay samayso wax lalayaabo. Wax badan ka garan mayso Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya iyo Axdiga Qaramada Midoobey ee Xaquuqda Dadka Naafada ah.
- **Ku-Xigeenka Guddoomiyaha GWB:** Ku-xigeenku waa macallin hore oo waxa uu dareemayaa in xaqa macallimiintu uu ka muhiimsan yahay wax kasta. Waxa uu ku doodayaa in aysan siyaasadu muhiimad lahayn, ee waxa muhiimada leh ay yihiin macallimiinta oo shaqadu ku culus tahay oo aan mushahaar la siin, oo in caruur kale ay dugsiga yimaadaam ay macallimiinta u siyaadinayso welwel.
- **Mid ka mid ah odayaasha masjidka ee yimaadaan qoysas badan oo degan xerada barakacayaasha:** Odaygu waa mid si aad ah ula socda xaaladda, maadaama uu fahansan yahay xaaladda qoysaska degan xerada barakacayaasha oo doonaya in ay xal helaan. Waxa uu dareemayaa in siyaasadu ay muhiim tahay oo ay GWB ka doodaan sida ay ku xalin karaan dhibaatada.
- **Qof matelaya bulshada deegaanka ee ay caruurtoodu dugsiga dhigtaan ilaa iyo xilli hore** Waalidku si adag ayuu u shaqeeyey si ay u hubiyaan in ay caruurtoodu dugsiyada tagaan maadama uu si aad ah u dareemayo mustaqbalkooda. Waxa uu dareemayaa in dugsigu uusan caruurta caawin karin oo caruurta ka timi xeryaha barakacayaasha la doorbido in ay gurayaha ku noqdaan. Dugsiyada ku yaala Muqdisho ma qaadi karaan masuuliyada caruurta barakacayaasha, maadaama ay horey ula hardamayeen xaaladda abaaraha.
- **Xubno ka socda bulshada deegaanka iyo barakacayaasha:** Qof kasta oo ka socda bulshada deegaanka ama barakacayaasha waxaa loo ogolaaday in ay dhegaystaan dooda, sababtoo ah waa arrin muhiim u ah degmada. Waxaa loo ogolaaday inay su’aal weydiinyaan haddii ay su’aalo hayaan.

## Su’aalaha dooda

- Sidee ayey waxtar u tahay in la adeegsado labada siyaasadood si GWB loogala doodo dhibaatada haysata caruurta qoysaska barakacayaasha?
    - Haddii ay waxtar leeyihiin, sidee siyaasadu u caawisay?
    - Haddii aysan waxtar lahayn, maxaad sidaas u tiri?
- Tani ma ka dhacdaa xaaladda dhabta ah?
- Dooda ma ka soo baxday xalal wanaagsan oo caawin kara caruurta barakacayaasha in ay tagaan dugsiyada oo la taageero ardaydii horey dugsiyada u dhiganaysay?
- Ma jiraan wax kale oo dib loo milicsanayo oo ka soo baxay jilitaanka, taas oo ka caawinaysa ururada dadka naafada ah in ay taageeraan dugsiyada ka gudubka heerka waxbarashada ee loo wada dhan yahay.

# Agabka 6.2a: Sheekada Hodan

## Hodan waa 15 sano jir

Hodan waxa ay doonaysaa in ay dhigato dugsi sare. Waxa ay naafo ka tahay laf dhabarta. Waxa ay adeegsataa gaariga naafada oo hadalkeedu ma aha mid faseex ah. Hodan waalidkeed, ardayda ay isku fasalka yihiin iyo macallimiintu waxa ay awoodaan in ay la hadlaan oo fahmaan.

Hodan waa mid caqli iyo hami leh. Dugsigeeda hadda waxaa lagu sameeyey isku habayn, taas oo u sahashay in ay waxbarasho hesho.

Markii ay timi dugsiga sare, si loogala hadlo baahideeda hodan, macallinka aqbalaada dugsiga waxa uu wareystay Hodan oo waxa uu u malaynayaa in ay waxbarashadu ku adag tahay. Waxaa ku adkaatay in uu aqbalo, maadaama uu filayo in aysan laqabsan karin waxbarashada. Waxa kale oo uu leeyahay in kasta oo adeeyada dugsiga oo dhan loo heeli karo gaariga naafada, haddana ma awoodo in ay barato maadooyinka muhiimka ah, maadaama aysan tegi karin fasalada lagu barto.

### Dooda

- Maxay yihiin baahida hodan?
- Maxay yihiin istiraajiyadaha wax looga qaban karo baahideeda?
- Maxay samayn karaan dugsiga ama guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay ee dugsiga?
- Sidee ururda dadka naafada u taageeri karaan in ilmahaas iney guul ka gaarto ka gudbida heerka waxbarashada.

# Agabka 6.2b: Sheekada Yaasmiin

## Yaasmiin waa 9 jir

Yaasmiin hooyadeed waxa ay leedahay Yaasmiin waxay ahayd ilmo dhib badan oo mar kasta ooyeysa oo ay adkeyd in la dejiyo:'Waxa ay ahayd curadayda oo ma ogaan jirin markasta in aan samaynayo wax kasta oo sax ah. Markii ay gaartay 18 bilood, waxaan dareemay in ay wax ka khaldan yihiin, hase yeeshee ma garanyn waxa ay yihiin.  Waxa ay oran kartaa dhowr eray, taas oo u muuqata in ay hagaagsan tahay. Hase yeeshee uma muuqato in ay si fiican u cayaarto, waxa ay u muuqataa in ay waxyaabaha midba mar ku boodeyso oo weligeed waqti kuma qaadan   hal shay inay qabato. Waxaan u malaynayay in aan anigu wax khalad ah samaynayo.  Markii ay jirtay 3 sanno, hoyadeed waxa ay ogaatay in gabadheedu si wanaasgan ula falgelin caruurta. Waxa kale oo ay ogaatay in ay gabadheedu erayada isku dhex qasto oo ay waxyaabaha qaarkood aysan fahmin, oo aysan garanayn wax ay sameyso.

### Dooda

- Maxay yihiin baahida Yaasmiin?
- Maxay yihiin istiraajiyadaha wax looga qaban karo baahideeda?
- Maxay samayn karaan dugsiga ama guddiga waxbarashada loo wada dhan yahay ee dugsiga?
- Sidee ururda dadka naafada u taageeri karaan in caruurtu guul ka gaaraan ka gudbinta heerka waxbarashada.

# Agabka 6.2: Mabaa'diida muhiimka ah ee habsami u socod siinta ka gudubka heerka waxbarashada

- Ardayda oo dhan waxa ay xaq u leeyihiin oo mudan yihiin in ay si habsami ah uga gudbaan heerarka waxbarashada
- Xiriirka wanaagsan waa muhiim: ka gudubka heerka waxbarashada wuxuu ku salaysan yahay is aaminaad iyo is xaq dhowr ka dhexeeya caruurta, waalidka iyo dhammaan xirfadlayda ku lugleh hawsha.
- Arday kasta waa gooni: ka gudubka heerarka waxbarashadu waa in uu yahay mid dabacsan oo la xiriira baahida ardaygaas.
- Taageero isku xiran iyo xiriir wanaagsan oo u dhexeeya macallimiinta iyo ururada kale ayaa lama huraan ah.
- Deegaanka dugsiga oo ah mid taageeraya wada xiriir furan, is aaminaad ku saleysan iyo daacadnimo oo uu dhiirigaliyaa wadashaqeyn.
- Waqti ku filan iyo agab ayaa loo qoondeeyey si loo hubiyo aqbalaada, qiimeynta iyo u warbixintu inay tahay mid waxtar leh.
- Ardayda waa la dhegaystaa, si kasta oo ay u da' yaryihiin, si loo fahmo baahidooda iyo aragtidooda xisaabta lagu darsado.
- Qoysaska waa lagu daray qorshaynta: waalidka ama dadka caruurta haya ayaa ah meesha ugu muhiimsan ee xogta iyo taageeradu uu dugsigu ka helo.

# Agabka 6.3a: Kaararka Caqabadaha

Ka samee nuqulo oo kala jarjar kaararkaan oo sii koox kasta. Fadlan ogow kaararka bannaan, Macallimiintu waxa ay ku qori karaan caqabado, haddii ay ogaadeen inta lagu jiro dooda.

| | |
|---|---|
| Ma heli karo jid loo maro dugsiga cusub. | Gabar ahaan, hadda waan weynahay, oo waa in aan shaqo badan ka qabto guriga. Arrintaasi waxa ay keentay in aan dugsiga ka dib dhaco oo aan dhib la kulmo. |
| Waxaan ku wareersanahay jadwalka cusub. Meesha aan aadayo iyo goorta aasn aadayo? Waxaa la ii sheegaa in aan daahay. | Dugsigayga cusub wuu ka fog yahay gurigayga oo waxaan ka baqayaan in aan keligay aado. |
| Waalidkey ma fahansana in aan layliyada guriga uga shaqeeyo. Waxa ay rabaan in aan caruurta xanaaneeyo oo aan shaqada guriga wax ka qabto. | Macallimiintaydii dugsiga hore waxa ay qorsheeyeen sida ay iiga caawinayaan casharka. Dugsigayga cusub ma yaqaan arrintaas. Qorshaha taageerada oo dhan waa in dib loo bilaabaa mar kale. Waxaan ka rajaynayaa macallimiintaydii hore in qorshaha lagu soo daro. |
| Waalidkeyga in badan lagama qayb gelin dugsiga. Hadda waxa aan ahay fasal sare, hase yeeshee weli waxa aan doonayaa in waalidkey la hadlo macallimiinta marka aan dhib la kulmo. | Macallimiintu si kala duwan ayey wax u sameeyaan dugsiga. Waxa ay wax u dhigaan siyaabo kala duwan.  Lama qabsan karo waxa ay naga filanayaan. |
| Waan leygu qoslay maalintii ugu horeysay, sababtoo ah ma sidan jaakad. | Waalidkayga kama maqnaan karo maalinta oo dhan |

| | |
|---|---|
| Casharka waa lagu caajisayaa. Waxa aan baranayaa wixii aan ku soo bartay dugsigii hore. | Qof kasta waxa ay la tahay in aan 'weynahay' oo aan maareyn karo dugsigayga cusub. Weli waa cabsanayaa oo waan wareeray. |
| Waxaan doonayaa in aan dhigto dugsiga xirfadaha. Ma garanayo dugsiga loo wada dhan yahay ee ardayda baahiyaha gaarka ah leh. Ma jirto cid dugsigayga dhigata oo garanaysa. | Horey uma arag dugsigayga cusub ka hor maalintii ugu horeysay ee dugsiga. Waan cabsaday. |
| Waxa aan dhib ku qabaa akhlaaq daradeyda sida aan macallimka u weydiiyo marka aanan fahmin waxa layga rabo inaan qabto. | Waxaan ka welwelayaa in aanan helin saaxiibo cusub ama aanan si firfirciin uga qayb gelin dhacdooyinka dugsiga. |
| Ma dareemayo in aan dugsiga ka mid ahey. | Waa la ii cago jugleeyaa oo waan cabsanayaa xilliga nasashada iyo xilliga qadada |
| | Kaarar bannaan oo ay ka-qayb-galayaashu ku qori karaan caqabadaha haddii ay ogaadaan |
| | |

# Agabka 6.3b: Kaararka Istiraatiijiayda

Ka samee nuqulo oo kala jarjar kaararkaan oo sii koox kasta. Fadlan ogsoonow in ay kaararku leeyihiin midabo kala duwan ee Agabka 3.22. Kaararka bannaan, ka-qayb-galayaashu waxa ay ku qori karaan istiraajiyado dheeraad ah, haddii ay ogaadaan inta lagu jiro dooda.

| | |
|---|---|
| Ardayda cusub bar goobta oo sii khariidada oo isku dubarid taageeda ardayda isku faca ah (Tusaale, saaxiibka fasalka) si uu u caawiyo in ay helaan wadooyinka. | Marka aad dejinayso qorshaha horumarinta ardayga iyo qorshaha ka gudubka heerka waxbarashada, horey ula tasho waalidka/dadka caruurta haya.<br>Sii waalidka/dadka caruurta haya waraaqo ku saabsan waxa ay ka filanayaan iyo hawl-qabadyada ay iyaga iyo dugsigu samayn karaan si loo fududeeyo ka gudubka heerka waxbarashada. |
| Hubi in ay ardaydu taageeraan ardayda cusub oo dhan, oo waa in ardayda oo dhan ay og yihiin in laga filayo in ay caawiyaan ardayda kale, taas oo lagu abaal marinayo. | Awood u sii in ay macallimiintu booqdaan guryaha ardayda qaarkood si ay u ogaadaan baahiyahooda iyo nidaamka taageerada qoyska iyo bulshada. |
| Si diiran u soo dhowee waalidka/dadka caruurta haya oo sii xog ku saabsan aqbalaada inta aysan cunugu fasalka tegin.<br>Dhowr usbuuc ka dib, ku marti qaad caruurta cusub waalidkooda dugsiga si loola wadaago horusocodka ay ardaydu sameeyeen oo loo cadeeyo filashada dugsiga | Si dhaqso ah u abaal mari ardayda cusub ee sida adag wax isugu dayeysa ama si wanaagsan u samaynaysa wax kasta si ay ula qabsadaan jawiga.<br><br>Joogtee sannadka oo dhan taageerad ka gudubka heerka waxbarashada ee ardayda u baahan taageerada. |
| Fasalka ku soo dhowee waalidka/dadka caruurta haya(xannaanada) si ay caruurtooda uga caawiyaan la qabsiga. | Ka qayb geli waalidka/dadka caruurta haya marka la dejinayo qorshaha ka gudbida heerk waxbarashada iyo hawl-qabadyada. |

| | |
|---|---|
| Waa in uu jiro shaqaale xiriiriya ka gudbida fasalka ama dugsiga. | La xiriir ardayda si loo taageero ka hor ka gudubka heerka waxbarashada, inta lagu jiro iyo ka dib. |
| Isku dheelitir manhajka iyo habka waxbarista si aad u aqoonsatid aqoonta iyo khibrada ay leeyihiin ardayda cusub ka soo heleen dugsigoodii hore. | Abaabul in dusgiyada ay is dhaafsadaan macallimiinta. Tusaale ahaan, macallinka dugsiga cusub ee masuul ka ah ka gudbida heerka waxbarashada ee sannadka, isaga oo kaashanaya xiriiriyaha waxbarashada loo wada dhan yahay, oo ay booqdaan fasalada ardayda dugsiga ka gudbaysa si ay u ogaadaan ardayda oo ay uga jawaabaan su’aalahooda. |
| Hubi in la diiwaan geliyey qorshaha ardayga ee keli kelida ah oo lala wadaagay macallinka cusub ama dugsiga. | Deji qiimeyn bilow ah oo waxtar ah oo diyaari dhowr qodob oo ku saabsan dejinta bulshada iyo hiigsiga waxbarashada ee arday kasta oo cusub. Dhowr usbuuc ka dib, horusocodka dib u eeg. |
| Hubi in dugsiyada sare ay hayaan xog ku saabsan helitaanka dookh kala duwan oo waxbarasho oo loo dhan yahay ee jamacadeeda iyo xirfadaha. | Hubi in dugsiga sare, jaamacada iyo dugsiyada xirfaduhu ay bixiyaan kobcinta xirfada shaqada oo ay dhiirigeliyaan ardayda baahiyaha gaarka ah leh. |
| Taageer ardayga marka uusan wax fahmin, ogow in ardayda cusub ay hadal badan yihiin ama ay buuq badan yihiin marka ay yihiin xanaaqaan ama ama ay ku farxaanyihiin deegaanka cusub. | Hubi in ardayda cusub oo dhan laga qayb geliyey hal-abuurka iyo ciyaaraha ku jira manhajka iyo waqtiga dheeraadka ah, sidaas darteed si dhaqso ah ayay ula hawl geli karaan bulshada cusub, iyagoo dareemaya xamaasad oo waxa ay helayaan ujeeddada iyo guusha waxbarashada. |

| | |
|---|---|
| Ka caawi ardayda in ay booqdaan fasalka ka sareeyo ama dugsiga ay u gudbayaan, si ay u gartaan waxyaabaha ku harayraysan dugsiga, dadka iyo hab socodka ay marayaan inta aysan gudbin. | Hubi in macallimiintu ay si dhab ah uga war qabaan aqoonta hore ee arday kasta, taas oo ay taageerayso qiimeynta bilowga ah ee ardaysa cusub. |
| Ka taageer shaqaalaha sida ay ku hubinayaan in aysan ardaydooda ka dhigin kuwo go'doonsan ama ay ka duwanaadaan ardayda kale ee dugsiga. | Qorshee hawl-qabadka lagu dhisayo saaxiibtinimada usbuucyada ugu horeeya ee casharada. |
| Dugsiga waxa uu isku duba ridi karaa 'maalinta hordhaca' inta lagu jiro xilliga dugsiga ka hor ka gudbida heer waxbarashada. Maalintaas ardayda cusub waxa ay la kulmi karaan macallimiinta wax u dhigi doonta sannadka soo socda, khibrad u yeelan karaan cashadara qaarkood iyo in ay la kulmaan ardayda ay mustaqbalka isku fasalka yihiin ee dugsiyada kale. | Ka caawi ardayda cusub in ay maareeyaan waxbarashadooda oo ay si wada jir ah dib ugu milicsadaan khibradooda ka gudbida heerka waxbarashada.<br><br>Dugsiyada qaarkood waxa ay qabtaan dood xoogga saaraysa sida ay ardaydu dareemayaan iyo waxa ay uga dhigan tahay in ay ugudbaan dugsi cusub. |
| Deji siyaasad hagaagsan oo ka hortagta cago-juglaynta oo hubi in dadka shaqeeya xilliyada nasashada iyo qadada in loo sheegay ardayda cusub haddii ay jiraan. | Tababar shaqaalaha oo dhan si ay u taageeraan baahida koritaanka jirka, caadifada iyo baahida waxbarashada ardayda marka ay ka tagaan ama ay tagaan dugsi waxaadna siisaan qodobo ay tixraac ahaan u heystan suu u hago. |
| Hubi in ay ardayda ka soo jeeda qoysaska saboolka ah ay haystaan dharka dugsiga oo dheeraad ah | Xilliga nasashada/qadada sii cayaar habaysan. |

| | |
|---|---|
| Hubi in horey loogu sheegay ardayda cusub masuuliyadooda, si looga qayb geliyo in ay la sameeyaan hawl-qabadyada ardayda kale ee waaweyn, sida hawl-qabadyada ka baxsan manhajka, sida ciyaarta kubada, ururada ardayda, bandhiga dugsiga. | Dhegayso adayda cusub iyo kormeerahooda. Uqabo shir dib u eegis oo ay ku kulmaan dhawrka usbuuc ee ugu horeeya ka dib. Waa iyaga kuwa aqoonta u leh waxa ay tahay in la sameeyo xilliga ay dugsiyada ukala gudbayaan waana iyaga kuwa sida fiican u sheegi kara taageerada ay tahay in ayaga iyo kuwa kalaba helaan. |
| Hubi in arday kasta og yahay meesha uu aadayo (gaar ahaan xilliga nasashada) haddii ay cabsanayaan. | Kaararka bannaan oo ay ka-qayb-galayaashu ku qori karaan istiraajiyado dheeraad ah |
| | |
| | |